



# XISAAB

BUUGGA ARDAYGA  
FASALKA 4<sup>aad</sup>

XISAAB BUUGGA ARDAYGA  
Fasalka 4<sup>aad</sup>

ISBN 978-99944-2-190-9



JUMHURIYADA FADARAALKA DIMOQRAADIGA EE ITOOBIYA  
WASAARADDA WAXBARASHADA


MOE



JUMHURIYADA FADARAALKA DIMOQRAADIGA EE ITOOBIYA  
WASAARADDA WAXBARASHADA


# XISAAB

BUUGGA ARDAYGA  
Fasalka 4<sup>aad</sup>



Birr 47.60

## Buuggan Ilaali oo daryeel



Buuggani waa hantida Dugsigiina

Daryeel si aynan waxyeelo u gaadhin ama u lumen Hoos waxa kuxusan 10 fikradoo oo ah talooyin kaa caawinaya sidaad buugga u ilaa linaysid una daryeelaysid.

1. Buugga ku jaldiye jaldi ku haboon dhawrista sida Balaastiga waraqad adag sida magasinada la akhristoy.
2. Markasta meeshaad buuga dhigaysaa waa in ay ahaataa meel nadiif ah oo engagan.
3. Buugga marka aad isticmaalaysid waa in ay gacmahaagu nadiif ahaadaan.
4. Waxna ha ku qorin buugga jaldigiisa ama boggaga dhaxdiisa.
5. Isticmaal waraaqad yar ama kaardi yar markaad bog calaamadaysanaysid.
6. Waligaa ha ka jeexin ama haka gooyin sawir ama bog.
7. Boggaga jeexma ku kab. Xabag ama balastar.
8. Buugga markaad dugsiga u qaadanaysid boorsada ama shayga aad ku qaadanaysid qumaati u dhaxdhig si uunan u jacdadin ama u jajabin.
9. Buugga markaad qof kale u dhibaysid si taxadar leh ugu dhiib.
10. Buugga cusub marka ugu horeysa ee aad isticmaalkiisa bilaabaysid dhinicisa ay boggagiisa u dan beeya ay ku yaaliin u jiifi kadibna markiiba dhawr bog fur ama bannee. Marka aad bog rogaysid, Cidhifka uu ka taxan yahay gacanta kale ku yar xaji. sidaasina daryeelka jaldiga buugga ayey u wanaagsan tahay.



# XISAAB

## BUUGGA ARDAYGA

Fasalka 4<sup>AAD</sup>

### Qoraha

Daa'ud Aadam Cabdulaahi

### Qiimeeyayaal

Axmed Saalax Nuur

Axmed Yuusuf Nuur

Sayid Cismaan Caateeye



Jumhuriyada Dimoqraadiga Fadaraalka Itoobiya

Wasaarada Waxbarashada



Buugga waxa la daabacay 2002 E.C, Dajinta iyo soo saaridda buuggan waxa fuliyay wasaarada waxbarashada ee jumhuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya mashruuca hoos yimaad ee uqaybsan kor u qoodista iyo horumarinta tayada waxbarashada Guud oo taageero ka helay hayada IDA Credit No. 4535 ET oo ah the Fast Track Initiative catalytic fund iyo dawladaha Finland, Italy, Netherland iyo United Kingdom.

© 2011 wasaarad waxbarashada ee jumhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya. Xuquuqda buuggani way u dhawsan tahay. Buugga ama qayb ka mid ah buugga lama guurin karo lama daabici karo lamana baahin karo, iyada oo la adeegsanayo qalabyada eletirooniksa iyadoo ogolaansho qoraal ah aan laga haysanin wasaaradda waxbarashada ama liisan ka saamaxaya xeerka qodobka. No. 4/0/2004 ee xuquuqda daabaca oo ah maqaal ay jumhuritada Dimoqraaidiga Federaalka Itoobiya.

Wasaaradda waxbarashadu waxay u mahad naqaysaa shakhsiyadka iyo kooxaha si toos ah iyo si dadban uga qayb galay daabicista iyo soo bixitaanka buuggan.

Kuwa haysta ogolaashaha qoraalka lookiin lagu eedeyyo inay gaf ka galeen xuquuqda buugga. Waa in ay la xidhiidhaan xafiis waynaha wasaaradda Waxbarashada ee ku taala Arata kiilo. Adiss Ababa Itoobiya.

**Developed and Printed by**

STAR EDUCATIONAL BOOKS DISTRIBUTORS Pvt. Ltd.

24/4800, Bharat Ram Road, Daryaganj,

New Delhi – 110002, INDIA

**and**

ASTER NEGA PUBLISHING ENTERPRISE

P.O. Box 21073

ADDIS ABABA, ETHIOPIA

under GEQIP Contract No. ET-MoE/GEQIP/IDA/ICB/G-07/09.

**ISBN 978-99944-2-190-9**

# **Tusmada buuga**

## **CUTUBKA 1**

### **TIROOYINKA IDIL ILAA 1,000,00 ..... 1**

<b>1.1</b>	NAKHTIIN TIROOYINKA IDIL ILAA 10,000 .....	1
<b>1.2</b>	DHUFSANEYAASHA 1,000, 10,000 IYO 100,000.....	5
<b>1.3</b>	TIROOYINKA IDIL ILLAA 1,000,000 .....	10
<b>1.4</b>	QIIMA-RUGEEDKA TIROOYINKA IDIL EE 6 - GOD AH .....	13
<b>1.5</b>	ISBARBARDHIGIDDA IYO HORSANAANTA TIROOYINKA IDIL ILAA 1,000,000 .....	14
<b>1.6</b>	U RARISTA QIYASTA QIIMAHU UGU DHOW .....	17

## **CUTUBKA 2**

### **AFARTA XISAAAB FAL EE TIROOYINKA IDIL ILAA 1,000,000 ..... 23**

<b>2.1</b>	ISUGAYNTA IYO KALA GOYNTA TIROOYINKA IDIL ILLA 1,000,000.....	23
<b>2.2</b>	ISKUDHFASHADA TIROOYINKA IDIL EE TARANTOODU KA YAR TAHAY 1,000,000 .....	34
<b>2.3</b>	TIROOYINKA IDIL ILAA 1,000,000 OO LOO QAYBINAYO TIRO IDIL OO HAL-GOD AH IYO TIRADA 10 .....	43

## **CUTUBKA 3**

### **JAJABYDA IYO JAJAB-TOBANLEYAASHA ..... 50**

<b>3.1</b>	JAJABYO QAYBO WALAX IDIL .....	50
<b>3.2</b>	ISBARBAR DHIGIDDA IYO HORSANAANTA JAJABYADA LEH HOOSEEYE ISKU MID AH.....	53
<b>3.3</b>	ISUGEYNTA IYO KALAGOYNTA JAJABYADA LEH HOOSEEYE ISKU MID AH .....	55
<b>3.4</b>	JAJABYADA ISUDHIGMA .....	58
<b>3.5</b>	TOBAN-DALOOLADA, BOQOL DALOOLADA IYO JAJAB-TOBAN LAYAASHA .....	61
<b>3.6</b>	ISBARBAR DHIGIDA IYO HORSANAANTA JAJAB-TOBANLEYAASHA .....	68
<b>3.7</b>	ISUGEYNTA IYO KALA GOYNTA JAJAB-TOBANLEYAASHA .....	71

## CUTUBKA

### **CABBIRAADDA ..... 75**

<b>4.1</b>	CABBIRAADDA DHERERKA.....	75
<b>4.2</b>	CABBIRAADDA CULAYSKA.....	83
<b>4.3</b>	CABBIRAADA MUGGA DAREERAHA.....	90

## CUTUBKA

### **SHAXANNADA SALLAX IYO KUWA**

### **ADKAHA AH ..... 96**

<b>5.1</b>	XAGAL QUMMAN .....	96
<b>5.2</b>	BARAHA; XARRIIQAH TOOSAN IYO SALLAXYADA .....	99
<b>5.3</b>	WAREEGA IYO BEDKA LAYDIGA IYO LABAJIBBAARANAHА .....	101
<b>5.4</b>	ADKEYAASHA FUDUD .....	105

## CUTUBKA

### **WAQTIGA (AMMINTA) ..... 111**

<b>6.1</b>	SAACAD, DAQIQAD IYO ILBIRIQSI .....	111
<b>6.2</b>	XISAABINTA HALBEEGYADA WAQTIGA .....	113
<b>6.3</b>	ISBARBARDHIGIDDA HALBEEGYADA WAQTIGA .....	121

## CUTUBKA


### **URURINTA IYO HABAYNTA XOGAHA**

### **..... 124**

<b>7.1</b>	DHISIDDA GARAAF LAYDIYEEDKA .....	124
<b>7.2</b>	MACNAYNTA IYO SHARRAXIDDA XOGTA LAGU MUUJIYAY GARAAF LAYDIYEED .....	131
<b>7.3</b>	CELCCELISKA ILAA 4 TIRO .....	133

## Cutubka

# 1 aad



## TIROOYINKA IDIL ILAA 1,000,000

### Hordhac

Cutubkan waxaad ku baran doontaan tirooyinka idil ilaa 1,000,000. Hasa yeeshi marka u horaysa waxaan nakhtiimaynaa tirooyinka idil ilaa 10,000 ee aad ku soo barteen fasalka 3<sup>aad</sup>.

### 1.1 NAKHTIIN TIROOYINKA IDIL ILAA 10,000


#### 1.1.1 Akhrinta iyo Qoridda tirooyinka idil ilaa 10,000

### Shaqo kooxeed

- Astirooyinka iyo erayada tilmaamaya tiro isku mid ah isku aadiya

100	Toban kun
164	Sideed kun afar boqol iyo lixdan
1014	Toddoba kun
7000	Boqol
10,000	Hal kun toban iyo afar
8460	Halboqol lixdan iyo afar

- Tirada 1235 sidee ayaad u akhriyeysaan? (waa la adeegsan karaa sawirada Hoos ku xusan)



Sidaas darteed, marka la akhriyo (qoraal) \_\_\_\_\_ ayay noqonaysaa

### Laylis 1.1B

1 Tirooyinkan kor ugu dhawaaqa, dhawaaqyadooda kadibna u qor ereyo ahaan

- |           |                           |           |                         |          |      |          |      |
|-----------|---------------------------|-----------|-------------------------|----------|------|----------|------|
| <b>b</b>  | 34 <i>Soddon iyo afar</i> | <b>t</b>  | 234                     | <b>j</b> | 1234 | <b>x</b> | 3945 |
| <b>kh</b> | 7580                      | <b>d</b>  | 9706                    | <b>r</b> | 8029 | <b>s</b> | 6001 |
| <b>sh</b> | 4000                      | <b>dh</b> | 10,000 <i>Toban kun</i> |          |      |          |      |

2 Weedhahan dhaxdooda tirooyinka lagu tilmaamay astiro ku qora

- b** Ardayga xasan dhibciisa dhammaan wadartoodu waa siddeed boqol iyo kontan: 850

- t** Itoobiya waxay u dabaal dagtay miliniyaamkii labadii kun, \_\_\_\_\_

- j** Hal dugsi ardayda dhigataa ay tahay siddeedkun, shan boqol, soddon iyo lix \_\_\_\_\_

- x** Markii ugu horeysay ee oradka weyn ee Itoobiya waxaa ka qeyb galay orad yahano ka badan Toban kun: \_\_\_\_\_

- kh** Hal cusbitaal todobaad kii hore wuxuu u adeegay oo iska daweyey dad dhan toddoba kun, saddex boqol iyo labbatan? \_\_\_\_\_

- d** Faadumo musharka ay qaadato bishii waa saddex kun, shan boqoL iyo laba Birr: \_\_\_\_\_.

- r** Magaalada dhaxdeeda sagaal kun, toddoba boqol, siddeetan iyo siddeed Baabuur ah ayaa laga helaa? \_\_\_\_\_

- s** Hal magaalo dhaxdeeda afar kun iyo toddoba boqol, oo dad ah ayaa ku nooL: \_\_\_\_\_



### 1.1.2 Isbarbardhigidda tirooyinka idil ilaa 10,000

*Tirooyinka laba god ama wax kabadan leh sidee baynu Isbarbardhigi karnaa?*

#### Shaqo fasal 1.1B

Tirooyinka soo socda Isbarbardhiga, Hababka Isbarbardhigidda aad u adeegsateen u faah faahi saaxiibadaa.



- b** Tee ayaa wayn tirooyinkan? 610 iyo 611? \_\_\_\_\_
- t** Tee ayaa yar tirooyinkan? 355 iyo 1355? \_\_\_\_\_
- j** 7645, 6745 iyo 7654 tee ayaa ugu wayn? Tiradee baa ugu yar?

Marka aad Isbarbardhigaysaan laba tiro ee Tirooyinka idil, ha'iloobina adeegsiga tallaabooyinkan

Tallaabada 1:- Tirooyinka lagu siiyey haddii ay kala godad badan yihin, ka godadka badan ayaa ah tirada wayn.

## Tusaale 1

- b** 250 waxay ka wayn tahay 25, waayo 250 waa tiro 3 god ah, laakiin 25 waa tiro 2 god ah.  
Sidaa awgeed  $250 > 25$  250 way ka wayn tahay 25)
- t** 365 waxay ka yar tahay 2365, waayo 365 waa tiro 3 god ah laakiin 2365 waa tiro 4 god ah.  
Sidaa awgeed,  $365 < 2365$  (loo akhriyo 365 way ka yar tahay 2365)
- j** 9999 waxay ka wayn tahay 999, waayo 9999 waa tiro 4 god ah. laakiin 999 waa tiro 3 gad ah.  
Sidaaa awgeed,  $9999 > 999$  (loo akhriyo 9999 way ka wayn tahay tirada 999)

Tallaabada 2:- Labada tiro ee la isbarbar dhigayaa haddii tirada godadkoodu ay isle'egtahay markaas waxaan isbarbar dhigaynaa godadka isku dhigma (godka kunaadka ka kunnaadka, godka boqolaadka, ka goqolaadka IWM). Sidaa darteed tirada wayni waxay noqon laba god ee isku dhigma midka wayni tirada uu ku jiro.

## Tusaale 2

7654 iyo 7645 tee baa weyn?

Godka kunaadka ee labada tiro kee baa weyn? Sidaas darteed waxaan isbarbar dhigaynaa tirada godadka kunaadka.

7654      7645 Tirada godadka kunaadku ee labada tiro way isle'eg yihrin ( $7 = 7$ )  
 $\uparrow$   $7 = 7$   $\uparrow$

7654      7645 Tirada godadka boqlaad ku ee labada tiro way isle'eg yihin ( $6 = 6$ )  
 $\uparrow$   $6 = 6$   $\uparrow$

7654      7645 Tirada godadka tobnaad ku ee labada tiro way kala wayn yihin ( $5 > 4$ )  
 $\uparrow$   $5 > 4$   $\uparrow$

Sidaa darteed,  $7654 > 7654$

### Laylis 1.1 T

Sanduuqyada dhaxdooda galiya (ku buuxiya) calaamadaha “>”, amaa “<” amaa “=” midda ku haboon

- |           |               |           |               |           |                |
|-----------|---------------|-----------|---------------|-----------|----------------|
| <b>b</b>  | 250 □ 205     | <b>t</b>  | 856 □ 865     | <b>j</b>  | 2,000 □ 2,002  |
| <b>x</b>  | 5,005 □ 6,500 | <b>kh</b> | 7,800 □ 8,700 | <b>d</b>  | 5,555 □ 6,000  |
| <b>r</b>  | 9,242 □ 9,242 | <b>s</b>  | 9,999 □ 8,999 | <b>sh</b> | 9,880 □ 7,881  |
| <b>dh</b> | 4,444 □ 6,666 | <b>c</b>  | 7,335 □ 7,335 | <b>g</b>  | 9,999 □ 10,000 |

### 1.1.3 Hoorsanaanta tirooyinka idil ilaa 10,000

Haddii aan karti u yeelano isbarbardhigidda tirooyinka idil waxaan karti u yeelaneynaa in aan tirooyinka horsanaan isugu daba taxno. Inaga oo taxa ka bilaabayna ta yar ilaa ta weyn ama intaan ka bilowno ta weyn ilaa ta yar.

### Hawigalka 1.2 B

- 1 Idinka oo isuqeybinaya kooxo laba laba arday ka kooban, kooxkastaa ha diyaariso tobani tirooyinka idil ah oo shan ka mid ahi ay yihiin kuwa 3 god ah shanta kalena kuwa 4 god ah. Kadibna kooxaha idin garab fadhiya weydiya inay tirooyinka aad diyaariseen ay horsanaan u qoraan sidan hoos lagu tilmaamay
- b** ta yar ilaa ta weyn. **t** ta weyn ilaa ta yar.
- 2 Shaxdan hoose waxay inoo sharraxsaysaa tirada saddex dugsi ardaydooda.

D u g s i g a Magaciisa	T i r a d a ardayda
A	9545
B	900
C	9500

- Dugsigee ugu arday badan?
- Dugsigee ugu arday yar?
- Tirooyinka ardayda horsanaan u qor adiga oo kaga bilaabaya ta ugu weyn.

### Laylis 1.1. J

- 1 Tirooyinkan hoose horsanaan u qora ta weyn ilaa ta yar.

- |           |                    |            |            |            |
|-----------|--------------------|------------|------------|------------|
| <b>b</b>  | 500, 750, 975      | <b>975</b> | <b>750</b> | <b>500</b> |
| <b>t</b>  | 3254, 3244, 895    |            |            |            |
| <b>j</b>  | 3000, 7000, 10,000 |            |            |            |
| <b>x</b>  | 9776, 8978, 7776   |            |            |            |
| <b>kh</b> | 9050, 9000, 9950   |            |            |            |

## 1.2 DHUF SANEYAASHA 1,000, 10,000 IYO 100,000

### Hawl galka 1.2B

- 1 Sawirka hoos ku sawiran waa bohol (riiq) casri ah oo badarka lagu kaydiyo. Bohosho waxay qaadaa oo lagu kaydiyaa badar ilaa 1000 kg ah.
- 
- $1 \times 1,000 = 1,000$
- b 2 bohoshu oo lamid ahi imisa kiilogaraam oo badar ah ayey qaadi karaan?  
t 3 boholoodoo lamid ahi imisa kiilogaraam oo badar ah ayey qaadi karaan?
- 2 Soosaara taranta isku dhufashada
- |   |   |    |  |   |  |
|---|---|----|--|---|--|
| b | $4 \times 1000 = \underline{\hspace{2cm}}$  | t  | $5 \times 1000 = \underline{\hspace{2cm}}$ | j | $6 \times 1000 = \underline{\hspace{2cm}}$ |
| x | $7 \times 1000 = \underline{\hspace{2cm}}$  | kh | $8 \times 1000 = \underline{\hspace{2cm}}$ | d | $9 \times 1000 = \underline{\hspace{2cm}}$ |
| r | $10 \times 1000 = \underline{\hspace{2cm}}$ |    |  |   |  |


Sidaa awgeed 1000, 2000, 3000, 4000, 5000, 6000, 7000, 8000, 9000 iyo 10,000 waxaa layidhaahdaa dhufsanyaasha 1000.

#### U FIIRSADA

- 1 1000 marka lagu dhufto tiro kale oo ka duwan eber ‘O’ taranku waa tiradii oo xaga hore laga raaciyyay saddax eber (000)
- 2 Dhufsanyaasha kunka astirooyinka ku yaala godka koowaad, tobnaad, boqolaad iyo kunaad waa ebaro.

### 1.2.1 Dhufsanyaasha 10,000

Booyad waliba waxay qaadaa 10,000 litir oo biyo ah



## Hawlalka 1.2 T

Soo saara taranta

**b**  $4 \times 10,000 = \underline{\hspace{2cm}}$     **x**  $7 \times 10,000 = \underline{\hspace{2cm}}$     **r**  $10 \times 10,000 = \underline{\hspace{2cm}}$

**t**  $5 \times 10,000 = \underline{\hspace{2cm}}$     **kh**  $8 \times 10,000 = \underline{\hspace{2cm}}$     **j**  $6 \times 10,000 = \underline{\hspace{2cm}}$

**d**  $9 \times 10,000 = \underline{\hspace{2cm}}$

Sidaa awgeed **10,000, 20,000, 30,000, 40,000, 50,000, 60,000, 70,000, 80,000, 90,000** iyo **100,000** waxaa layidhaahdaa dhufsaneyaasha **10,000**

Dufsaneyaasha **10,000** si aadu heshid mataqaanaa waxaad samayn?

### 1.2.2 Dhufsaneyaasha 100,000

Halka Gaadhi haddii qiimihiisu yahay 100,000 birr, 4 gaadhi oo iskumid ah imisa ayay qiimahoodu noqonayaan?



Dhamaantood in ay noqdaan kuwayga 400,000 Birr miyay ku filan tahay?



$$100,000 + 100,000 + 100,000 + 100,000 = 4 \times 100,000 = \underline{\hspace{2cm} 400,000}$$

Sidaas awgeed 4 Gaadhi oo isku mid ah Qiimahoodu waa **400,000** birr.

400,000 waa dhufsanaha 100,000 waayo  $4 \times 100,000 = \underline{\hspace{2cm} 400,000}$  weeyaan

## Shaqofasal 1.2J

Soo saara taranta

**b**  $1 \times 100,000 = \underline{\hspace{2cm}}$

**t**  $2 \times 100,000 = \underline{\hspace{2cm}}$

**j**  $3 \times 100,000 = \underline{\hspace{2cm}}$

**x**  $4 \times 100,000 = \underline{\hspace{2cm}}$

**kh**  $5 \times 100,000 = \underline{\hspace{2cm}}$

**d**  $6 \times 100,000 = \underline{\hspace{2cm}}$

**r**  $7 \times 100,000 = \underline{\hspace{2cm}}$

**s**  $8 \times 100,000 = \underline{\hspace{2cm}}$

**sh**  $9 \times 100,000 = \underline{\hspace{2cm}}$

**dh**  $10 \times 100,000 = \underline{\hspace{2cm} 1,000,000}$

**1,000,000**

Waxaa loo akhriyaa  
Hal milyan

Sidaa awgeed **100,000, 200,000, 300,000, 400,000, 500,000, 600,000, 700,000, 800,000, 900,000** iyo **1,000,000** waxa layidhaa dhufsaneyaasha **100,000**.

Dufsaneyaasha 100,000 habka loo helo ma taqaanaa?

**Laylis 1.2B**

**1** Buuxiya shaxda

Dhufsaneyaasha 1000	1,000				5,000				
Dhufsaneyaasha 10,000			30,000						
Dhufsaneyaasha 100,000									900,000

**2** Kajawaab Weedh – Xisaabeedyadan

- b** Caasha mushaarkeedu waa 1000 Birr bishii, Imisa Birr ayay noqonayaan shanta billood?
- t** Halkii barmiil (foosto) oo biyaha lagu kaydiyo haddii ay qaaddo 1000 litir oo biyo ah, toban foosta (barmiil) imisa litir oo biyo ah ayay qaadaan?
- j** Hal bakhaar ayaa wuxuu qaadaa 10,000 kiintaal oo qamadin ah, 4 bakhaar oo lamid ah imisa kiintaal oo qamadin ah ayay qaadayaan?
- x** Haddii orod yahanka Qananiisa Baqala hal tartan, 10,000 mitir uu ordo, 6 tartan oo lamid ah imisa mitir ayuu ordi qananiisa?
- kh** Hal guri qiimihiisu haddii uu yahay 100,000 Birr markaa 3 guri oo lamid ah qiimahoodu imisa ayuu noqonayaa?

### 1.2.3 Isugeynta iyo kalagoynta Dhufsaneyaasha 100, 10,000 iyo 100,000


#### Tusaale 1

Urur iskaashato beeray ah ayaa sanadkii u horeeyay beeratay dhulbeereed bedkiisu yahay 20,000 hektaar. Sanadkii labaandna waxay beeratay dhulbeereed bedkiisu yahay 30,000 hektaar hadaba labada sanadoo iskaashatadu dhamaan dhulka ay beeratay bedkiisu waa imisa?

$$20,000 + 30,000 = \underline{\hspace{2cm}}$$

Shaxda qiima-rugeedku				
Godka toban kunnaadka	Godka kunnaadka	Godka boqoloodka	God ka tobanaadku	Godka koo- waadka
+	2	0	0	0
	3	0	0	0
	<b>5</b>	<b>0</b>	<b>0</b>	<b>0</b>





Sidaas darteed ururka ikaashatadu labada sano waxay beeratay dhulbeereed bedkiisudhan yahay 50,000 hektaar.

## Tusaale 2

Hal magaalo dhexdeeda tirada dadka ku nool waa 500,000. Dadkaas 100,000 ka mid ahi waxay galaan oo ay ku nool yihiin guryo ay iyagu iskood u leeyihiin. Dadka inta kale waxay galaan oo ay ku nool yihiin guryo kiro ah. Tirada dadka guryo kiro ah ku nooli waa imisa?

- 500,000** ← Lagagooye
- **100,000** ← Goosane (lagooye)
- 400,000** ← Faraq

Sidaas darteed tirada dadka guryo kiro ah ku nooli waa 400,000.

### Laylsi 1.2T

#### 1 Isugeeya

- |   |   |
|---|---|
| <b>b</b> $1000 + 500 = \underline{\hspace{2cm}}$        | <b>t</b> $2000 + 6000 = \underline{\hspace{2cm}}$     |
| <b>j</b> $40,000 + 10,000 = \underline{\hspace{2cm}}$   | <b>x</b> $70,000 + 20,000 = \underline{\hspace{2cm}}$ |
| <b>kh</b> $400,000 + 50,000 = \underline{\hspace{2cm}}$ | <b>d</b> $600,000 + 4,000 = \underline{\hspace{2cm}}$ |

#### 2 Kalagooya

- |  |   |
|--|---|
| <b>b</b> $4000 - 3000 = \underline{\hspace{2cm}}$        | <b>t</b> $9000 - 3000 = \underline{\hspace{2cm}}$       |
| <b>j</b> $70,000 - 20,000 = \underline{\hspace{2cm}}$    | <b>x</b> $80,000 - 70,000 = \underline{\hspace{2cm}}$   |
| <b>kh</b> $200,000 - 100,000 = \underline{\hspace{2cm}}$ | <b>d</b> $600,000 - 400,000 = \underline{\hspace{2cm}}$ |

## 1.2.4 Isbarbardhigidda Dhufsaneyaaasha 1000, 10,000 iyo 100,000

### Shaqa fasal 1.2 J

Ka jawaaba idinka oo sababeynaya jawaabihiina.

- b** Kee baa weyn, 1,000 Birr, iyo 2,000 bir,
- t** Kee baa yar, 5000 Birr iyo 10,000 Birr

- j** Kee baa bug badan maktabad leh buug 7,000 ah iyo maktabada leh buug 70,000 ah?
- x** Tee baa ummad badan, magaalo ay ku nooshahay ummad 90,000 ah iyo magaalo ay ku nooshay ummad 100,000 ah?
- kh** Wabigee ugu dherer laba wabi oo dhererka midkood yahay 800,000 mitir, ka kalena dhererkisu yahay 1000,000 mitir?

## 1.3 TIROOYINKA IDIL ILAA 1,000,000

### 1.3.1 Isugeynta tiro idil iyo dhufsanaha 1000, 10,000 ama 100,000 Tirooyinka idil

#### Tusaale 3

Isugee 1325 + 1000

Tirooyinka idil markaan isugaynayno inta aan ka bilawno godka koowaadka ayaan god walba astirooyinka ku yaala qiimahooda isugeynaynaa.

Talaabo 1	Talaabo 2	Talaabo 3	Talaabo 4
Isugeeya qiimaha astirooyinka koowaadka	Isugeeya qiimaha astirooyinka tobanaadka	Isugeeya qiimaha astirooyinka boqolaadka	Isugeeya qiimaha astirooyinka kunaadka.
1325 + 1000 5	1325 + 1000 25	1325 + 1000 325	1325 + 1000 2325

#### Tusaale 4

Isugeeyya: 24016 + 70,000

$$\begin{array}{r}
 24,016 \\
 + 70,000 \\
 \hline
 94,000
 \end{array}$$

6 + 0 = 6  
 1 + 0 = 1  
 0 + 0 = 0  
 4 + 0 = 4  
 2 + 7 = 9

Sidaas darteed  $24,016 + 70,000 = 94,016$

### Laylis 1.3B

**1** Isugeeyaa

$$\begin{array}{r} \text{b} \\ + \\ 5,000 \\ \hline 4,325 \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \text{t} \\ + \\ 4,002 \\ \hline 6,000 \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \text{j} \\ + \\ 9,000 \\ \hline 1,909 \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \text{x} \\ + \\ 24,016 \\ \hline 30,000 \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \text{kh} \\ + \\ 95,649 \\ \hline 20,000 \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \text{d} \\ + \\ 40,000 \\ \hline 45,310 \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \text{r} \\ + \\ 200,000 \\ \hline 32,223 \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \text{s} \\ + \\ 400,000 \\ \hline 55,678 \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \text{sh} \\ + \\ 700,000 \\ \hline 4,537 \end{array}$$

### 1.3.2 Akhrinta iyo Qorista Tirooyinka Idil ilaa 1,000,000

#### Hawl fasal 1.3

Idinka oo sawirka adeegsanaya, buuxiya saduuqyada; su'aalahana ka jawaaba.



- 1**  $43,782 = \boxed{40,000} + \boxed{\quad} + \boxed{\quad} + \boxed{\quad} + \boxed{\quad}$ . Tirada 43,782 astirooyinka ay ka kooban tahay ufiirsada. Kadibna kajawaaba su'aalahana hoose.
  - b** Tilmaama astirada ku taala godka koowaadka, godka tobnaadka godka boqolaadka iyo godka kunaadka.
  - t** Astirada 4 godkee bay ku taalaa?
- 2**  $43,782 = \boxed{4}$  toban kunaad +  $\boxed{\quad}$  kunaad +  $\boxed{\quad}$  boqolaad +  $\boxed{\quad}$  tobnaad +  $\boxed{\quad}$  koowaad.
- 3** Idinka oo ku dhawaaqaya akhriya tirada 43,782.
- 4** 43,782 erayo (xuruuf ahaan) ku qora.

#### Tusaale 5

Tirada 235,609 sidee ayaa loo akhriyaa?

Tirada 235,609 dhaxdeeda waxa ku jirta oo ay leedahay

$$2 \text{ boqol kunaad} = 2 \times 100,000 = 200,000$$

$$3 \text{ toban kunaad} = 3 \times 10,000 = 30,000$$

Tirada 235,609 dhaxdeeda ku taala godka

koowood waa tee?

Godka tobnaadka se?

Godka boqolooadka se?

Godka kunnaad ka se?

Astirada 3 godkee ayey ku taalaa?


Astirada 2 godkee ayey ku taalaa?

$$5 \text{ kunaad} = 5 \times 1000 = 5000$$

$$6 \text{ boqolaad} = 6 \times 100 = 600$$

$$0 \text{ tobnaad} = 0 \times 100 = 0 \text{ iyo}$$

$$9 \text{ koowaad} = 9 \times 1 = 9$$



Sidaas darteed 235,609 waxa loo akhriyaa laba boqol sodon iyo shan kun lix boqol iyo sagaal.

### Laylis 1.3T

- 1 Idinka oo ku dhawaaqaya akhriya

<b>b</b>	8795	<b>t</b>	10,604	<b>j</b>	19,590	<b>x</b>	25,805
<b>kh</b>	89,902	<b>d</b>	99,102	<b>r</b>	102,455	<b>s</b>	238,506
<b>sh</b>	472,658	<b>dh</b>	359,062	<b>c</b>	763,000	<b>g</b>	99,999

- 2 Tirooyinkan eray (Tiraab) ahaanta u qoran astatiro kuqor.

- b** Toddoba kun sided boqol sodon iyo shan \_\_\_\_\_
- t** Afartan iya sided kun afar boqol iyo laba \_\_\_\_\_
- j** Afartan iyo shan kun saddex boqol toddobaatan iyo hal \_\_\_\_\_
- x** Sagaashan iyo lix kun siddeed boqol afartan iyo afar \_\_\_\_\_
- kh** Hal boqol iyo sodon kun saddex boqol toddabaatan iyo laba \_\_\_\_\_

## 1.4 QIIMA-RUGEEDKA TIROOYINKA 6-DA GOD AH EE TIROOYINKA IDIL

### Tusaale 1

Tiradan 24

$$2 \text{ Tobnaad iyo } 4 \text{ koowaad} = 20 + 4 = 24$$

Shaxda Qiimo Rugeedka					
Gudka boqol kunaadka	Godka tobakunaadka	Godka kunaadka	Godka boqolaadka	Godka tobnaadka	Godka koowaadka
				2	4

24 marka la akhriyo waa labaatan iyo afar

Godka 2 qiiimaha uu utaagan yahay waa

$$2 \times 10 = 20$$

Godka 3 qiiimaha uu utaagan yahay waa

$$4 \times 1 = 4$$

## Tusaale 2

Imika marlabaad tirada 1234 aynu ufiirsano

1 kunnaad + 2 boqlaad + 3 tobnaad + 4 koowaad

$$1000 + 200 + 30 + 4 = 1234$$

Shaxda Qiima Rugeedka					
Godka boqol kunaadka	Godka tobantunaadka	Godka kunaadka	Godka boqolaadka	Godka tobnaadka	Godka koowaadka
		1	2	3	4

1234 marka la akhriyo waa

Kun, laba, boqol, soddon iyo afar

Tirada 1234 dhexdeeda

- Godka 1 qimahiisu waa  $1 \times 1000 = 1000$
- Godka 2 qimahiisu waa  $2 \times 1000 = 2000$
- Godka 3 qimahiisu waa  $3 \times 10 = 30$
- Godka 4 qimahiisu waa  $4 \times 1 = 4$

### Laylis 1.4

1 Tirooyinka idil shaxda qiima rugeed ka markaad ku dul qortiin dabaded akhriya.

Tiro idil	Godka kunnaadka	Godka kunnaadka	Godka kumaadka	Godka boqoolaadka	Godka tobnaadka	Godka koowaadka
3,582			3	5	8	2
54,629						
87,006						
850,345						
995,321						
890,405						

2 Soo saar qiiimahaastirada qalinka midabka cassanka lagu qoray.


b	7,654	t	2,684	j	37,654	x	56,890
kh	345691	d	390,120	r	605,334	s	896,459
sh	890,552	dh	872,007				

## 1.5 ISBARBARDHIGIDDA IYO HORSANAANTA TI- ROOYINKA IDIL ILAA 1,000,000

Ma ogtahay magaaladeena  
dhaxdeeda in tirade haweenku  
ay tahay 550,700 tirada ragguna  
ay 555,000 tahay?

Ma garanayo:  
Bal an ku weydiyo ee middee badan  
tirada raggaa mise ta haweenka?

Fooqee ayaa  
ugu dheer?



### 1.5.1 Isbarbardhigidda Tirooyinka idil ilaa 1,000,000

*Ma xasuusan tiihin haatan ka hor tabaha aad isticmaasheen markaad isbarbardhigayseen tirooyinka idil?*

#### Shaqo kooxed 3

Dhinaca middigta waxaa ku yaala saddex gaadhi sawirka taargadooda. Saddexda gaadhi ka hor soconaya haddii laga dhigo ka ay tirada taargadiisu ugu yar tahay ka u dambaynayaana uu noqdo ka tirada taargadiisu ay ugu weyntahay kee baa xaga hore mari? Keebaase ugu dambayn?



#### Tusaale 1

- b** 45,250 way ka weyntahay tirada 5,250 waayo 45,250 waa tiro 5 god (5 astiro) leh.  
Tirada 5,250 na waa tiro 4 god (4 astiro) leh.  
Sidaas darteed  $45,250 > 5,250$
- t** 67,893 way ka yar tahay 123,480. Waayo 67,893 waa tiro 5-godle ah. 123,480 na waa tiro 6-godle ah.

Sidaas darteed  $67,893 < 123,480$

Labada tiro ee la isbarbar dhigayaa haddii tirada godadkoodu ay isku mid tahay.

Dhinaca bidixda inta aan ka bilawno ayaan godadka isku dhigma (beegma) qiimahooda isbar bardhigaynaa ilaa intaan helayno godad ay ku kala duwan yihiin.

## Tusaale 2

Isbarbardhiga 456,893 iyo 457,203

### Jawaab

Astirooyinka dhinaca bidixda ku taala ee isku rugta ah ayaan isbarbar dhigayna.

- |                  |  |
|------------------|--|
| 456893    457203 | Qiimaha astirooyinka ku beegan boqol kunnaadka markaan<br>↑ 4 = 4 ↑ isbarbardhigno labadoodaba way isle'egyiin (4 = 4)         |
| 456893    457203 | Qiimaha astirooyinka ku yaala toban kunnaadka marka la<br>↑ 5 = 5 ↑ isbarbardhigo hatan na labadooduba way isle'egyin (5 = 5). |
| 456893    457203 | Qiimaha astirooyinka ku yaala kunnaadka marka la<br>↑ 6 < 7 ↑ isbarbardhigo way kala duwan yihiin. 6 < 7                       |

Sidaas darteed, 456,893 < 457, 203

### Laylis 1.5B

**1** Weedhahan hoos ku xusan kala saara idinka oo ku jawaabaya ‘run’ ama ‘been’.

**b** 256 > 2765                      **t** 1390 > 1399                      **j** 75,300 < 78,300

**2** Idinka oo meelaha bannaan ku buuxinaya calaamadaha >, < ama = isbarbardhiga.

**b** 5600 \_\_\_\_ 1500                      **t** 50,005 \_\_\_\_ 50,650                      **j** 112,200 \_\_\_\_ 210,300

**x** 367, 980 \_\_\_\_ 368,900              **kh** 804, 572 \_\_\_\_ 904,569              **d** 989,765 \_\_\_\_ 785

## 1.5.2 Horsanaanta tirooyinka idil ilaa 1,000,000

Horsanaan u dhigista ama u qorista tirooyinka idil waxay ka dhigan tahi tirooyinka oo la is daba taxo inta laga bilaabo ta yar ilaa ta weyn ama inta laga bilaabo ta weyn ilaa ta yar. Marka tirooyinka horsanaan looqoro iyada oo laga bilaabayoo ta yar ilaa ta weyn waxaan dhahaynaa waxaa loo qoray Horsanaan Fanata ah sidoo kale marka loo qoro iyadoo, laga bilaabayoo ta weyn ilaa ta yar waa Horsanaan Degta ah.

## Tusaale 3

Warshad wax soosaarka caanaha ka shaqaysa ayaa todobaadkii hore soo iibsatay caano dhan 378,000 litir, todohaadkii labaadna 468,500 litir, todobaadkii saddexaadna 370,000 litiroo caana ah. Hadaba warshadu todobaad kee bay soo iibsatay caanaha ugu badan? Tirada litirada caanaha ee ay warshadu soo iibsatay waxaad u qortaan Horsanaan Degta ah (ta ugu weyn ilaa ta ugu tar).



## Jawaab

Isbarbardhiga

468,500 > 378,000 waayo 4 > 3

378,000 > 370,000 waayo 8 > 0

Sidaas darteed, 468,500 > 378,000 > 370,000 sidaas awgeed 468,500, 378,000, 370,000 taas oo ah horsanaan ta ugu weyn ilaa ta ugu yar. Horsanaantan waxaa loo yaqaanaa Horsanaan Degta ah.

Warshadu caano muggisu weyn yahay waxay iibsatay toddobaadkii labaad. Toddobaadkay caano muggisu yar yahay iibsatay na waa toddoobaadka saddexaad.

## Laylis 1.5T

- 1** Tirada weyn idinka oo ka bilaabaya horsanaan u qora ta weyn ilaa ta yar

**Ta weyn Ilaa ta yar**

<b>b</b>	9,450	7,899	8,950	<b>9,450</b>	<b>8,950</b>	<b>7,899</b>
<b>t</b>	25,377	52,540	52,500			
<b>j</b>	254,452	254,542	254,425			
<b>x</b>	356,477	356,747	357,700			

- 2** Tirada yar idinka oo ka bilaabaya horsanaan u qora.

**Ta yar Ilaa ta weyn**

<b>b</b>	34,402	34,204	34,042	<b>34,042</b>	<b>34,204</b>	<b>34,402</b>
<b>t</b>	25,377	52,450	52,500			
<b>j</b>	52,4452	52,4542	52,4425			
<b>d</b>	909,999	989,999	999,999			

- 3** Labada tiro ee la idin siiyay tirada idil (ama tirooyinka idil) ee u dhaxeeyaa raadsha.

<b>b</b>	105,550	105,553	Jawaab	<u>105,551 iyo 105,552 waa tirooyinka u dhaxeeyaa</u>
<b>t</b>	240,669	240,672		_____
<b>j</b>	521,743	521,745		_____
<b>x</b>	879,998	880,001		_____
<b>kh</b>	999,997	1,000,000		_____

## 1.6 U RARISTA QIYAASTA QIMAHU UGU DHOW



### Shaqo kooxeed 4


Weydiimahan hoose kuwa la mid ah haddii la idin weydiyo sidee ayaad uga jawaabysiin?

- Ciyaarta kubbada cagta ee ka socota garoonka kubbada cagta dadka daawanaya tiradoodu waa imisa?
  - Barri imisa saac ayaad dugsiga imaneysaa?
  - Magaalada aad ku nooshahay tirada dadkeedu waa imisa?
  - Fogaanta u dhaxaysa gurigiina iyo dugsigiina waa intee?
  - Geedkaas dhererkiisu intee ayuu noqon?
  - Dugsigiina ardayda wax ka barataa waa imsia?
- Weydimahan oo kale marka laga jawaabayo inta u badan wax runta u dhow oo ah e qiyas ama malayn udhow xaqiiqada dhabta ah ama dhabta ah ayaa lagu jawaabaa.


### 1.6.1 U rarista tirooyinka idil tobnaadyada boqolaadyada kunnaadyada tobankunnaadyada iyo boqol kunnaadyada

#### Hawolgal 1.6

1 12 tiradee bay u dhowdahay? 10 mise 20?



3 473 tiradee ayay u dhowdahay? 400 mise 500.



**Tiro idil marka aan doono in aan u rarno ama aan u dhawayno rugaha tirooyinka sida tobnaadyada boqolaadyada iyo wax lamid ah talaabooyinkan hoose ayaan ku hir galinaynaa,**

**Talaabada 1<sup>aad:</sup>** Sooc rugta loo raraayo tirada

haddii loo raraayo tobnaad sooc godka (astiraha) ku yaala rugta tobanaadka  
haddii loo rarayo boqlaad sooc godka (astiraha) ku yaala rugta boqlaadka haddii  
loo rarayo kunnaadka sooc sooc godka (astiraha) ku yaala rugta ka kunnaadka.

**Talaabada 2<sup>aad:</sup>** Sooc godka (ama astiraha) dhinaca midig ka xiga rugta la rabo in loo raro (dhaweyyo).

**Talaabada 3<sup>aad:</sup>** Godku (astirahu) haddii uu ka yar yahay 5 tirada la siiyay kahoreeyaheeda ee ah dhufsanaha 10, ama dhufsanaha 100, ama dufsanaha 1000, kolba siday tiradu tahay ayaan u raraynaa (dhawaynaynaa). Godku (astirahu) haddii uu 5 yahay ama uu 5 ka weyn yahay (5, 6, 7, 8 and 9) tirada la siiyay waxaan uu raraynaa kadanbeeyaha ee ah dhufsanaha 10 dhufsanaha 100 kolba tiradu siday tahay.

## Tusaale 1

1 2473 uraara (udhaweeya) tobnaad

### Jawaab

**Talaabada 1<sup>aad:</sup>** 2473 godka (astiraha) ku yaala rugta tobnaadku waa 7)

**Talaabada 2<sup>aad:</sup>** 2473 (rugta tobnaadka godka (astiraha) dhinaca midigta ka xigaa waa 3)

**Talaabada 3<sup>aad:</sup>**  $3 < 5$  sidaas darteed tirada 2473 ee inala siiyay waxaan u raraynaa (u dhaweynaynaa) kahoreeyaheeda ee ah dhufsanaha 10. Taas oo ah 2470

Sidaas darteed qiimaha udhow 2473 ee tobnaadka waa 2470.



Marka la qorayo waxa loo qoraa,  $2473 \approx 2470$

“≈” waa calaamada ama sumadda loo adeegsado marka la qorayo qiimaha ugu dow.

## Tusaale 2


2 2473 udhaweeya (urara) kunnaad.

### Jawaab

**Talaabada 1<sup>aad</sup>:** 2473 (godka astiraha ku yaala rugta boqolaadka waa 4)

**Talaabada 2<sup>aad</sup>:** 2473 (rugta boqolaadka godka astiraha dhinaca midgta ka xigaa waa 7)

**Talaabada 2<sup>aad</sup>:**  $7 > 5$  Sidaas darteed tirada 2473 waxaan u dhaweynaynaa kadambeeya-heeda ee ah dhufsanaha 100, taaso ah tirada 2500.



Sidaas darteed  $2473 \approx 2500$

### Tusaale 3


**3** 2473 udhaweeya (urara) boqolaad.

### Jawaab

**Talaabada 1<sup>aad</sup>:** 2473 (godka (astiraha) ku yaala rugta kunnaadka waa 2)

**Talaabada 2<sup>aad</sup>:** 2473 (rugta kunnaadka godka astiraha dhinaca midgta ka xigaa waa 4)

**Talaabada 3<sup>aad</sup>:**  $4 < 5$  Sidaas darteed tirada 2473 waxaan u dhaweynaynaa kahoreeyaha-heeda ee ah dhufsanaha 1000, taaso ah tirada 2000.



Sidaas darteed,  $2473 \approx 2000$ .

### Tusaale 4

**4** Tirada 478,508 u dhaweeya toban-kunnaad.

### Jawaab

**Talaabada 1<sup>aad</sup>:** 478,508 (godka astiraha ku yaala rugta ka toban-kunnaadku waa 7)

**Talaabada 2<sup>aad</sup>:** 478,508 (rugta toban-kunnaadka godka astiraha dhinaca middigta ka xigaa waa 8)

**Talaabada 3<sup>aad</sup>:**  $8 > 5$  sidaa darteed tirada la ina siiyay waxaan udhaweynaynaa kadambeeyaha-heeda ee ah dhufsanaha 10,000 taas oo ah tirada 480,000.



Sidaas darteed,  $478,508 \approx 480,000$

## Tusaale 5

**5** Tirada 478,508 u dhaweeya (u rara) boqol-kunnaad.

### Jawaab

**Talaabada 1<sup>aad</sup>:** 478,508 (godka astiraha ku yaala rugta boqol-kunnaadka waa 4)

**Talaabada 2<sup>aad</sup>:** 478,508 (rugta boqol-kunnaadka godka astiraha dhianca midigta ka xigaa waa 7)

**Talaabada 3<sup>aad</sup>:**  $7 > 5$  sidaas darteed tirada la ina siiyay waxaan u dhaweynaynaa kadam-beeyaheda ee ah dhufsanaha 100,000 taas oo ah 500,000.



Sidaas darteed,  $478,508 \approx 500,000$

## Laylis 1.6


Idinka oo tirooyinka u dhawaynaya (u raraya) qiiamaha rugta la tilmaamay shaxahan hoose buuxiya.

1	Tiro idil	Tobnaad u dhaweeya (urara)	Boqolaad u dhaweeya (urara)	Kunnaad udhaweeya
b	2348			
t	56754			
j	89987			
x	45528			
kh	525905			
d	933273			

2	Tiro idil	Tobnaad udhaweeya	Boqolaad udhaweeya	Kunnaad udhaweeya	Toban kunnaad udhaweeya	Boqol-kunnaad udbawee
b	412,317					
t	555,705					
j	656,754					
x	744,392					
kh	789,986					
d	845,529					

Cutubka

2aad



## AFARTA XISAAB FAL EE TI- ROOYINKA IDIL ILAA 1,000,000

### 2.1 ISUGAYNTA IYO KALA GOYNTA TI- ROOYINKA IDIL EE ILAA 1,000,000

#### 2.1.1 Isugeyn

##### B Isugeyn aanaan lahayn Qaadahso

###### Hawlgal 2.1.B

Cabdilaahi waa beeroole dadaal badan. Shaqada beerta kasakaw xoolaha inta uu xanaaneeyo ayuu u iib geeyaa suuqa xoolaha. Maalin maalmaha ka mid ah wuxuu suuqa xoolaha u iib geeyay laba dibi oo uu ku iibiyey 4354 birr iyo 3325 birr. Hadaba waa imisa wadarta lacagta uu ku iibiyay?



#### Tusaale 1

Degmo ayaa tirada dadka ku nooli ay dhan tahay 21,352. Degmo kale oo deriskeeda ahna waxaa ku nool dad tiradoodu dhan tahay 8537. Hadaba labada degmo tirada dadka ku nooli guud ahaan waa imisa?

$$21,352 + 8537 = \underline{\hspace{2cm}}$$

	Godka toban kunaandka	Godka kunnadka	Godka boqolaadka	Godka toan aadka	Godka koowaadka
• Biirooyinka ayaan joog isku hoos dhigaynaa inaga oo isku simayna astirooyinka qiima rugeedkoodu isku mid yahay. Astiraha qiima rugeedka koowaadka waxa lala simi oo la hoos dhigi astiraha qiima rugeedka koowaadka ku yaala astiraha qiima rugeedka tobnaadka ka qiima rugeedka tobnaadka. Sidookale astiraha qiima rugeedka boqolaadka waxaa la hoos dhigi ka qii mu rugeedka boqolaadka IWM.	2	1	3	5	2
• Marka uhoraysa isugee qiiimaha astirooyinka ku yaala koowaadka.		8	5	3	7
• Marka xiga isugee qiiimaha astirooyinka tobnaadka	2	9	8	8	9
• Kadibna isugee qiiimaha astirooyinka boqlaadka					
• Marka afraad isugee qiiimaha astirooyinka kunnadka					
• Ugu danbaysta godka tobantun kunnadka 2 da ku taala malaha biiro loo geeyo (biiradeedu waa '0') sidaas darteed hoos inta loo soo dajiyoo ayaa godkeedada lagu qori.	2 + 0  = 2	1 + 8  = 9	3 + 5  = 8	5 + 3  = 8	2 + 7  = 9

$$\begin{array}{r}
 21352 \\
 + 8537 \\
 \hline
 29889
 \end{array}$$

Sidaa daraaded labada degmo waxaa ku nool dad tiradoodu dhan tahay 29889.

XASUUSNAADA:

- *Tirooyinka idil ee kor ku xusan marka aan isugeynayno Godadka Qiima ... Rugeedka intaan adeegsano oo aan si fidsan u qorno ayaan sidan soo socota isugu geynaynaa.*

**Biilo** →  $21,352 = 20,000 + 1,000 + 300 + 50 + 2$   
**Biilo** →  $8,537 = \underline{\quad} + 8,000 + 500 + 30 + 7$   
**Biilo** →  $29,889 = 20,000 + 9,000 + 800 + 80 + 9$

## Tusaale 2

Garoonka diyaaradaha ee Itoobiya ayaa waxaa ka duulay rakaab dhan 146,326 qof Mudo hal sano ah. Sanadkii ku xigay waxaa ka duulay 152,672 rakaab. Labada sana-dood tirada rakaabka ka duulay waa imisa.

146,326

152,672

$$\begin{array}{r} 298,998 \\ \hline 6+2=8 \\ 2+7=9 \\ 3+6=9 \\ 6+2=8 \\ 4+5=9 \\ 1+1=2 \end{array}$$



Sidaas darteed labada sano waxaa garoonka diyaradaha ee Itoobiya ka dulay rakab dhan 298,998

## Shaqo koo xeed

Xamdi iyo Cabdi ayaa la weydiiyay in ay isugeeyaan 125 iyo 2343. Waxayna uga shaqeeyeen sidan soo socota.

$$\begin{array}{r} 125 & 2343 \\ \text{Xamdi} \quad \underline{2343} & \text{Cabdi} \quad \underline{125} \\ \hline 2468 & 3593 \end{array}$$

Labadoodu habka ay uga shaqeeyeen midkee sax ah? Midkee se khalad ah? Falanqeeya.

## LAYLIIS 2.1.1. B

Soo saar wadarta suu'aalaha soo socda idinka oo joog isugu hoos dhigayaa tirooyinka

<b>b</b>	$356 + 122$	<b>t</b>	$2341 + 528$	<b>j</b>	$25,154 + 12,323$
<b>x</b>	$35,651 + 3234$	<b>kh</b>	$654,325 + 215,102$	<b>d</b>	$701,405 + 16,291$
<b>r</b>	$358,672 + 305$	<b>s</b>	$768,121 + 33$		

## Xeerka (astaanta) kala Hormarinta ee Isugeynta

### Hawlgal 2.1 t

Isugee


1    **b**     $53 + 12 = \underline{\quad}$

**t**     $12 + 53 = \underline{\quad}$

**j**     $374 + 123 = \underline{\quad}$

**x**     $123 + 374 = \underline{\quad}$

- 2** Jawaabta suu'aasha 1.b iyo jawaabta 1.t) ma isku midbaa? Biirooyinkuse meelaha ay ku kala yaalii ni ma isku midbaa?
- 3** Jawaabta suu'aasha 1.J iyo 1.x ma isku midbaa? Biirooyinku se meelaha ay ku kala yaaliini ma isku midbaa?
- 4** Biirooyinka oo la kala hormariyaa wadarta miyey saamaysaa?



## Tusaale 3

Fooganta u dhaxaysa Jig-jiga ilaa Qabridahar waa 600km, Qabridahar ilaa Mustaxiil waa 100km. Gaadhi bas ah ayaa intuu ka soo dhaqaaqay Jigijiga ayuu soo maray Qabridahar kadib waxaa u galay Mustaxiil. Bas kale na Mustaxiil intuu ka dhaqaaqay uu Qabridahar dhaafay ayuu Jigjiga galay. Raadi fooganta guud ee bas walba socday



### Jawaab:-

Baski ugu horeeyay waxaa u socday  $600\text{km} + 100\text{km} = 700\text{km}$ .

Baski labad waxaa u socday  $100\text{km} + 600\text{km} = 700\text{km}$  sidaa daradeed xeerka (Astanta) kala hormarinta ee isugayntana  $600\text{km} + 100\text{km} = 100\text{km} + 600\text{km}$  madama ay sidan tahay hadaba fooganta ay socdeen labada bas waa 700km.

## Layliis 2.1.1.T

- 1** Isugee tirooyinka dabadeedna xaqiji wadartoodu in ay isle'eg yihii
- b**  $30 + 20$  iyo  $20 + 30$
  - t**  $120 + 40$  iyo  $40 + 120$
  - j**  $3222 + 4542$  iyo  $4542 + 3222$
  - x**  $70605 + 8024$  iyo  $8024 + 70605$
- 2** Sanduuqa madhan tirade ku haboon ku buuxi
- |   |   |
|---|---|
| <b>b</b> $80 + 40 = 40 + \square$       | <b>t</b> $\square + 355 = 355 + 422$      |
| <b>j</b> $3542 + 6127 = \square + 3542$ | <b>x</b> $42357 + \square = 25012 + 2357$ |

## Xeerka (astaanta) Hormogelinta isugeynta

### Hawlgal 2.1.1 J

Fatxiya iyo Wacays ayaa waxaa la waydiiyay in ay isugeeyaan 50,20 iyo 80. Waxay na isugeynta uga shaqeeyeen sidan

*Fadxiya:* marka hore 50 iyo 20 inaty isu gaysay ayay wadarta usoo baxday 80 ugaysay


$$\text{Sidaa darteed waxay hesahay } (50 + 20) + 80 = 150$$

*Wacays:* marka hore 20 iyo 80 ayuu isugeeyay wadarta soo baxday ayuu 50 u geeyay

$$\text{Sidaa darteed wuxuu helay } (20 + 80) + 50 = 150$$

#### Su'aal

- Sax matahay wadarta labada arday?
- Isku mid matahay habka ay uga shaqeeyeen labada arday? Maxay kukala duwan yihii oo idiin muuqda?



## Tusaale 4

Isu gee  $1252 + 314 + 3420$

### Jawaab

$$\begin{array}{lll}
 (1252 + 314) + 3420 & \text{ama} & 1252 + (314 + 3420) \\
 = 1566 + 3420 & & = 1252 + (3734) \\
 = 4986 & & = 4986
 \end{array}$$

### Laylis 2.1.1.j

1 Isugee tirooyinka idil ee hoos ku qoran

- |          |                         |          |                          |
|----------|-------------------------|----------|--------------------------|
| <b>b</b> | $(60 + 420) + 1342$     | <b>t</b> | $2435 + 2020 + 141$      |
| <b>j</b> | $2652 + (31245 + 2120)$ | <b>x</b> | $3541 + 12303 + 654,152$ |

**2** Buuxi sanduuqyada madhan

- b**  $(30 + 40) + 50 = 30 + (40 + 50)$
- t**  $152 + (343 + 111) = (\square + 343) + 111$
- j**  $(5346 + 1220) + = 5346 + (1220 + 3444)$
- x**  $(\square + 13218) + 4005 = 1111 + (13218 + 4005)$

**3** Iskaashato xooladhaqato ah ayaa leh 1252 wan, 2115 ryo iyo 3320 digaagadood. Hadaba waa imisa wadartoodu?

### T Isugayn qaadasho leh

#### Hawlgal 2.1.x

Raadi wadarta  $24 + 58 =$  \_\_\_\_\_

### Tusaale 5

Raadi wadarta  $43 + 29 =$  \_\_\_\_\_

$$\begin{array}{r} 43 \\ + 29 \\ \hline 72 \end{array}$$

- Marka hore waxaa la isu geyn qiimaha astirooyinka ku yaala koowaadka  $(3 + 9) = 12$ )
- 12 madaama ay 10 ka wayn tahay 2 da intaan ku qorno godka koowaadka ayaan 1ka maskaxda intaan ku haysano ayaan u gaynaynaa tirooyinka ku yaala godka tobnaaka
- Isu gee qiimaha astirooyinka ku yaala tobnaadka iyo 1 kii aan maskaxda ku haysanay ( $1 + 4 + 2 = 7$ )

Sidaa daraadeed  $43 + 29 = 72$

### Tusaale 6

Raadi wadarta  $765 + 298 =$  \_\_\_\_\_

$$\begin{array}{r} 765 \\ + 298 \\ \hline 1063 \end{array}$$

- $(5 + 8 = 13)$  3 ayaa lagu qorayaa godka koowaadka 1na inta la qaado ayaa loo geyn tirooyinka ku yaala godka tobnaadka
- $(1 + 6 + 9 = 16)$  6 da waxaan ku qoraynaa godka tobnaadka 1na waxaan u gaynaynaa tirooyinka ku yaala godka boqlaadka
- $(1 + 7 + 2 = 10)$  0 waxaan ku qoraynaa godka boqlaadka 1 na godka kunnaadka.

Sidaa daradeed wadartu waa 1063

## Tusaale 7

**Raadi wadarta**  $3765 + 972 + 867 + 1624 =$  \_\_\_\_\_

$$\begin{array}{r} 3765 \\ + \quad 972 \\ + \quad 867 \\ + \quad 1624 \\ \hline 7228 \end{array}$$

- $(5 + 2 + 7 + 4 = 18)$  8 da inta an ku qorno godka koowaadka ayaan 1 ka u geynaynaa 4 ta astiro ku yaala godka tobnaadka.
- $(1 + 6 + 7 + 6 + 2 = 22)$  1 da inta an ku qorno ayana 2 da quadaynaa oo aan u gaynaynaa tirooyika ku yaala godka boqloadka
- $(2 + 7 + 9 + 8 + 6 = 32)$  2 waxaan ku qoraynaa godka boqoladka 3 d a na intaan qadno ayaan ugaynaynaa tirooyinka godka kunnaadka.
- $(3 + 3 + 1 = 7)$  7 da waxaynu ku qoraynaa godka kunnaadka.

Sidaa daraadeed jawaabtu waxay noqonaysaa 7228.

### Laylis 2.1.1.x

1 Raadi wadarta

- |          |                   |           |                      |          |                               |
|----------|-------------------|-----------|----------------------|----------|-------------------------------|
| <b>b</b> | $857 + 1246$      | <b>t</b>  | $7654 + 6349$        | <b>j</b> | $15288 + 28376$               |
| <b>x</b> | $765 + 972 + 857$ | <b>kh</b> | $3455 + 2649 + 1056$ | <b>d</b> | $25088 + 6327 + 184,682 + 25$ |

2 Raadi xalka weedh-xisaabeedyada.

- b** Dugsi ardayda ka dhigata oo xubin ka ah naadiga ilaalada deegaanka ayaa khudaar ay beereen inta ay iibiyeen 325 Birr waxay ka heleen basasha 625 Birr badhadhaha 432 Birr na waxay ka heleen saladhka. Guud ahaan dhakhliga ay khudaarta ka heleen waa imisa Birr?
- t** Beeralay ayaa waxa u beeray 2540 iniinyo oo liin macaan ah 1752 iniinyo oo canbe ah 978 iniinyo oo liin dhanaan ah, hadaba waa imisa wadarta iniinyaha ee u beroolahani beeray ?
- j** Urur iskaashatao ah oo ka shaqaysa tacab soo saarka caanaha 3 todbaad oo isku xigta caana ha ay iabisay inta litir u ahay ayaan sidan soo socota loo day waaniyay.

**Todobaadkii ugu horeeyay** 12780 litir

**Todobaadkii labaad** 8455 litir

**Todobaadkii sadexaad** 11756 litir

Waa imisa litir dhamaan canaha ay iabisay sadexda todobaad?

- x** Itoobiya laba biloodoo isku xigta bunka ay dibada u dhoofisay kiilogiraam ahaan waa sidan. Bishii u horaysay waxay dhoofisay 85450 kg. Bishii labad na 98720 kg ayay dhoofisay. Labada bilood imisa kiilogiraam oo bun ah ayay dhoofisay?




- kh** Doorosho ka dhacday degmo ayaa dadkii qaatay kaarkii dorashada 23546 oo qof ayaa codeeyay, 1879 oo qofna ma codayn hadaba waa imisa dhamaan dadkii is diwaan galiyay ee kaarka doorashada qaadatay?

## 2.1.2 Kalagoynta

### B Kalagoynta aan amaahasho lahayn

#### Hawlgal 2.1.2 b

Adis ababa ilaa Goday waxay isu jiraan fogaan ah 1125 km. Adis Ababa ilaa Jigjiga na waxay isu jiraan fogaan dhan 628 km. Sidaas darteed Jigjiga ilaa Goday waa imisa km fogaaanta u dhaxaysa?



#### Tusaale 1

Dugsi ayaa waxaa lagu beeray 4325 geed. Hase ahaatee 3215 oo geed ayaa ka qabsatay oo kortay. Geedaha inta aanan bixiin ee engegtay waa imisa?

$$4325 - 3215 =$$



	Godka kunnaad	Godka boqolaad	Godka tobnaad	Godka koowaad
• Tirooyinka idil ee inala siiyay ka ugu weyn (laga gooyaha) ayaan marka hore qoraynaa. Kadibna la gooyaha ayaan ku hoos qoraynaa anaga oo astiro kasta ku qorayna godka ku haboon.	4  -3	3  2	2  1	5  5
• Marka hore tirooyinka godka koowaad ku yaala ayaan kale gooynaynaa	1	1	1	0
• Marka xigta tirooyinka godka tobnaadka ku yaala ayaan kala gooynaynaa	4 - 3  = 1	3 - 2  = 1	2 - 1  = 1	5 - 5  = 0
• Kadib waxaan kala gooy naynaa tirooyinka godka boqolaadka ku yaala				
• Ugu danbayn tirooyinka godka kunnaadka ku yaala ayaan kala gooy naynaa.				

Sidaa darteed, 4,325 → Laga gooye  
3,215 → La gooye Geedaha aan beermin waa 1110  
**1,110** → Faraqa

1 Ma taqaanaa sida loo hubiyo ama loo xaqijjiyo in jawaabteenu ay sax tahay iyo in kale?

2 Haa! Wadarta faraqa an helnay iyo la gooyaha haddii ay le'egtahay laga gooyaha jawaabteenu waay sax



3 Haaheey!

Faraq + la gooye (goosane) = Lagagooye  
 $1110 + 3215 = 4325$



## Tusaale 2

Raadsha faraqa

$$\begin{array}{r} 86257 - 3143 = \underline{\hspace{2cm}} \\ \begin{array}{r} 86257 \\ - 3143 \\ \hline 83114 \end{array} \end{array}$$

- $7 - 3 = 4$
- $5 - 4 = 1$
- $2 - 1 = 1$

- $6 - 3 = 3$
- $8 - 0 = 8$

Sidaas darteed faraqu waa 83114

Hubin Faraq + Goosane (lagooye) = Laga gooye

$83114 + 3143 = 86257$  waa run.

## Shaqo kooxeed

Idinkoo kursigiina fadhiya oo ka wada doodaya ka jawaaba.

Kala goyntu astaanta (xeerka) kala hormarinta miyay leedahay mise ma laha?

Jawaabiina tusaale idinkoo ku xoojinaya ka jawaaba?

## Laylis 2.1.2.B

Joog inta ad isugu hoos qortiin kalagooya. jawaabiina idinkoo isugayn adeegsnaya hubiya.

<b>b</b>	$698 - 35$	<b>t</b>	$4887 - 31$	<b>j</b>	$6327 - 6227$
<b>x</b>	$23554 - 3231$	<b>kh</b>	$25,724 - 2,5301$	<b>d</b>	$867958 - 23746$

## T Kalagoynta amaahasho leh

## Hawlgal 2.1.2 t

Soo soar faraqa  $93 - 48 = \underline{\hspace{2cm}}$

## Tusaale 2

Soo soar faraqa

$$\text{b} \quad 82 - 35$$

$$\text{t} \quad 723 - 254$$

### Jawaab

$$\begin{array}{r} 82 \\ \underline{- 35} \\ 47 \end{array} \xrightarrow{\hspace{1cm}} \begin{array}{r} 80 + 2 \\ \underline{- 30 + 5} \\ 50 \end{array} \xrightarrow{\hspace{1cm}} \begin{array}{r} 70 + 12 \\ \underline{- 30 + 5} \\ 40 + 7 = 47 \end{array}$$

Habkaas macnaheedu waxay ka dhigan tahay sidan soo socota.

$$\begin{array}{r} 82 \\ \underline{- 35} \\ 47 \end{array}$$

- Tirooyinka godka koowaad ( $2 - 5$  lama kalagoyn karo). Sidaas darteed godka tobnaadka 8 da ku taala ayaa 1 toban ka amaa hanaynaa oo an u gaynaynaa 2 da ku taala koowaadka. Taas oo noqon 12.
- Kadibna 12 intaan 5 ka goyno ayaan faraqa oo ah 7 ku hoos qoraynaa godka koowaadka ( $12 - 5 = 7$ )
- Ugu danbaysta tirooyinka ku yaala godka tobnaadka ayaan kala goynaynaa. 8 da tobano maadaama ay 1 toban amaahisay 2 da god-rugeedka koowaadka. Wuxuu hadhay 7. Sidaas darteed  $7 - 3 = 4$

$$\text{t} \quad \begin{array}{r} 723 \\ \underline{- 254} \\ 469 \end{array}$$

$$\xrightarrow{\hspace{1cm}} \begin{array}{r} 700 + 20 + 3 \\ \underline{- 200 + 50 + 4} \\ 500 + 73 \end{array} \xrightarrow{\hspace{1cm}} \begin{array}{r} 700 + 10 + 13 \\ \underline{- 200 + 50 + 4} \\ 500 + 10 + 13 \end{array} \xrightarrow{\hspace{1cm}} \begin{array}{r} 600 + 110 + 13 \\ \underline{- 200 + 50 + 4} \\ 400 + 60 + 9 = 469 \end{array}$$

Sidaasi waxay ka dhigan tahay sida hoostan loogu falanqeeyay.

$$\begin{array}{r} 723 \\ \underline{- 254} \\ 469 \end{array}$$

- Tirooyinka godka koowaad lama kala goyn karo ( $3 - 4$  lama karo) sidaas darteed godka tobnaadka 2 da toban ee ku jirta ayaan 1 toban inta aan ka amaaahano ayana 3 da u gaynay naa si aan uga dhigno 13
- Kadib 13 waxaan ka goynaynaa 4 ( $13 - 4 = 9$ )
- Kadib tirooyinka godka tobnaadka ayaan kala goynaynaa. 2 da toban ee godka tobnaadka ku jirtaa maadaama ay 1 toban amaahisay 3 da godka koowaad waxaa u hadahy 1 toban. Imika 1 toban 5 tobani laga ma goyn karo. Sidaas darteed godka boqolaad 7 da boqol ee ku jirta ayaan 1 boqol ka amaaahanaynaa oo aan u gaynaynaa 1 ka tobani siaan ugadhigno 11 (11 tobano)
- Kadib 11 ayaan 5 ka goynaynaa ( $11 - 5 = 6$ )
- Ugu danbaysta tirooyinka godka boqolaad ayaan kalagoynaynaa. 7 da boqol waxay 1 boqol amaahisay 1 ka godka tobanaada ku taala. Sidaas awogeed waxa u hadhay 6.

Sidaas darteed  $6 - 2 = 4$ , sidaas darteed  $723 - 254 = 469$

### Laylis 2.1.2T

**1** Kalagoo tirooyinka idil ee soo socda. Hubi jawaabtana adigoo Isugayn adeegsanaya

<b>b</b>	363	<b>t</b>	4239	<b>j</b>	63926
	-75		-1345		-12987
<b>x</b>	96851	<b>kh</b>	962,154	<b>d</b>	352,673
	-3993		-28,367		-143,075

**2** Raadsha xalka weedh-xisaabeedyadan hoose

- b** Dugsi ay dhigtan arday dhan 1530. 700 arday ayaa xubno ka ah naadiyo kala duduwan oo dugsiga ka tirada ardayda ee aan xubin ka ahayn naadiyada mid kood an waa imisa?
- t** Buurta raas-dhaashan ayaa dhererkeedu yahay 4,620 mitir dhererka buurta baatuuna waa 4,307 mitir. Haddaba buurta raas-dhaashan imisa mitir ayay ka dheer tahay buurta Baatu?
- j** Dagmo miyiga ku taala tirade dadka ku nooli waxay dhan tahay 27,155. Tirada dumarka ee dagmadu haddii ay tahay 14,866 tirada raga ee dagmadu waa imisa?
- x** Ganacsade ayaa bishi hore talafishin kusoo iibsaday 7500 oo Birr Dabadeedna wuxuu ku iibayay 8100 Birr. Hadaba imisa ayuu macaash ka hellay ganac sadahaan.
- kh** Sanaadki hore ayaa hal kiiil ardaydii qadatay imtixaanki laga qudayay fasalkii 8<sup>aad</sup> ayaa tiraada ardayda ku dhacday (aan gudbin ) imtixaan ayaa waxay ahaayen 2346 arday. Ardayda ku baastayna (ka gudubtay) waxay ahaayeen markaa waa imisa tiraada guud ee ardayda imtixaanka ka qayb qatay?
- d** Hal baabuur oo kuwa xamuulka ah ayaa miisaankiisu kisa yahay 63500 kg. Kadib markii rar buuxa la saaray, wuxuu miisaan kiisu noqday 64200 kg. Hadaba waa imisa miisaanka rarka (culayaska) lasaray baabuurka?
- r** Garoon kubada cagta lagu cayaaro ayaa waxaa u qadaa 84325 qof oo tageerayaal ah garoon kale oo yar ayaa isna waxaa u qadaa 55,680 qof. Haddaba garoornka weyni imisaqof ayuu dheer yahay garoonka yar?



## **2.2 ISKUDHUFASHADA TIROOYINKA IDIL EE TARANTOODU KA YAR TAHAY 1,000,000**


Casharadiinii xisaabta ee fasalka saddexaad waxaad ku soo barteen sida tiro hal-god ah loogu dhufuto tiro kale. Iminka fasalkan casharkiina xisaabta kadib markaad nakhtiintiin kudhufashada tiro hal god ah waxaad baran doontaan habka tiro loogu dhufuto tiro laba god ah.

## 2.2.1 Isku dhufashada tiro hal-god ah iyo tirooyinka idil ee tarantoodu ay kayar tahay 1,000,000

### Hawlgal 2.2b

Su'aalahan soo socda ka jawaaba idinka oo ardayda aad isgarab fadhi-daan wada jir u falanqaynaya.

Sida sawirka ka muuqata saxanka ukunta (ugaxda) lagu qaadaa wuxuu qaadaa 30 xabo oo ukun ah.



- b** Laba saxan imisa xabo oo ukun ah ayey qaadi karaan?
- t** Afar saxan imisa xabo oo ukun ah ayey qaadi karaan?
- j** Todoba saxan imisa xabo oo ukun ah ayey qaadi karaan?
- x** Sagaal saxan imisa xabo oo ukun ah ayey qaadi karaan?

### B Isku dhufashada aanan qaadasho lahayn

#### Tusaale 3

Isku dhufo  $3 \times 2312$

	God-rugeedka kunnaadka	God-rugeedka boqloodka	God-rugeedka tobnaadka	God-rugeedka koowaadka
	2	3	1	2
				3
	6	9	3	6
$\triangleright 3 \times 2 = 6$ $\triangleright 3 \times 1 = 3$ $\triangleright 3 \times 3 = 9$ $\triangleright 3 \times 2 = 6$				

Diagram illustrating the multiplication of 3 by 2312 using a 3x4 grid. The grid is divided into four quadrants: top-left (2x3), top-right (3x1), bottom-left (3x3), and bottom-right (2x6). Colored arrows point from the grid to the corresponding multiplication equations: a blue arrow points to the top-left quadrant, an orange arrow to the top-right, and a green arrow to the bottom-left. A yellow arrow points to the bottom-right quadrant. The numbers 6, 9, 3, and 6 are also labeled at the bottom of each column respectively.

#### Tusaale 4

Isku dhufo  $4 \times 20,112$

$$\begin{array}{r}
 20112 \\
 \times 4 \\
 \hline
 80448
 \end{array}$$

4 × 2 = 8  
 4 × 1 = 4  
 4 × 1 = 4  
 4 × 0 = 0  
 4 × 2 = 8



Hawsha iskudhufashada waxaa laga bilaabaa god-rugeedka koowaadka.

Sidaas darteed  $4 \times 20,112 = 80448$

### Laylis 2.2.B

Isku dhufo

<b>b</b>	$2 \times 111$	<b>t</b>	$3 \times 232$	<b>j</b>	$4 \times 1101$
<b>x</b>	$2 \times 2222$	<b>kh</b>	$3 \times 3333$	<b>d</b>	$5 \times 10101$
<b>r</b>	$6 \times 10001$	<b>s</b>	$7 \times 11011$	<b>sh</b>	$8 \times 11111$

**T** Isku dhufashada qaadashada leh

### Tusaale 5

Isku dhufo  $5 \times 432$

Habka looga shaqeeyo

$$\begin{array}{r}
 432 \\
 \times 5 \\
 \hline
 2,160
 \end{array}$$

Godka (astatiraha) god-rugeedka koowaad kaasi oo ah 2 da ku dhufo 5 ( $5 \times 2 = 10$ ) kadib na '0' ta god-rugeedka koowaadka ku qor 1 ka na ugee taranta god-rugeedka tobnaadka eek u xigta.

3 da ku taala god-rugeedka tobbaadka ku dhufo 5 ka dibna taranta ugee 1 kii ad haysatay (soo qaaday)  $5 \times 3 + 1 = 16$ , 6 da god-rugeedka tobnaadka ku qor. 1 ka na taranta god-rugeedka boqolaadka ugee.

Godka god-rugeedka boqolaadka ee ah 4 ku dhufo 5 oo taranta ugee 1 kii ad soo qaaday  $5 \times 4 + 1 = 21$ . 1ka god-rugeedka boqolaadka 2 da na god-rugeedka kunnaadka ku qor

### Tusaale 6

Raadi taranta  $4 \times 4563$

$$\begin{array}{r}
 4,563 \\
 \times \quad 4 \\
 \hline
 18,252
 \end{array}$$

- $4 \times 3 = 12$ , 2 da ku hoos qor god-rugeedka koowaadka 1 ka na qaad oo ugee taranta god-rugeedka tobnaadka ee ku xigta.
- $4 \times 6 + 1 = 25$ . 5 ta ku hoos qor god-rugeedka tobnaadka 2 da na qaad oo ugee taranta god-rugeedka boqolaadka ee xigta.
- $4 \times 5 + 2 = 22$  da ku hoos qor god-rugeedka boqolaad ka 2 da kale na u gee taranta god-rugeedka kunnaadka eek u xigta.
- $4 \times 4 + 2 = 18$ , 8 da ku hoos qor god-rugeedka kunnaadka 1 ka na god-rugeedka tobantunnaadka.

Sidaas darteed  $4 \times 4563 = 18252$

### Laylis 2.2.t

1 Soo saar taranta.

b  $4 \times 223$

t  $5 \times 344$

j  $6 \times 2354$

x  $7 \times 3076$

kh  $7 \times 5006$

d  $8 \times 6735$

r  $8 \times 88889$

s  $9 \times 5454$

- 2 Qiimaha 1ka kiintaal ee qamadinka haddii uu yahay 1,250 Birr markaa 7 kiintaal si loo iibsado imisa birr ayaa loo baahnaan?
- 3 Macalimad dugsi wax kabarta ayaa waxa u mushaharkeeda bishiiba yahay 1835 Birr macalimadu 9 bilood imisa ayey heli kartaa?



## 2.2.2 Isku dhufashada tiro laba god ah iyo Tirooyinka idil oo Tarantoodu ka yar tahay 1,000,000

B Isku dhufashada aanan lahay qaadasho

### Hawgal 2.2.t

Hal darsan oo buug waxaa ku jirta 12 hal oo buugaag ah 31 darsan imisa ha loo buug ayaa ku jirta?

## Tusaale 7

Soo saara taranta

b  $24 \times 12$

t  $120 \times 24$

j  $3201 \times 32$

**Jawaab****b**  $24 \times 12$ 

Godka 100	Godka 10	Godka 1
	2	4
	1	2
	4	8
2	4	
2	8	8

**1** Tirooyinka joog isku hoos qora idinka oo isku hoos qoraya tirooyinka isku god ah.

**2** 24 ka astirada godka koowaadka ku taala oo ah 2 kudhufta natijada godka koowaadka intaad ka bilawdiin dhinaca bidixda midwaliba godkiisa ku qora.

$$2 \times 24 = 48$$

**3** 24 ka astirada godka tobnaadka ku yaala oo ah 1 ku dhufta oo taranka inta ad godka tobnaadka ka bilawdiin midwaliba godka ku qora.

**4** Godadka taranada midkasta godka uu ku yaalo joog isugugee ya.

- 8 da godka koowaadka ku taalaa malaha biiro loo geeyo hoos u dajiya.
- Godka tobnaadka kuwa ku yaala isugeeya
- $4 + 4 = 8$
- Godka boqolaaka 2 da ku taala malaha biiro loo geeyo hoos oo dajiya.

Sidaa daradeed,

$$\begin{array}{r}
 & 2 & 4 \\
 \times & 1 & 2 \\
 \hline
 & 4 & 8 & \leftarrow 2 \times 24 = 48 \\
 & 2 & 4 & \leftarrow 1 \times 24 = 24 \\
 \hline
 & 2 & 8 & 8
 \end{array}$$

**t**  $120 \times 24$ 

Godka 1000	Godka 100	Godka 10	Godka 1
	1	2	0
		2	4
	4	8	0
2	4	0	
2	8	8	0

Sidaa daradeed,

$$\begin{array}{r}
 & 1 & 2 & 0 \\
 \times & 2 & 4 \\
 \hline
 & 4 & 8 & 0 & \leftarrow 4 \times 120 = 480 \\
 & 2 & 4 & 0 & \leftarrow 2 \times 120 = 240 \\
 \hline
 & 2 & 8 & 0
 \end{array}$$

**j**  $3201 \times 32$ 

Godka 100,000	Godka 10,000	Godka 1000	Godka 100	Godka 10	Godka 1
		3	2	0	1
		6	4	0	2
1	0	2	4	3	2

Sidaa daradeed,

$$\begin{array}{r}
 & 3 & 2 & 0 & 1 \\
 \times & 3 & 2 \\
 \hline
 & 6 & 4 & 0 & 2 & \leftarrow 2 \times 3201 = 6402 \\
 & 9 & 6 & 0 & 3 & \leftarrow 3 \times 3201 = 9603 \\
 \hline
 & 1 & 0 & 2 & 4 & 3 & 2
 \end{array}$$

**Laylis 2.2.J**

**1** Kashaqeeya iskudhufashadan hoose.

**b**  $33 \times 21$

**t**  $99 \times 11$

**j**  $123 \times 32$

**x**  $402 \times 12$

**kh**  $3201 \times 43$

**d**  $4422 \times 12$

**r**  $20133 \times 31$

**s**  $82789 \times 11$

**sh**  $13024 \times 22$

**2** Geedo bun ah ayaa marka la talaalayay hal saf lagu talaalay 24 geed oo bun ah. 50 saf imisa geed oo bun ah ayaa lagu talaali?

**3** Waqtigan an joogno xaalada suuqa ee iibka xoolaha haddii hal wan qiiimihiisa lagu qiyaaso 350 Birr. Qiimaha 11 wanana la mid ah imisa ayey noqon?

**T Iskudhufashada leh qaadasho****Tusaale 8**

**b**  $23 \times 45$

**t**  $354 \times 34$

**j**  $2345 \times 32$

**Jawaab**

**b**  $23 \times 45$

Habka looga shaqeeyo

Godka 1000	Godka 100	Godka 10	Godka 1
		4	5
		2	3
	1	3	5
	9	0	
1	0	3	5

**1**  $3 \times 45 = 135$

135 ka godka koowaadka kabiliaaba oo tiro kasta god lagu muujiyay shaxda qiiima-rugeedka ku dul qora.

**2**  $2 \times 45 = 90$

90 ka godka tobnaadka ka bilaaha oo ku qora shaxda qiiima rugeedka.

**3** Taranta sida la isugu hoos qoray idinka oo tix galinaya isugeeyo.

**135**

**90**

**1035**

Sidaas daraadeed,

$$\begin{array}{r}
 & 4 & 5 \\
 \times & 2 & 3 \\
 \hline
 1 & 3 & 5 \\
 & 9 & 0 \\
 \hline
 1 & 0 & 3 & 5
 \end{array}
 \quad
 \begin{array}{l}
 3 \times 45 = 135 \\
 2 \times 45 = 90
 \end{array}$$

t  $354 \times 34$

$$\begin{array}{r}
 354 \\
 \times 34 \\
 \hline
 1416 \quad 4 \times 354 = 1416 \\
 1062 \quad 3 \times 354 = 1062 \\
 \hline
 12036
 \end{array}$$

j  $2345 \times 32$

$$\begin{array}{r}
 2345 \\
 \times 32 \\
 \hline
 4690 \quad 2 \times 2345 = 4690 \\
 7035 \quad 3 \times 2345 = 7035 \\
 \hline
 75040
 \end{array}$$

### Shaq kooxed 2.2 b

Su'aalahan hoose idinka oo isku kooxaynaya laba laba falanqeeya oo ka jawaaba.

- 1 Buugiina xisaabta ee daabacan imisa bogg ayuu lee yahay?
- 2 Laba buugaagtiina xisaabta ee daabacani imisa bogg ayey lee yihiin?
- 3 Sheega lix buug oo xisaabta daabacan ahi inta bog ee ay yeelan karaan?
- 4 15 buug oo xisaabta daabacan ahi imisa bog ayey yeelan karaan?

### Laylis 2.2.X

Iskudhufo kuwan soo socda.

1	<b>b</b> $23 \times 45$	<b>t</b> $42 \times 65$	<b>j</b> $34 \times 232$	<b>x</b> $45 \times 563$
	<b>kh</b> $22 \times 3415$	<b>d</b> $44 \times 4444$	<b>r</b> $32 \times 12783$	<b>s</b> $56 \times 8989$


- 2 Halka kilo ee sonkorta ah haddii uu yahay 14 Birr waa imisa qiimaha 247 kiilo sonkor ah?
- 3 Warshad ayaa tirada shaqalaheedu yahay 2340. Warshadu shaqaalakasta waxay siisaa 27 Birr maalintiiba. Haddaba warshadu maalintiiba dhamaan shaqaalaha imisa Birr ayay siisaa?

### 2.2.3 Xeerarka (astaamaha) kala hormarinta iyo Hormogelinta Isku dhufashada

#### B Xeerka (astaanta) kala hormarinta Iskudhufashada

Idinka oo koox koox uga wada tasha naya su'aashan ka jawaaba. Shaqadee ayaa Birr baddan lagu heli? Shaqo mudo 30 maalmood laga shaqaynayo oo mushaar maalmeedkeedu yahay 80 Birr mise shaqo 80 maalmood laga shaqaynayo oo mushaar maalmeedkeedu yahay 30 Birr?

Jawaabtiina idinka oo sababta sheegaya soo bandhiga oo sharraxa.



### Laylis 2.2 kh

- 1** Qora ama siiya saddex tusaalooyin oo mujinaya xeerka kala homarinta iskudhufashada.
- 2** Xisaabfalada isku dhufashada ee la idin siiyaay ka shaqeeya oo hubiya in tarantoodu ay isle'eg yihiin iyo in kale.
- |          |                                   |          |                                   |
|----------|-----------------------------------|----------|-----------------------------------|
| <b>b</b> | $11 \times 22$ iyo $22 \times 11$ | <b>t</b> | $23 \times 34$ iyo $34 \times 23$ |
| <b>j</b> | $33 \times 44$ iyo $44 \times 33$ | <b>x</b> | $54 \times 45$ iyo $45 \times 54$ |
- 3** Sanduuqyada madhan tirada ku haboon ku buuxiya.
- |          |                                      |          |                                      |
|----------|--------------------------------------|----------|--------------------------------------|
| <b>b</b> | $43 \times 55 = 55 \times \square$   | <b>t</b> | $\square \times 445 = 445 \times 26$ |
| <b>j</b> | $1000 \times 58 = 58 \times \square$ | <b>x</b> | $74 \times \square = 456 \times 74$  |


### T      Xeerka Hormogelinta Iskudhufashada

### Hawlgal 2.2 x

Marka hore qawska (biraaketka) dhaxdeeda falka iskudhufashada ka shaqeeya idinka oo kooxoo laba laba ah labadiina midkiin ‘b’ ha ka shaqeeyo kiina kale na ‘t’ ha ka shaqeeyo.

Ardayga B.  $(5 \times 12) \times 7 =$  \_\_\_\_\_ ardayga T  $5 \times (12 \times 7) =$  \_\_\_\_\_

Isbar barbardhiga jawaabiina maxaad ka aragteen ama ku fahanteen kadib markaad ka shaqayseen falalkan iskudhufashada?



## Tusaale 9

Idinka oo marka hore isku dhufanaya kuwa qawska ku jira ka shaqeeya falka isku dhufashad.

**b**  $(7 \times 6) \times 8$  **t**  $7 \times (6 \times 8)$

### Jawaab

**b**  $(7 \times 6) \times 8 = 42 \times 8 = 336$  **t**  $7 \times (6 \times 8) = 7 \times 48 = 336$

Sidaas darteed,  $7 \times (6 \times 8) = 8 \times (6 \times 8)$


## Tusaale 8

Soo saara taranta su'aalaha hoose ee (b) iyo (t) idinka oo marka hore ka shaqaynaya iskudhufashada qawska ku jirta. Kadibna isharbar dhiga labada taran.

**b**  $(25 \times 33) \times 42$  **t**  $24 \times (33 \times 42)$

### Jawaab

Marka hore waxaan ka shaqaynaynaa isku dhufashada qawska ku jirta sida hoostan lagu muujiyey. Uffirso sida labada la isu garab wado.

<b>b</b> $  \begin{array}{r}  33 \\  \times 25 \\  \hline  165 \\  66 \\  \hline  825 \\  825 \\  \hline  42 \\  \hline  1650 \\  3300 \\  \hline  34650  \end{array}  $	 <b>1 Kashaqaynta wareegeeda 1<sup>aad</sup></b>	<b>t</b> $  \begin{array}{r}  42 \\  \times 33 \\  \hline  126 \\  126 \\  \hline  1386 \\  1386 \\  \hline  25 \\  \hline  6930 \\  2772 \\  \hline  34650  \end{array}  $
---	---	--

### Laylis 2.2 d

**1** Qor saddex tusaale oo muujinaya xeerka hormogelinta iskudhufashada.

**2** Ka jawaaba idinka oo ku jawaabay 'run' ama 'been'

**b**  $8 \times (15 \times 23) = (8 \times 15) \times 23$  **t**  $11 \times (135 \times 555) = (11 \times 135) \times 555$

**j**  $(3450 \times 44) \times 2366 = 354 \times (44 \times 2366)$  **x**  $(6 \times 76) \times 8845 = 6 \times (76 \times 8845)$

**3** Idinka oo aynaad ka shaqaynin xisaabfalka isku dhufashada, meelaha bannaan ku buuxiya tirada ku haboon.

**b**  $(8 \times 7) \times 9 = \boxed{\quad} \times (7 \times 9)$  **t**  $15 \times \boxed{\quad} \times 27 = 15 \times (55 \times 27)$

**j**  $64 \times 11 \times \boxed{\quad} = (64 \times 11) \times 70$  **x**  $(54 \times 23) \times 31 = 54 \times 23 \times \boxed{\quad}$

**kh**  $\boxed{\quad} \times 19 \times 51 = 14 \times (19 \times 51)$

## **2.3 TIROOYINKA IDIL ILAA 1,000,000 oo LOO QAYBINAYO TIRO IDIL OO HAL-GOD AH IYO TIRADA 10**

### **2.3.1 Isuqaybinta tirooyinka idil ilaa 1,000,000 iyo tiro hal-god ah**

#### **Hawlgalka 2.3b**

Dooni ayaa markiiba 6 caruur ah wabi ka talaabin karta. Hadaba doonidu imisa jeer ayey ku talaabrn kartaa tirada caruurta ee hoostan lagu muujiyey?

Jawaabta sidaad u hesheen saaxiibadiin u cadeeya (sharraxa)

- |          |           |           |           |          |           |
|----------|-----------|-----------|-----------|----------|-----------|
| <b>b</b> | 12 caruur | <b>t</b>  | 18 caruur | <b>j</b> | 24 caruur |
| <b>x</b> | 30 caruur | <b>kh</b> | 54 caruur | <b>d</b> | 60 caruur |


#### **Tusaale 1**

232 arday ayaa 4 basas inta lagu qaaday booqasho u baxday. Baskiiwalba waxaa lagu meleeyay arday tiradoodu ay isle'eg tahay. Hadaba hal bas dhaxdiis imisa arday ah ayaa saaran?








#### **Jawaab**

Waa inaan 232 arday ukala qayqaybinaa 4 meelood oo isle'eg.



Weedh-xisaabeedkan isuqaybinta ee dusha ina la siiyay sida hoostan loogu tafatiray ayaan uga shaqayn karnaa.

		Calaamadan anago oo isticmaalayna ayaan laqaybshaha iyo qaybshaha meelahooda aan dhigaynaa sida bidixda lagu muujiyay.
	$23 \div 4 = 5$ hadhaa 3	Godadka (astatirayaasha) laqaybshaha bidixada inta aan kaga bilawono ayaan 4 ta u qaybinaynaa. $2 \div 4$ lama karayo sidaas darteed 3 da ayaan raacinaynaa oo aan 23 ka u qaybinaynaa 4ta
		5 ta xariiqa dushiisa intaan ku qorno ayaan herkan hadhaaga aan la kulano iskadhaafaynaa.
	$5 \times 4 = 20$ $23 - 20 = 3$	5 ta iyo 4 ta intaan iskudhufano ayaan taranka oo ah 20 ku hoos qoraynaa 23 anaga oo isku hoos qorayna astirooyinka isku godka ah kadibna 23 ayaan ka goynoynaa 20.
		$3 \div 4$ lama karayo. Sidaas darteed godka koowaadka astiraha ku jira laqaybshaha ee ah 2 ayaan hoos intaan u soo dajhino 3 da garab dhigaynaa si aan uga dhigno 32.
	$32 \div 4 = 8$	32 marka loo qaybbiyo 4 qaytaoo ah 8 waxaan garab dhigaynaa 5ta
	$8 \times 4 = 32$ $32 - 32 = 0$	8 da ayaan 4 intaan ku dhufano ayaan taranka 32 ku hoos qoraynaa dabadeed na intaan kalagoyno ayaan hadhaaga oo ah eber 0 qoroynaan waxanan jawaabtu noqon 58

## Tusaale 2

Raadi qaybta

$$4578 \div 6 = \underline{\hspace{2cm}}$$

### Jawaab

The diagram shows the long division process:

$$\begin{array}{r} 763 \\ 6 \overline{)4578} \\ 42 \downarrow \\ 37 \\ 36 \downarrow \\ 1 \\ \end{array}$$

$$\begin{array}{r} 763 \\ 6 \overline{)4578} \\ 42 \downarrow \\ 37 \\ 36 \downarrow \\ 18 \\ \end{array}$$

$$\begin{array}{r} 763 \\ 6 \overline{)4578} \\ 42 \downarrow \\ 37 \\ 36 \downarrow \\ 18 \\ 18 \downarrow \\ 00 \end{array}$$

Sidaas darteed,  $4578 \div 6 = 763$



Jawaabtaan helnay  
in ay sax tahay iyo in  
kale side ayaanu  
hubin karnaa?

Aad ayay u dhibyar tahay.  
Qaybsaha iyo qaybta ayaan isku  
dhufanayna. Tarankan intaan u  
geyneyna hadhaa haddii u jiro ayaan  
firinaynaa in natijadu ay leeg tahay  
laqaybshaha

- $10 \div 2 = 5$   
 $2 \times 5 = 10$
- $10 \div 3 = 3$  hadhaa 1  
 $(3 \times 3) + 1 = 10$



(Qaybshe  $\times$  Qayb) + Hadhaa = Laqaybshe

Sidaa daraadeed,  $4578 \div 6 = 763$  hadday tahay

$$6 \times 763 = 4578$$

### Tusaale 3

Ka sheeqe

$$38593 \div 9 = \underline{\hspace{2cm}}$$

### Jawaab

The diagram shows the long division process:

$$\begin{array}{r} 4288 \\ 9 \overline{)38593} \\ 36 \downarrow \\ 25 \\ 18 \downarrow \\ 79 \\ 72 \downarrow \\ 73 \\ 72 \downarrow \\ 01 \end{array}$$

Hubin

$$(9 \times 4288) + 1 = 38593$$

Sidaa awgeed  $38593 \div 9 = 4288$  hadhaa 1

**Laylis 2.3.B**

**1** Ka shaqee kuwan soo socda

**b**  $396 \div 4 = \underline{\quad}$       **t**  $925 \div 5 = \underline{\quad}$       **j**  $3460 \div 8 = \underline{\quad}$

**x**  $6571 \div 8 = \underline{\quad}$       **kh**  $73464 \div 6 = \underline{\quad}$       **d**  $24339 \div 7 = \underline{\quad}$

**r**  $153468 \div 9 = \underline{\quad}$       **s**  $345609 \div 9 = \underline{\quad}$

**2** Warshada wanji oo soo saarta sonkorta waxay soo saartay 3465 kiintaal oo sonkor ah. Warshadu sonkorta ay soosaartay waxay si isle'eg ugu qaybisay 9 wakaaladood oo sonkorta oo gaybiya tacah qaybiya. Hadaba imisa kiintaal ayey wakaalad kasta heleysaa?

**3** Xafiiska wakaalada biyaha ayaa xaafad dadka ku nool. Si u guryahooda qasabadaha biyaha ugu galiyo wuxuu quodday luuq uu qasabadaha ku aaso taas oo dhererkiisu yahay 2346 mitir. Qasabadii walba dhererkeedu haddii u 6 mitir yahay imisa qasabadood ayay wakaaladu u baahantahay in ay ku aasto luuqa ay u qoday?

### 2.3.2 Isuqaybinta tirooyinka Idil ilaa 1,000,000 iyo tirada 10

#### B Isuqaybinta aanan hadhaa lahayn

#### Hawlgalka 2.3t

**1** Raadi qaybta

**b**  $10 \div 1 = \square$       **t**  $20 \div 10 = \square$       **j**  $30 \div 10 = \square$

**x**  $40 \div 10 = \square$       **kh**  $50 \div 10 = \square$       **d**  $60 \div 10 = \square$

**r**  $70 \div 10 = \square$       **s**  $80 \div 10 = \square$       **sh**  $90 \div 10 = \square$

**dh**  $100 \div 10 = \square$

**2** Qaybta iyo la qaybshaha u fiirsada. Qaybta (jawaabta) si dag-dag ah ama wado qardo jeex ah inaad ku hesho is badal nooceee ah ayaa loo bahan yahay in lagu sameeyo la qaybiyaha

#### Tusaale 4

Ka shaqee


**b**  $200 \div 10 = \underline{\quad}$       **t**  $520 \div 10 = \underline{\quad}$       **j**  $9470 \div 10 = \underline{\quad}$

Sidaa daraadeed,

**b**  $200 \div 10 = 20$  sababto ah  $20 \times 10 = 200$

**t**  $520 \div 10 = 52$  sababto ah  $52 \times 10 = 520$

**j**  $9470 \div 10 = 947$  sababto ah  $947 \times 10 = 9470$



Tiro idil oo godka ku yaala god-rugeedkeedu koowaad u yahay 0 marka 10 loo qaybiyo ma garan karta qaybtu inta ay noqon?

Haa! Qaypta si aad u heshid '0' ta ku taala laqaybshaha god-rugeedkiiso koowaad markaad ka tirtid inta kale waxaad u qaadan oo ay tahay qaypta.



### Laylis 2.3b

Ka shaqee jawaabtana hubiya

<b>b</b>	$300 \div 10 =$ _____	<b>t</b>	$650 \div 10 =$ _____	<b>j</b>	$830 \div 10 =$ _____
<b>x</b>	$40000 \div 10 =$ _____	<b>kh</b>	$1650 \div 10 =$ _____	<b>d</b>	$8370 \div 10 =$ _____
<b>r</b>	$50000 \div 10 =$ _____	<b>s</b>	$26040 \div 10 =$ _____	<b>sh</b>	$83720 \div 10 =$ _____
<b>dh</b>	$700000 \div 10 =$ _____	<b>c</b>	$560470 \div 10 =$ _____	<b>g</b>	$143910 \div 10 =$ _____

Isku qaybinta hadhaga leh

### Hawlgalka 2.3j

1 Raadi qaypta

<b>b</b>	$11 \div 10 =$ _____	<b>t</b>	$23 \div 10 =$ _____	<b>j</b>	$35 \div 10 =$ _____
<b>x</b>	$48 \div 10 =$ _____	<b>kh</b>	$59 \div 10 =$ _____	<b>d</b>	$121 \div 10 =$ _____
<b>r</b>	$174 \div 10 =$ _____	<b>s</b>	$286 \div 10 =$ _____	<b>sh</b>	$98 \div 10 =$ _____
<b>dh</b>	$525 \div 10 =$ _____				

2 Laqaybshaha, qaypta iyo hadhaaga bal si taxadur ah ugu fiirsada. Qaypta iyo hadhaaga si dagdag ah ama wado qarda jeex ah si aad ugu heshiin miyay jirtaa tab aad isticmaashaan?

### Tusaale 13

Ka shaqeeya

**b**  $231 \div 10 =$  \_\_\_\_\_      **t**  $6524 \div 10 =$  \_\_\_\_\_      **j**  $75253 \div 10 =$  \_\_\_\_\_

#### Jawaab

$$\begin{array}{r} 23 \\ 10 \overline{)231} \\ 20 \\ \hline 31 \\ 30 \\ \hline 01 \end{array}$$

Sidaa daraadeed  $231 \div 10 = 23$  hadhaa 1 sabaabto ah  
 $(23 \times 10) + 1 = 231$

**t**

$$\begin{array}{r} 652 \\ 10 \overline{)6524} \\ 60 \\ \hline 52 \\ 50 \\ \hline 24 \\ 20 \\ \hline 04 \end{array}$$

Sidaa daraadeed  $6524 \div 10 = 652$  Hadhaa 4 sababto ah  
 $(652 \times 10) + 4 = 6524$


**j**

$$\begin{array}{r} 7525 \\ 10 \overline{)75253} \\ 70 \\ \hline 52 \\ 50 \\ \hline 25 \\ 20 \\ \hline 53 \\ 50 \\ \hline 03 \end{array}$$

Sidaa daraadeed  $75253 \div 10 = 7525$  Hadhaa 3 sababto ah  
 $(7525 \times 10) + 3 = 75253$



Tiro idil oo godkeeda ku yaala godrugeedka koowaad unan ahayn 0 (eber) marka loo qaybiyo 10 magaran kartaa qaybtu inta ay noqon hadhaagu se imisa ayuu nogon.



Haa hey! Laqaybshaha godkiisa ku yaala godrugeedka koowaad wuxuu noqon hadhaaga inta kale na waxay noqon qaybta.

### Laylis 2.3t

Isu qaybi jawaabtana hubi

- |           |   |           |   |           |   |
|-----------|---|-----------|---|-----------|---|
| <b>b</b>  | $34 \div 10 = \underline{\hspace{2cm}}$     | <b>t</b>  | $267 \div 10 = \underline{\hspace{2cm}}$    | <b>j</b>  | $721 \div 10 = \underline{\hspace{2cm}}$    |
| <b>x</b>  | $6654 \div 10 = \underline{\hspace{2cm}}$   | <b>kh</b> | $2317 \div 10 = \underline{\hspace{2cm}}$   | <b>d</b>  | $8936 \div 10 = \underline{\hspace{2cm}}$   |
| <b>r</b>  | $46023 \div 10 = \underline{\hspace{2cm}}$  | <b>s</b>  | $30056 \div 10 = \underline{\hspace{2cm}}$  | <b>sh</b> | $79899 \div 10 = \underline{\hspace{2cm}}$  |
| <b>dh</b> | $143251 \div 10 = \underline{\hspace{2cm}}$ | <b>c</b>  | $489635 \div 10 = \underline{\hspace{2cm}}$ | <b>g</b>  | $672542 \div 10 = \underline{\hspace{2cm}}$ |

## Cutubka

# 3aad



## JAJABYDA IYO JAjab-TOBAN-LEYAASHA

### 3.1 JAJABYO QAYBO WALAX IDIL

Casharadiinii xisaabta ee fasalka 3aad xasuusta oo su'aalahan soo socda ka jawaaba.


#### Hawlgal 1

- 1 Waa maxay jajabku?
- 2 Waa maxay faa iidada jajabku?
- 3 Sawirka laydiga ee dhinaca biddixda ku sawiran u fiirsada oo ka jawaaba su'aalahan hoose.
  - b Qaybta laydiga ee ranjiga doogada ah la mariyay laydiga intee ayey ka tahay?
  - t Qaybta laydiga ee midabka casaanka lagu midabeeyey laydiga intee ayey ka tahay?
  - j Qaybta laydiga ee midabka buluuga la mariyey laydiga intee ayey ka tahay?
  - x Qaybta aanan midabka buluuga ah, la marinintee ayay laydiga ka tahay?



#### Tusaale 1


Hoostan laydiyada ku tusan qaybo isle'eg ayaa loo qaybiyay. Qaybta la midabeeyey jajab ku sheega (ku, muujiya ama ku cadeeya).



$$\frac{1}{2}$$

(Laba meelood meal)


t



$$\frac{1}{3}$$

(Saddexmeelood meal)


j



$$\frac{1}{4}$$

(Afar meelood meal)

x



$$\frac{1}{10}$$

(Toban meelood meal)

$\frac{1}{2}$  waa jajab 1 waxaa la yidhaahdaa sareeye, 2 dana waxaa la yidhaahdaa hooseeye.


$\frac{3}{4}$  Waa jajab 3 waa sareeyaha jajabka 4 na waa hooseeyaha jaabka.

Shay idil waaxdiisa (qaybtiiisa) waxa la yidhaahdaa jajab


Hal liin macaan ah haddii afarmeelood oo isle'eg ah inta loo qaybiyo, saddex meelood la qaado, qaybta

la qaaday, waxaa lagu muujiyaa afar meelood saddex ama  $\frac{3}{4}$  hooseeyaha oo ah (4) wuxuu tilmaamayaa inta meelood ee isle'eg ee liinta loo qaybiyay. Sareeyaha oo ah (3) wuxuu tilmaamayaa guud ahaan qaybaha la qaybiyay inta meelood ee la qaatay.


Shay idil waaxdiisa (qaybtiiisa) waxa la yidhaahdaa jajab



$\frac{1}{4}$  waa jajab



$\frac{3}{4}$  ← Sareeye  
Hooseeye



Ma ogtahay jajab sareeyihisu hadii uu 1 yahay in jajabka loo yaqaano jajab-halleed

Haddaase  $\frac{1}{2}, \frac{1}{3}, \frac{1}{4}, \frac{1}{5}, \dots, \frac{1}{10}, \dots, \frac{1}{20}, \dots, \frac{1}{100}$



IWM waa tusaalooyin ka mid ah.  
Jajab-halleedyada.

Waxa jira jajab-halleedyo la yaqaano oo magacyo kala duwan loogu yeedho

$\frac{1}{2}$  waa nus (badh)

Nus

$\frac{1}{4}$  waa rubuc

Rubuc

$\frac{1}{3}$  waa saddex dalool-hal

Saddex dalool-hal


$\frac{1}{10}$  waa holtobnay

Holtobnay


### Laylis 3.1

- 1 Qaybta midabka hurdiga lagu qalimeeyay jajab kumuujji (cadee).

b



t




j




x



kh



d



- 2** Shaxdan hoose dhamaystira.

	Jajab	Sareeye	Hooseeye	Sida loo akhriyo
b	$\frac{1}{12}$			
t	$\frac{3}{7}$			
j	$\frac{9}{20}$			
x	$\frac{13}{30}$			
kh	$\frac{30}{30}$			

- 3** Jajabyada sawir ku haboon oo u dhigma u sameeya (sawira).

$$\text{b} \quad \frac{1}{6} \qquad \text{t} \quad \frac{3}{10} \qquad \text{j} \quad \frac{7}{13} \qquad \text{x} \quad \frac{5}{15} \qquad \text{kh} \quad \frac{12}{12}$$

- 4** Hal kiintaal oo qamadin (bur) ah haddii shan qoys si isle'eg loogu qaybiyo hal qoys inta qamadinka ka soo gaa dhaysa jajab ku cadeeya.

- 5** Goobo ayaa kaartoon inta lagu sawiray 16 meelood oo isleeg loo googooyay.

**b** hal qayb inta ay tahay jajab ku cadeeya.

**t** shan qaybood jajab ku muujiya.

**j** 12 qaybood jajab ku muujiya.

### **3.2 ISBARBAR DHIGIDDA IYO HORSANAANTA**

#### **JAJABYADA LEH HOOSEEYE ISKU MID AH**


#### **Hawlgal 3.2**

- 1** Fiiiriya jajab yadan hoose


$$\frac{1}{5} : \frac{2}{5} : \frac{3}{5} : \frac{4}{5} : \frac{5}{5}$$

Jajabyadu waxay isaga 'eg yihiin waa maxay?





**2** Sawiradan hoose fiiriya



$$\frac{1}{9}$$



$$\frac{2}{9}$$



- b** qaybaha midabka buluuga lagu qalimeeya jajab ku magacaaba.
- t** markii walba laba jajab inta ad qaadatiin isbarbardhiga idinka oo adeegsanaya calaamada > ama <.

### Tusaale 1

$$\frac{1}{9} < \frac{2}{9} \text{ ama } \frac{2}{9} > \frac{1}{9}$$

### Tusaale 2

Sawir idinka oo adeegsanaya isbarbardhiga

$$\frac{2}{7} \text{ iyo } \frac{3}{7} \text{ tee baa weyn?}$$

#### Jawaab



$\frac{2}{7}$   $\frac{2}{7}$  iyo  $\frac{3}{7}$  hooseeyahodu waa 7 waa jajabyo isu eg)



$\frac{3}{7}$   $3 > 2$  sidaas darteed  $\frac{3}{7} > \frac{2}{7}$  ama maadaama ay  
 $2 < 3$ ,  $\frac{2}{7} < \frac{3}{7}$

### Tusaale 3

$$\frac{3}{10}, \frac{5}{10}, \frac{7}{10}$$

#### Jawaab

Maadaama ay yihiin jajabyo isu'eg waxaan isbarbardhigaynaa sareeyayaashooda.

$3 < 5 < 7$  waa run sidaas darteed  $\frac{3}{10} < \frac{5}{10} < \frac{7}{10}$  ama

$7 > 5 > 3$  waa run sidaas darteed  $\frac{7}{10} > \frac{5}{10} > \frac{3}{10}$

## Laylis 2

**1** Afar jajab-halleedyaal ah tusaale ahaan u qora (siiya)

**2** Qora afar tusaala oo jajabyo isku eg ah.

**3** Idinka oo ku adeegsanaya calaamadaha  $>$ ,  $<$  ama ‘=’ isbarbardhiga

**b**  $\frac{1}{2} \square \frac{1}{2}$

**t**  $\frac{1}{2} \square \frac{2}{2}$

**j**  $\frac{4}{7} \square \frac{3}{7}$

**x**  $\frac{11}{29} \square \frac{19}{29}$

**kh**  $\frac{29}{31} \square \frac{28}{31}$

**d**  $\frac{71}{81} \square \frac{69}{81}$

**4** Idinka oo ta yar kaga bilaabaya horsanaan udhiga

**b**  $\frac{3}{30}, \frac{29}{30}, \frac{13}{30}$

**t**  $\frac{75}{100}, \frac{25}{100}, \frac{50}{100}$

**5** Idinka oo ta weyn kaga bilaabaya horsanaan u dhiga (marka u horaysa ta ugu weyn, kadibna takale ee kuwa hadhay ugu weyn).

**b**  $\frac{13}{24}, \frac{7}{24}, \frac{10}{24}$

**t**  $\frac{32}{40}, \frac{39}{40}, \frac{18}{40}$

**6** Qaybaha hoostan lagu tilmaamay ee ka tirsan 50 kg oo sonkor ah jajab ku muuji

**b** hal kg oo sonkor ah jajab ku, muuji

**t** Siraad haddii ay 15 kg oo sonkor ku isticmaasho buskud samayntiisa, jajab ku cadee Siraad inta sonkor ah ay isticmaashay.

**j** labaatan iyo shan kg oo sonkor ah jajab ku sheega (muujiya)

**x** shan kg oo sonkor ah jajab ku muuj

### 3.3 ISUGEYNTA IYO KALAGOYNTA JAJABYADA LEH HOOSEEYE ISKU MID AH

#### B Isugeyn

##### Hawgal 3.3

Sawirkan hoose u fiirsada



**b** Inta midabka madow lagu midabeeyey jajabahaan waa imisa meelood?

**t** Inta midabka cas lagu midabeeyey jajb ahaan waa imisa meelood?

**j** Inta midabka madowga aan lagu midabaynin jajab ahaan waa imisa meelood?

**x**  $\frac{3}{10} + \frac{5}{10} = \underline{\hspace{2cm}}$

Laba jajab oo isku'eg in la isugeeyoo waxay u baahantahay oo qudhaata isugeynta sareeyayaa shooda

$$\frac{3}{10} + \frac{5}{10} = \frac{3+5}{10} = \frac{8}{10}$$

## Tusaale 5

Isugeeya

**b**  $\frac{4}{7} + \frac{2}{7}$

**t**  $\frac{12}{31} + \frac{11}{31}$

Jawaab

**b**  $\frac{4}{7} + \frac{2}{7} = \frac{4+2}{7} = \frac{6}{7}$

**t**  $\frac{12}{31} + \frac{11}{31} = \frac{12+11}{31} = \frac{23}{31}$

## Laylis 3.3

7 Isugeeya

**b**  $\frac{1}{2} + \frac{1}{2}$

**t**  $\frac{5}{8} + \frac{2}{8}$

**j**  $\frac{12}{20} + \frac{7}{20}$

**x**  $\frac{14}{32} + \frac{11}{32}$

**kh**  $\frac{22}{50} + \frac{19}{50}$

**d**  $\frac{12}{100} + \frac{71}{100}$

8 Cali mushaarka uu helo  $\frac{2}{7}$  wuxuu ku bixiyaa kirada guriga  $\frac{3}{7}$  na wuxuu ku bixiyaa cunto. Haddaba cali

**b** Mushaarkiisa intee in le'eg ayuu ku bixiyaa kirada kuriga iyo cuntada?

**t** Kharashkiisa weyni ma ta cuntadaa mise waa ta kirada guriga?

9 Hal fasal ardayda wax ku barataa  $\frac{1}{10}$  waxay xubno ka yihiin ururka bisha cas,  $\frac{3}{10}$  waxay xubno ka yihiin ururka ciyaaraha isboortiga  $\frac{2}{10}$  waxay xubno ka yihiin ururka fanka iyo qoraalada,  $\frac{4}{10}$  waxay xubno ka yihiin ururka samafalka. Hal arday hal urur in ka badan xubin kama noqon karo.

**b** Ardayda xubno ka ah ururada kala ah ciyaaraha isboortiga iyo fanka iyo qoraalada intee ayey ardayda fasalka ka yihiin?

**t** Ardayda ku tirsan ururada kala ah fanka iyo qoraalada iyo ururka samafalka intee ayey ardayda fasalka ka yihiin?

**j** Ardayda xubnaha ka ah ururka bisha cas iyo kuwa xubnaha ka ah ururka samafalka haddi ay midoobaan oo ay isku abaabulaan hal urur tirada xubnaha ka ah ururka cusub intee in le'eg ayey ka tahay tirada ardayda guud ee fasalka?

**x** Ururka ciyaaraha isboortiga marka laga reebo ururada kale ardayda ku daywaansan intee in le'eg ayey ka yihiin ardayda guud ee fasalka.

## T Kala gooyn

### Haqqlaka 4

Hal furun oo qaabka goobada leh haddii rubuc inta laga gooyo laga saaro.

- b** Furunka idil jajab ku muujiya
- t** Qaybta la gooyay ee laga saaray jajab ku muujiya
- j** Furunka hadhay jajab ku muujiya



Furun idil



Qaybta laga saaray

Furunka hadhay

Laba jajab oo isku eg in la kala gooyo waxay u baahan tahay oo qudhaata kala goynta sareeyahooda

$$\frac{4}{4} - \frac{1}{4} = \frac{4-1}{4} = \frac{3}{4}$$

## T usaale 6


Kalagooya

**b**  $\frac{9}{10} - \frac{4}{10}$

**t**  $\frac{16}{24} - \frac{7}{24}$

Jawaab

**b**



Sidaas darteed,  $\frac{9}{10} - \frac{4}{10} = \frac{9-4}{10} = \frac{5}{10}$

**t**  $\frac{16}{24} - \frac{7}{24} = \frac{16-7}{24} = \frac{9}{24}$

### Laylis 3.4

1 Kalagooya

**b**  $\frac{4}{6} - \frac{2}{6}$

**t**  $\frac{5}{10} - \frac{3}{10}$

**j**  $\frac{11}{12} - \frac{5}{12}$

**x**  $\frac{14}{17} - \frac{3}{17}$

**kh**  $\frac{17}{20} - \frac{15}{20}$

**d**  $\frac{15}{20} - \frac{5}{24}$

**r**  $\frac{20}{30} - \frac{4}{30}$

**s**  $\frac{100}{100} - \frac{95}{100}$

- 2 Rooda lacag la siiyay in noqonaysa  $\frac{2}{5}$  waxay ku iibsatay buug. Inta u hadhay jajab ahaan waa imisa?
- 3 Nin beeralay ah ayaa  $\frac{3}{8}$  dhul beereedkiisa ku beeray gallay. Dhulka aanan gallayda lagu beerin intee in le'eg ayuu ka yahay dhamaan dhulbeereedka.
- 4 Dhulbeereed la goobay  $\frac{2}{8}$  waxaa laga beeray hadhuudh.  $\frac{1}{8}$  na waxa laga beeray qamadin. Inta aanan waxba lagu beerin intee ayey le'egtahay?

### 3.4 JAJABYADA ISUDHIGMA

#### Hawol 3.5



Axmad iyo khadra waxaa la siiyay hal hal liin ah oo isle'eg.

Khadra liinta laba meelood oo isle'eg ayay u qaybisay. Kadib-na hal qayb ayay cuntay. Axmad na liinta afarmeedood oo isle'eg intu uqaybiyay, ayuu laba qaybood cunay

**b** Khadra liinta ay cuntay jajab ku cadeeya (qora)

**t** Axmad inta uu cunay jajab ku cadeeya (qora)

**j** Laba dooda midkee baa qayb weyn cunay?



Jajabyada muujiya waax isku mid ah waxa la yidhaahda Jajabyo isudhigma

$$\frac{1}{2} \text{ iyo } \frac{2}{4} \text{ waa jajabyo isu dhigma}$$


#### Tusaale

**b**




$$\frac{1}{3}$$

**t**



$$\frac{2}{6}$$

**j**



$$\frac{3}{9}$$

Sida aad ku aragtiin sawirada waaxyaha la qalimeeyay ee lagu muujiiyay jajabyada  $\frac{1}{3}, \frac{2}{6}$  iyo  $\frac{3}{9}$  waa isku mid sidaas darteed jajabyada  $\frac{1}{3}, \frac{2}{6}$  iyo  $\frac{3}{9}$  waa jajabyo isku dhigma ufiirso  $\frac{1}{3} = \frac{2}{6} = \frac{3}{9}$ .

### Hawlalka 4

- 1** Inta midabka madowga ahi jajabahaan waa imisa?
- 2**  $\frac{1}{2}$  sareeyihiiisa iyo hooseeyihiiisa  $2$  ku dhufta. Maxaad hesheen?  
 $\frac{1}{2}$  sareeyihiiisa iyo hooseeyihiiisa  $3$  ku dhufta. Maxaad hesheen?  
 $\frac{1}{2}$  sareeyihiiisa iyo hooseeyihiiisa  $4$  ku dhufta. Maxaad hesheen?  
 $\frac{1}{2}$  sareeyihiiisa iyo hooseeyihiiisa  $5$  kudhufta maxaad hesheen?
- 3**  $\frac{1}{2}$  Jajabyada ay isudhigmaan falanqeeya oo qoro.


### Tusaale 8

$$\frac{1}{4} \text{ jajabyada ay isu dhigmaan soo saara}$$

#### Jawaab

- $\frac{1}{4} = \frac{1 \times 2}{4 \times 2} = \frac{2}{8}$  sareeyaha iyo hooseeyaha oo  $2$  lagu dhuftay.
- $\frac{1}{4} = \frac{1 \times 3}{4 \times 3} = \frac{3}{12}$  sareeyaha iyo hooseeyaha oo  $3$  lagu dhuftay.
- $\frac{1}{4} = \frac{1 \times 4}{4 \times 4} = \frac{4}{16}$  sareeyaha iyo hooseeyaha oo  $4$  lagu dhuftay.
- $\frac{1}{4} = \frac{1 \times 5}{4 \times 5} = \frac{5}{20}$  sareeyaha iyo hooseeyaha oo  $5$  lagu dhuftay.
- $\frac{1}{4} = \frac{1 \times 6}{4 \times 6} = \frac{6}{24}$  sareeyaha iyo hooseeyaha oo  $6$  lagu dhuftay.
- Sidaas darteed  $\frac{1}{4}, \frac{2}{8}, \frac{3}{12}, \frac{4}{16}, \frac{5}{20}, \frac{6}{24}$  waa jajabyo isku dhigma.

### Laylis 5

- 1** Jajabyadan hoose middi walaba shan shan jajabyo oo ay isudhigmaan u raadiya  
**b**  $\frac{1}{10}$                     **t**  $\frac{5}{12}$                     **j**  $\frac{100}{200}$
- 2** Jajabyada lab labada ah ku tilmaama laba sawir oo waaxdoodu (qaybtoodoo) ay isku mid tahay.  
**b**  $\frac{1}{5}, \frac{2}{10}$                     **t**  $\frac{2}{5}, \frac{4}{10}$                     **j**  $\frac{3}{8}, \frac{6}{16}$

- 3** Shaxda dhamaystira

Jajab	Sareeyaha iyo hoosee yaha marka lagudhufto					
	2	3	4	5	6	7
$\frac{1}{2}$	$\frac{2}{4}$					
$\frac{1}{3}$		$\frac{3}{9}$				
$\frac{2}{3}$			$\frac{8}{12}$			
$\frac{6}{7}$				$\frac{30}{42}$		
$\frac{3}{10}$					$\frac{18}{60}$	
$\frac{12}{23}$						$\frac{84}{161}$


### **3.5 TOBAN-DALOOLADA, Boqol DALOOLADA IYO JAJAB-TOBAN LAYAASHA**

#### **B Toban-Daloolada (Tobanley) iyo Jajab-Tobanle**

#### **Hawlgal 6**

Fiiriya Fallaadha tirada ee hoos lagu muujiyay. Falaadha tirada dusheeda 0 ilaa 1 waxa loo qaybiyay 10 meelood oo isle'eg.

- 1** Idinka oo koox koox ah sanduuqa waxaa ka maqan ku buuxiya.



- 2** Falaadha tirada dusheeda jajabyada ku qoran hooseeyayaashoodu waa imisa? \_\_\_\_\_

- 3** Jajabyadani ma jajabyo isku e'g baa?

- 4** Sida falaadha tirada dusheeda ku muujisan hal qaybi (hal xariijin) waaxda idil waxay ka tahay  $\frac{1}{10}$ .

- Laba qayboodi se? \_\_\_\_\_
- Sagaal qayboodi se? \_\_\_\_\_
- Saddex qayboodi se? \_\_\_\_\_

- Toban qayboodi se? \_\_\_\_\_
- Shan qayboodi se? \_\_\_\_\_

Sida aad hawsha korka ku aragteen dhamaan jajabyadu  $\frac{1}{10}$ ,  $\frac{2}{10}$ ,  $\frac{3}{10}$  I.W.M midkasta hooseeyahiisu waa 10.

Jajabka uu hooseeyahiisu  
yahay 10 waxaa la  
yidhaahda tobaney  
(toban-dalool)

Tobanley (toban-Dalool) kasta waxaa loo qori karaa lagu cadayn karaa ama lagu sharixi karaa tiro kaloo ku began oo loo yaqaano jajab-tobanlay.

## Tusaale 9

Laydiyo isku mid ah ayaa sida hoos ku tusan 10 meelood oo isle'eg loo qaybiyyay. Qaybaha midabka doogada lagu qalimeeyay ku muujiya ama ku qora tiro tobantobanlay (toban-daloola) ah iyo tiro jajab-tobanle ah.




Qaybta midabka doogada lagu qalimeeyay  
waa  $\frac{1}{10}$  ama 0.1



Qaybta midabka doogada leh  
waa  $\frac{2}{10}$  ama 0.2



Qaybta midabka doogada ah  
waa  $\frac{3}{10}$  ama 0.3



Qaybta midabka doogada ah  
waa  $\frac{4}{10}$  ama 0.4

$\frac{1}{10}, \frac{2}{10}, \frac{3}{10}, \frac{4}{10}, \frac{5}{10}, \frac{6}{10}, \frac{7}{10}, \frac{8}{10}, \frac{9}{10}, \frac{10}{10}$  waxaa la yidhaahdaa tobantobanlayaal (toban-Daloo layaa)


0.1, 0.2, 0.3, ... 0.9, 1.0 waxaa la yidhaahdaa jajab-tobnalyaal

0.1 waxaa loo akhriyaa eber dhobic hal.

0.2 waxaa loo akhriyaa eber dhobic laba.

Labada tiro ee idil dhexdooda dhobicda (barta) la dhigo waxaa la yidhaahda dhobicda (barta) jajab-tobnalahaa.

Sida dusha lagu cadeeyay shay idil oo u dhaxeeyea 0 iyo 1 falaadha tirada dusheeda waxaa lagu tilmaami karaa tobantobanlayaal (toban-daloolayaa) iyo jajab-tobanlayaal.




## Laylis 6

- 1** Shadan hoose buuxiya

Erayo ku sheegista jajabyada		Tobanlay	Jajab-tobanlay
<b>b</b>	Toban meelod laba	$\frac{2}{10}$	0.2
<b>t</b>	Toban meelood saddex		
<b>j</b>	Toban meelood shan		
<b>x</b>	Toban-meelood toddoba		
<b>kh</b>	Toban meelood sagaal		
<b>d</b>	Toban meelood toban		

- 2** Sawiradan hoose qaybaha la qalimeeyay ku sheega (ku muujiya) tiro tobanlay ah tiro jajab-tobanlay ah.



- 3** Tobanlay (toban-dalool) kasta u bedel jajab-tobanle.

<b>b</b>	$\frac{6}{10}$	<b>t</b>	$\frac{7}{10}$	<b>j</b>	$\frac{8}{10}$	<b>x</b>	$\frac{9}{10}$
----------	----------------	----------	----------------	----------	----------------	----------	----------------


- 4** Jajab-tabanlay kasta u bedala tobanlay (toban-daloole).

<b>b</b>	0.1	<b>t</b>	0.2	<b>j</b>	0.3	<b>x</b>	0.4
----------	-----	----------	-----	----------	-----	----------	-----

### T Boqol-Daloole (Boqolay) iyo Jajab-tobanle

#### Hawgal 7

Labajibbaaranahan hoose ee dhinacyadiisu yihiin 10 iyo 10 waxa loo qaybiyyay 100 meelood oo isle'eg




- b** Meelaha midabka cas lagu midabeeyey waa boqol meelood – ama   $\frac{\square}{100}$

- t** Inta midaka buluuga lagu midabeeeyey waa boqol meelood – ama  $\frac{\square}{100}$
- j** casaanka iyo buluuga inta lagu midabeeeyey waa boqolmeelood – ama  $\frac{\square}{100}$
- x** Inta aanan la midabaynin waa boqolmeelood – ama  $\frac{\square}{100}$

Jajab-boqolayaasha toban-daloolda (dhibic-toban layaasha) waa lagu muujin karaa.


## Tusaale 10




Laba jibaarahan waxaa loo qaybiay 100 meelood oo isle'eg.

- b** Inta casaanka lagu midabeeeyey waa  $\frac{1}{100}$  marka lagu qoro (lagu muujiyo) tior boqolley ah (boqol-daloole). Marka lagu sharraxayo Jajab-tobonle waxaa loo qaraa 0.01 (eber dhic eberhal)
- t** Inta madawoga lagu midabeeeyey marka lagu qoro tior boqol-dalool (boqoley) ah waa  $\frac{2}{100}$  (boqolmeelood laba). Marka lagu muujiyo (lagu qoro) tiro jajab-tobnale ah waa 0.02 (eber dhibic eber laba).

## Shaqa kooxeed 1



- j** Inta casaanka lagu midabeeeyey ku qor boqoley (boqol-daloole)
- x** inta casaanka lagu midabeeeyey ku qori jajab-tobanle
- kh** inta madowaga lagu midabeeeyey ku qora boqolley (boqol-daloole)
- d** inta madowga lagu midabeeeyey ku qora jajab-tobanle.
- r** inta aanla midabaynin ku qora boqolley (boqol-daloole).
- s** Inta aanan la midabaynin ku qora jajab-tobanle.



## Gabagabayn

Tirooyinka idil sida shaxda qiima-rugeedka loogu dul qoro waad soo barateen. Imikana waxaad baranaysiin sida jajab-tobanleyasha loogu dul qoro shaxda qiima-rugeedka.

## Tusaale 3

Tirooyinkan hoose ku dul qora shaxda qiima-rugeed ka.

**b** 0.25      **t** 0.75      **j** 1.25      **x** 23.85      **kh** 374.78

### Jawaab

	Tirada jajab- tobanle	Godka (100)	Godka (10)	Godka (1)	Godka $\frac{1}{10}$	Godka $\frac{1}{100}$
<b>b</b>	0.05			0	0	5
<b>t</b>	0.75			0	7	5
<b>j</b>	1.25			1	2	5
<b>x</b>	23.85		2	3	8	5
<b>kh</b>	374.78	3	7	4	7	8

3 7 4 . 7 8  
 God-rugeedka boqolad  
 God-rugeedka tobnaad  
 God-rugeedka koowaad

God-rugeedka boqolayda (8 boqleyal)  $\left(\frac{8}{100} = 0.08\right)$   
 God-rugeedka tobaneyda (7 tabanlayal)  $\left(\frac{7}{10} = 0.7\right)$

## Ufiirsada

Tirooyinka jajab-tobanlayaasha si caadi ah ayaan ugu adeegsanaa marka aan fulinayno hawlaha la xidhiidha nolol maalmeedkeena. Gaar ahaan tirooyinka jajab-tobanla yaasha waxaan ku isticmaal-naa arimaha la xidhiidha sarifaada lacagta, halbeegyada dhererka, halbeegyada culayska iyo waxyo kaloo la mid ah.

## Tusaale 4

$$75 \text{ saantiim waxay ka dhigantahay } 0.75 \text{ birr} = \frac{75}{100} \text{ birr (lacag)}$$

$$50 \text{ saantimitir waxay kadhigantahay } 0.50 \text{ mitir} = \frac{50}{100} \text{ mitir(dherer)}$$

$$2 \text{ birr iyo } 35 \text{ saantiim waxay kadhigantahay} = 2.35 \text{ birr} = \frac{235}{100} \text{ birr.}$$

**Isku bedalidda boqoleeyada (boqol-daloolada) iyo jajab-tobanlayda**

## Tusaale 5

Boqolleyda ubedala jajab-tobanalha ku began.

$$\textbf{b} \quad \frac{49}{100} \quad \textbf{t} \quad \frac{9}{100}$$

**Jawaab**

$$\textbf{b} \quad \frac{49}{100} = 0.49 \quad \textbf{t} \quad \frac{9}{100} = 0.09$$

$$0.09 \neq 0.90$$

$$0.09 < 0.90$$

## Tusaale 6

Jajab-tobanlayaashan hoose ubedala boqolley (boqol-daloole).


$$\textbf{b} \quad 0.54 \quad \textbf{t} \quad 0.89$$

**Jawaab**

$$\textbf{b} \quad 0.54 = \frac{54}{100} \quad \textbf{t} \quad 0.89 = \frac{89}{100}$$

## Laylis 7

- 1 Qaybaha midabka cas lagu qalimeeyay ee labajibbaaranaha ka tirsan tiro boqolley ah iyo tiro jajab-tobanle ah ku muujiya.



- 2** Warqada garaafka lagu sawiro ku sawira labajibbaarane dhinaciisu yahay 10 kadibna tirooyinkan hoose ee jajab-tobanla yaasha ah qaybaha udhigma hadheeya (madoobeeyaa).

**b** 0.08

**t** 0.85

**j** 0.91

**x** 0.99

- 3** Kuwan soo socda dhamaystira

**b**  $0.31 = \underline{3} \text{ tobanlay} + \underline{1} \text{ boqolay} = \frac{31}{100}$

**t**  $0.50 = \underline{\quad} \text{ tobanlay} + \underline{\quad} \text{ boqolay} = \underline{\quad}$

**j**  $0.69 = \underline{\quad} \text{ tobanlay} + \underline{\quad} \text{ boqolay} = \underline{\quad}$

**x**  $3.82 = \underline{\quad} \text{ kow} + \underline{\quad} \text{ tobanlay} + \underline{\quad} \text{ boqolay} = \underline{\quad}$

**kh**  $12.97 = \underline{\quad} \text{ toban} + \underline{\quad} \text{ kow} + \underline{\quad} \text{ tohanlay} + \underline{\quad} \text{ boqolay} = \underline{\quad}$

- 4** Jajab-tobanle ubedata

**b**  $\frac{6}{100}$

**t**  $\frac{38}{100}$

**j**  $\frac{79}{100}$

**x**  $\frac{192}{100}$

- 5** Boqolley ubedala

**b** 0.08

**t** 0.36

**j** 0.68

**x** 1.42

- 6** Godadka (astatirooyaasha) hoosta laga xariiqay qiima-rugeedkooda qora

**b** 4.67

**t** 3.82

**j** 43.25

**x** 49.12

- 7** Godka (astatiraha) 6 qiima-rugeedkiirsa sheega oo qora

**b** 0.06

**t** 0.60

**j** 6.12

**x** 60.14

- 8** Dhamaystira shaxda

Boqolley	$\frac{17}{100}$		$\frac{81}{100}$	$\frac{5}{100}$		
Jajab-tobanle		0.76			0.07	6.29

- 9** Kuwan hoose ku sheega (qora) tiro jajabtobanleyaal ah

**b** 95 saantiim

**t** 3 birr iyo 50 saantiim

**j** 78 sm

**x** 1 mitir iyo 15 sm

### **3.6 ISBARBAR DHIGIDA IYO HORSANAANTA JAJAB-TOBANLEYAASHA**

**Isbarbardhigidda jajab-tobanleyaasha leh ilaa 2-god oo midig ka xiga Barta jajab-tobanle**

Buugan dhexdiisa cutubka koowaad waxaad ku soo barateen isbarbardhigidda iyo horsanaanta tirooyinka idil. Imikana qayb hooseedka cutubkan waxaad ku baranaysiin isbarbardhigidda iyo horsanaanta tirooyinka jajab-tobanleyaasha.

#### **Hawlgalka 3.9**

Maxamed buug 32 xaashiyood leh wuxuu ku iibsaday qiima ah 2.30 Birr. Siraad na bug noocaas oo kale waxay ku iibsatay qiima ah 2.45Birr. Labada midkoodee baa buuga qiima qaali ah ku iibsaday?


#### **Tusaale 1**

Isbarbardhiga jajab-tobanlayaash qindiga ah ee soo socota.

**b** 0.57, 0.47      **t** 3.00, 3.01      **j** 12, 12.001      **x** 13.25, 12.98


#### **Jawaab:-**

- b** labada tiro waxaan isbarbardhigaynaa inaga oo ku salaynayna qiima-rugeedka godadka ay tirooyinku ka kooban yihii.



Markaan isbarbardhigayno waxaan kaga bilaabaynaa godadka ku yaala qiima-rugeedka ugu weyn (dhinaca biddixda) godadkooda ku yaala god-rugeedka koowaad way isle'eg yihii. ( $0 = 0$ ) godalkooda ku yaala god-rugeedka tobantayda way kala weyn yihii. ( $5 > 4$ ). Jajab-tobanalha weyni waa midka uu godkiisa ku yaala god-rugeedka tobantayda u ka wyn yahay ka kale.

Sidaas darteed,  $0.57 > 0.47$  ama  $0.47 < 0.57$



Sidaas darteed,  $3.00 < 3.01$  ama  $3.01 > 3.00$

**j**  $12.00 = 12$

Barta jajab-tobanlah dhinaceda midgoo ebaro qudhaata lagu qoro qiimaha tirada ma badasho. Sidaas darteed,  $12.0 = 12$  sidoo kale,  $12.00 = 12$ .

**x**  $13.25 > 12.98$

Marka hore waxaan isbarbahdhigaynaa tirooyinka idil. Maadaama ay tirooyinka idili kala weyn (yar) yihiin loo ma baahna in la isbarbardhigo tirooyinka ah jajab tobanleyaasha sidaas darteed  $13.25 > 12.98$  waayo  $13 > 12$ .

## Tusaale 2

Isbarbar dhiga jajab tobanleyaashan hoos ku qoran ka dibna u qora sida ay u kala weyn yihiin idinka oo ka bilaabaya kan ugu yar.

$3.2, 2.62, 2.543$  iyo  $3.18$

**Jawaab:-**

Marka la isbarbordhigayo toroooyinka ay godkooda kowga yahay 2.

$2.54 = 2.540$

$2.543 < 2.62$

Kuwa godkooda kowga uu yahay 3

$3.18 < 3.20$


Sidaa darted,  $2.54 < 2.543 < 2.62 < 3.18 < 3.2$

Halkanna waxaynu ku baran doonaa sida la isu barbardhigo jajab tobanleyaasha iyada oo la adeegsanayo fallaadha tirada.

## Tusaale 3

Idinka oo adeegsanaya fallaadha tirada isbarbardhiga tirooyinka soo socda kadibna horsanaan u qora ta ugu yar ilaa ta ugu weyn.

$0.7, 0.9, 0.3, 1.1, 1, 0.5$



Sida aad ka arkaysaan fallaadha tirada.

$0.3 < 0.5 < 0.7 < 0.9 < 1 < 1.1$

## Laylis 3.6

**1** Ka yar inta ad ka bilowdiin ilaa ka weyn horsanaan u qora.

**b**  $2.32, 2.2, 2.3$

**t**  $0.06, 0.02, 0.1$

**j**  $0.5, 0.05, 0.51$

### CUTUBKA 3 - JAJABYDA IYO JAJAB-TOBANLEYAASHA

**x** 5.01, 5.00, 5.10      **kh** 12.0, 12.06, 12      **d** 20.23, 20.2, 0.21, 20.19

**r** 0.9, 0.08, 0.80, 0.88      **s** 37.23, 36.4, 36.39, 36.09

- 2** Hal dhalo oo miriinda ah qiimahedu haddii uu yahay 3.50 Birr qiimaha hal baakid oo buskuda na 3.45 Birr kee ayaa qiima weyn leh?
- 3** Carte dhereriisu waa 1.56 mitir. Xaawo dhererkedu na waa 1.57 mitir. Labada midkee dheer?
- 4** Suuqa alaabaha jumladaha lagu iibyo 100 Birr waxaa lagu iibsan karaa 2.75 kiilo garaam oo subag ah. Suuqa tafaariiqda lagu iibya na 100 birr waxaa lagu iibsan karaa 2.25 kiilo garaam oo subag ahi. Hadaba qiimaha subagu suqee ayuu ku jaban yahay?
- 5** Gaadhi xumulka (rarka) lagu raro dhererka joogiisu marka uu raran yahay waa 2.9 mitir. Kaabad (buunda) ay gaadhi yadu hoos maraan dhoreka joogeedu waa 2.89 mitir. Gaadhigu isaga oo raran kaabada (buundada) miyuu hoos mari karaa? Mise ma karayo? Waayo?
- 6** Siyaad heerkulka jidhkiisa markii la cabbiray wuxu moqday 36.6 digrii sentigired. Maxamuud an markii la cabiray heerkulkiisa waxuu noqday 36.8 digrii sentigrade. Hadaba labadaas kee baa heerkul badan leh?

### **3.7 ISUGEYNTA IYO KALA GOYNTA JAJAB-TOBAN-LEYAASHA LEH ILAA 2-GOD OO MIDIG KA XIGA BARTA JAJAB-TOBANLAHA**

**B** Isugeyn

#### Hawlalka 3.10

- 1** Hal qalin qori qiimihiisu haddii uu yahay 1.15 Birr. Sidoo kale hal qalin qiimihiisu haddii uu yahya 2.25 Birr. Dhamaan qiimaha labada shay waa imisa?
- 2** Arday ayaa hal buug ku iibsaday 13.50 Birr. Ardaygan qudhiiisa ayaa kubad ku iibsaday 5.35 Birr. Ardaygu buuga iyo kubadda uu iibsaday dhamaan inta uu ku bixiyay waa imisa?

#### Tusaale 1

Isugee

**b**  $0.3 + 0.4$       **t**  $0.14 + 0.32$


#### Jawaab

**b**  $0.3 + 0.4 = \underline{\hspace{2cm}}$

Tallaabooyin kala duwan ayaa sida hoostan lagu muujiyay la isugu geyn karaa.


**Talaabada 1<sup>aad</sup>:** Walax (shay) idil oo la qayqaybiyay iyada oo la adeegsanayo

$$0.3 + 0.4 = 0.7$$



**Talaabada 2<sup>aad</sup>:** Iyada oo lagu adeegsanayo falaadhatirada.

$$0.3 + 0.4 = 0.7$$



**Talaabada 3<sup>aad</sup>:** Iyada la isticmaalayo god-rugeedka godadka.

- Biyrooyinka jog isku hoos qor adiga oo isku hoos qoraya godadka god-rugeedkooda mid yahay.
- Adiga oo ka bilaabaya god-rugeedka qiimihiisu yar yahay (dhinaca midig) isugee.  

$$\begin{array}{rcl} 0.3 & (3+4=7) \\ \underline{0.4} & (0+0=0) \\ \hline 0.7 \end{array}$$
- Barta jajab-tobanlaha adiga oo meesheeda ilaalinaya hoos u daji.

**Tallaabada 4<sup>aad</sup>:** Iyada oo marka hore jajab-tobanlaha loo beddelayo jajabka ku began.


Kadibna marka la helo natijada isugeynta ayaa mar labaad loo celin jajab-tobanle.

$$0.3 + 0.4 = \frac{3}{10} + \frac{4}{10} = \frac{3+4}{10} = \frac{7}{10} = 0.7$$

Sidaas darteed  $0.3 + 0.4 = 0.7$

†  $0.14 + 0.32 = \underline{\hspace{2cm}}$

**Tallaabada 1<sup>aad</sup>:** Iyada oo la adeegsanayo labajibbaarane ay dhererka dhinacyadiisu yihin 10.



$$0.14 + 0.32 = 0.46$$

U firso labajibbaaranaha qoyabaha lagu qalimeeyaya labada midab waxay u dhigmaan 0.46

**Tallaabada 2<sup>aad</sup>:** Adiga oo isticmaalya god-rugeedka godadka

- Birooyinka jog isku hoos qor adiga oo isku hoos qoraya godadka isku began.
- Adiga oo ka bilaabaya god-rugeedka qiimihiisu ugu yarhay (dhinac mididg) isugee.  
0.14  
0.32  
0.46  
(4 + 2 = 6)  
(1 + 3 = 4)  
(0 + 0 = 0)
- Barta (dhibicda) jajab-tobanlaha adiga oo meesheeda u ilaalinaya hoo udaji.

**Tallaabada 3<sup>aad</sup>:** Iyada oo marka hore jajab-tobanlaha loo beddalayo jajabka ku began.

Kadibna marka la helo natijada isugeynta ayaa mar labaad loo rogi jajab-tobanle.

$$0.14 + 0.32 = \frac{14}{100} + \frac{32}{100} = \frac{14+32}{100} = \frac{46}{100} = 0.46$$

Sidaas darteed  $0.14 + 0.32 = 0.46$

## T Kalagoyn

### Tusaale

Kalagoo

**b** 0.9 – 0.4


**x** 3.46 – 1.68

**t** 2.86 – 0.32

**b** 0.9 – 0.4

**j** 3.4 – 1.8

**Tallaabada 1<sup>a1d</sup>:** Iyada oo la adeegsanayo falaadha tirada.



**Tallaabada 2<sup>aad</sup>:** Iyada oo la isticmaalayo god-rugeedyada godadka.

- Tirooyinka idil sida aan u kala goyno si la mid ah ayann tirooyinka gododkooda isku beegin inta aan joog isku hoos qorno ayaan kalagoynaynaa.

$$\begin{array}{r}
 0.9 \\
 -0.4 \\
 \hline
 0.5
 \end{array}$$

(9 – 4 = 5)

(0 – 0 = 0)

- Barta (dhobicda) jajab-tobanlaha meesheeda inaga oo ilaalinayna ayaan hoos udajinaynaa.

$$9 \text{ jajab-tobanle} - 4 \text{ jajab-tobanle} = 5 \text{ jajab-tobanle}$$

**Tallaabada 3<sup>aad</sup>:** Iyada oo marka hore jajab-tobanlaha loo bedalayo jajab.

$$0.9 - 0.4 = \frac{9}{10} - \frac{4}{10} = \frac{9-4}{10} = \frac{5}{10} = 0.5$$

Sidaas darteed,  $0.9 - 0.4 = 0.5$

## Tusaale 6

Xisaabiya  $27.655 - 9.06$

$$\begin{array}{r}
 27.655 \\
 -9.060 \\
 \hline
 27.655
 \end{array}$$

9.06 “0” raaci si ay tirada dhibcaha isula ekaadaan

-9.060

$$\begin{array}{r}
 27.655 \\
 -9.060 \\
 \hline
 18.595
 \end{array}$$

iska daa dhibcaha oo sidii caadiga ahayd u kala goo

18.595

$$\begin{array}{r}
 27.655 \\
 -9.060 \\
 \hline
 18.595
 \end{array}$$

dhobicda ku qor halka ku aaddan oo ka hooseeysa.

Sidaa darteed,  $27.655 - 9.06 = 18.595$

### Laylis 3.7

**1** Isugeeya

<b>b</b>	0.2 <u>+0.4</u>	<b>t</b>	0.12 <u>+0.52</u>	<b>j</b>	1.32 <u>+.81</u>	<b>x</b>	0.5 + 0.4
<b>kh</b>	0.8 + 0.7	<b>d</b>	1.3 + 1.6	<b>r</b>	2.7 + 3.8	<b>s</b>	0.31 + 0.27
<b>sh</b>	1.34 + 2.68	<b>dh</b>	3.47 + 4.99	<b>c</b>	972.54 + 0.96		

**2** Kala gooya


<b>b</b>	1.8 <u>-0.3</u>	<b>t</b>	2.4 <u>-0.7</u>	<b>j</b>	3.41 <u>-1.23</u>	<b>x</b>	2.1 – 0.2
<b>kh</b>	6.4 – 3.6	<b>d</b>	26.59 <u>-13.17</u>	<b>r</b>	31.45 <u>-15.68</u>	<b>s</b>	41.06 <u>-12.48</u>

- 3** Hal kiish waxaa ku jira 17.8 kg oo bariis ah. Kiish kale na waxa ku jira 12.9 kg oo bariis ah. Labada kiish ee bariisku ku jiro guud ahaan culayskoodu waa imisia?
- 4** Nin surwaalkiisa oo qudhaata wuxu u baahan yahay maro 1.25 mitir ah. Koodkiisuna wuxu u baahan yahay dhar 1.65 mitir ah Ninku koodh iyo surwaal inuu tosho inte in le'eg oo maro ah ayuu u baahan yahay?
- 5** Sibidh iyo niis la isku walaaqay oo loogu talagalayan in dhismo lagu dhiso culayskoodu waa 35.75 kg. niiska culayskiisu hadii uu yahay 18.86 kg sibidhka culayskiisu waa imisa?
- 6** Arday ayaa doonay in uu iibsado buug qiimihiisu yahay 12.75 Birr. Hase a haatae ardaygu lacagtu haystaa waa 7.95 Birr. Buuga in uu iibsado lacagtu u baahan yahay waa intee in le'eg?

## Cutubka

# 4 aad

## CABBIRAAADDA



### 4.1 CABBIRAAADDA DHERERKA

Dalkeena dadku marka ay cabbirayaan dhererka waxay isticmaalaan qaybo kala duwan oo jidhkooda ka mid ah. Kuwaas oo ah

Cagta, farta, taakada xusulka iyo talaabodu waa halbeeg-dhaqaameedyo loo isticmaalo cabbiraada dhererka.

#### Hawlgalka 1

- 1 Dhererka buugtiina farahiina ku cabbira
- 2 Dhererka dhinaca gudban ee sabuuradda xusulkiina ku cabbira (xusuliya)
- 3 Fasalkiina dhererka afartisa dhinac midkood cagtiina ku cabbira. Sidoo kale Talaabadiina ku cabira.
- 4 Arday raali ka ah dhererka joogiisa taakadiina ku cabira

Korka Hawlgalka 4.1 natijada aad heesheen in ayanan isku mid ahayn oo ay kala duduwan tahay ma isla aragteen?

Waayo ardayda xusuladoodu, cagahoodu taakooyinkoodu, talaabooyinkoodu iyo dhererka fartoodu sida baaxada jidhkoodu uu ukala duwan yahay ayay ukala duwan yihiin. Sidaas awgeed waxa la doorbidaa oo jira halbeegyo rasmi ah oo cabbirka dhererka loo isticmaalo oo qofkasta oo cabbira iyo meelkasta oo lagu cabbiro ay natijadu mid uun tahay.

### 4.1.1 Halbeegyada Cabbirka dhererka





B ilaa T dhererka (fogaanta) u dhaxaysaa waa 3 santi mitir mastarada dusheeda santi mitir kasta eega. Dherer marka aan cabbirayno dhererku meesha uu ka bilaabmo ilaa meesha uu ku dhamaado mastarada ayaan ku cabbiri karnaa. Dhererada gaagaaban waxaan ku cabbirnaa santi mitir. Hal santimitir tobant meelood marka loo qaybiyo hal meel waxa loo yaqaanaa hal mili mitir (mm).

$$1 \text{ sm} = 10 \text{ mm}$$

$$\frac{1}{10} \text{ sm} = 10 \text{ mm} \text{ ama}$$

$$0.1 \text{ sm} = 1 \text{ mm}$$

### Hawlgalka 4.2

**1** Dhererada xariijimahan hoose mastarad ku cabbira.

**b** **t** **j**

**2** Dhereradan hoose mastarad ku cabbira.

- Ballaca iyo dhererka buugtiina.
- Ballaca iyo dhererka dheskiyaashiina.

**3** Fasalkiina laba dhinac cabbira

**4** Agagaarkiina geed weyn dhererka joogiisa qiyaasa inta uu noqon karo.

**5** Gurigiina ilaa dugsigiina fogaanta u dhaxaysa qiyaasa inta ay noqon karto.

**6** Fogaanta tartanka orodka maraatonka dhereriisu waa imisa?

**7** Idinkoo oo kaga bilaabaya halbeega dhererka ee ugu yar halbeegyada km, sm, mm, m horsanaan u qora.

**8** Dhererkee ayaa weyn?

**b** 1 km ama 100 sm    **t** 1000m ama 2 km    **j** 10 sm ama 99 mm

### HALBEEGYADA RASMIGA AH EE CABBIRKA DHERERKA

- |                    |                   |
|--------------------|-------------------|
| • Mili mitir (mm)  | • Mitir (m)       |
| • Santi mitir (sm) | • Kilo mitir (km) |

Dhererada gaagaaban in aan santi mitir ku cabbirno waad aragteen Sidoo kale dhererada dhaadheer (sida dhinaca fasalkiina, dhererka jooga giddaaraka ; dhererka garoonka ciyaarta) waxaan ku cabbiraynaa mitir.

Shay dhererkii hal mitir yahay 100 meelood oo isleeg marka loo qaybiyo, halkii meel waa 1 santi-mitir.

$$1 \text{ mitir} = 100 \text{ santi mitir}$$

$$1 \text{ santi mitir} = \frac{1}{100} \text{ mitri, ama}$$

$$1 \text{ santi mitir} = 0.01 \text{ mitir}$$

Sido kale dhererada aad u dhaadheer (tusaale ahaan fogaanta hal magaalo ilaa magaalo kale u dhaxaysa) waxa lagu cabbiraa halbeega loo yaqaano kilo mitir (km).

Hal kilomitir marka 1000 meelood oo isle'eg loo qaybiyo halkii meel waa 1 mitir.

$$1 \text{ km} = 1000 \text{ mitir}$$

### 4.1.2 Isku bedelidda Halbeegyada dhererka

#### UFIIRSADA

$$1 \text{ sm} = 10 \text{ mm} \quad 1 \text{ mm} = \frac{1}{10} \text{ sm}$$

$$1 \text{ m} = 100 \text{ sm} = 10 \times 100 = 1000 \text{ mm}$$

$$1 \text{ sm} = \frac{1}{100} \text{ m}$$

$$1 \text{ km} = 1000 \text{ m} = 100 \times 1000 = 100,000 \text{ sm} = 1,000,000 \text{ mm}$$

#### B Isku bedelidda Halbeegyada dhererka ee waa weyn oo loo bedalayo kuwa yar-yar

#### Tusaale 1

- b** 9 sm iyo 5 mm u bedal mm. **t** 2500 m u bedal sm.

#### Jawaab

**b**  $1 \text{ sm} = 10 \text{ mm}$

$$\begin{aligned} 9 \text{ sm} \text{ iyo } 5 \text{ mm} &= 9 \times 10 \text{ mm} + 5 \text{ mm} \\ &= 90 \text{ mm} + 5 \text{ mm} \\ &= 95 \text{ mm} \end{aligned}$$

Sidaas darteed 9 sm iyo 5 mm = 95 mm

**t**  $1 \text{ m} = 100 \text{ sm}$

$$\begin{aligned} 2500 \text{ m} &= 2500 \times 100 \text{ sm} \\ &= 250,000 \text{ sm} \end{aligned}$$

Sidaas darteed 2500m = 250,000 sm

## Shaqa kooxeed 1

- b** 789 km ubeddala mitir  
**t** Hal km dhaxdiisa imisa rubuc km aaya ku jirta?

**HALBEEGA EE CABBIERKA DHERERKA SI AAN UGU BEDDALNO HALBEEG YAR WAXAAN KUDHUFANAYNAA TIRADA BEDELAAH A**

- Sm marka aanu bedalayno mm 10 ayaan ku dhufanaynaa.
- m markaan u bedalyno sm 100 ayaan ku dhufanaynaa
- km markaan u bedalyno m 1000 ayaan ku dhufanaynaa.

**T Isku bedelidda Halbeegyadda dhererka ee yar-yar oo loo bedelayo kuwa waaweyn**

## Tusaale 2

- b** 700 mm ubeddala sm      **t** 265 sm u beddala mitir.

### Jawaab

**b**  $10 \text{ mm} = 1 \text{ sm}$   
 $700 \text{ mm} = 70 \times 10 \text{ mm}$   
 $= 70 \times 1 \text{ sm} = 70 \text{ sm}$

Sidaas darteed,  $700 \text{ mm} = 70 \text{ sm}$

**t**  $100 \text{ sm} = 1 \text{ m}$   
 $265 \text{ sm} = 200 \text{ sm} + 65 \text{ sm} = 2 \times 100 \text{ sm} + 65 \text{ sm}$   
 $= 2 \times 1 \text{ m} + 65 \text{ sm} = 2 \times 1 \text{ m} + \frac{65}{100} \text{ m}$   
 $= 2 \text{ m} + 0.65 \text{ m}$   
 $= 2.65 \text{ m}$

Sidaas darteed,  $265 \text{ sm} = 2.65 \text{ m}$  ama  $265 \text{ sm}$

## Shaqo kooxeed


- 1 250 km ubeddala m
  - 2 78500 m u bedala km
  - 3 Kee baa weyn? Idinka oo ubedalaya halbeeg isku midah isbarbardhga.
- |                            |                          |
|----------------------------|--------------------------|
| <b>b</b> 2 km ama 1990 m?  | <b>t</b> 4 sm ama 39 mm? |
| <b>j</b> 0.75 km ama 500m? |                          |

### Laylis 4.1

- 1** mm u bedala  
**b** 5 sm      **t** 120 sm iyo 5 mm      **j** 2240.5 sm
- 2** sm u bedala  
**b** 127 m      **t** 7,940 m iyo 25 sm      **j** 9500 m iyo 50 sm
- 3** Mitir ubedala.  
**b** 625 km      **t** 42 km iyo 200 m      **j** 845.75 km
- 4** sm u bedala.  
**b** 3500 mm      **t** 57240 mm      **j** 1,000,000 mm
- 5** mitir u bedala.  
**b** 3500 sm      **t** 5720 sm      **j** 124,750 sm
- 6** km u bedala.  
**b** 780,000 m      **t** 700,000 sm      **j** 32500 m
- 7** Idinka oo adeegsanaya calaamadaha '>', '<' ama '=' isbarbardhiga.
- |  |  |
|--|--|
| <b>b</b> 40 km <input type="checkbox"/> 4500 m                       | <b>t</b> 12,000 mm <input type="checkbox"/> 12 m   |
| <b>j</b> 300,000 sm <input type="checkbox"/> 3.5 km                  | <b>x</b> 400,500 m <input type="checkbox"/> 401 km |
| <b>kh</b> 50,000 m iyo 50 sm <input type="checkbox"/> 50 km iyo 50 m |  |
| <b>d</b> 75,000 km iyo 750 m <input type="checkbox"/> 75,000.75 km   |  |

### 4.1.3 Isugeynta Halbeegyada Dhererka

#### Hawlgalka 3



Sida sawirka lagu muujiyay Axmed iyo Caasha guryahoodu isku dhinac ayay ka xigaan dugsigooda.

- Guriga Axmed iyo dugsiga foogaanta udhaxaysa waa 3 km iyo 700 m.
- Foogaanta u dhaxaysa guriga Caasha iyo dugsiga waa 800 m.

Guriga caasha iyo dugsiga foogaanta udhaxaysa waa imisa?

- b** mitir marka lagu xisaabiyo      **t** kiilomitir marka lagu xisaabiyo.

Tusaale 12

## Isugeeya

<b>b</b>	$675 \text{ mm}$	<b>t</b>	$3647 \text{ m}$
	$+ 325 \text{ mm}$		$+ 4353 \text{ m}$
	$\underline{\hspace{2cm}}$		$\underline{\hspace{2cm}}$

j 212 m iyo 50 sm + 978 iyo 75 sm

**x** 800 km iyo 850 sm + 37 km iyo 650 m.

Jawaab

<b>b</b>	675 mm	<b>t</b>	3647 m
	+ 325 mm		+ 4353 m
	<u>1000 mm</u>		<u>8000 m</u>

**j** 212 m iyo 50 sm + 978 m iyo 75 sm  
= 21200 sm + 50 sm + 97800 sm + 75 sm

Marka halbeeg isku nooc ah loo bedalo.

$$\begin{aligned}
 &= 21250 \text{ sm} + 97875 \text{ sm} \\
 &= 119125 \text{ sm} = 1191 \text{ m} \text{ iyo } 25 \text{ sm} \\
 &= 1191.25 \text{ m}
 \end{aligned}$$

Sidaas darteed, wadartu waa 119,125 sm ama 1191 m iyo 25 sm.

Marka halbeeg isku nooc ah loo badalo.

$$= 838,500 \text{ m} = 838 \text{ km} \text{ iyo } 500 \text{ km}$$

$$= 838.5 \text{ km}$$

#### **4.1.4 Kalagoynta Halbeegyada Dhererka**

Hawlqalka 4

Aala sonkor dhererkiisu yahay 1 m iyo 25 sm haddii laga gooyo 50 sm dhererka aala sonkorka soo hadhay waa imisa.

# Tusaale 5

## Kalagooya

- 107 km 800 m – 29 km 50 m
- 2,448 m 85 sm – 1,400 m 60 sm
- 2,008 sm 2 mm – 972 sm 8 m

**Jawaab**

**b**  $107 \text{ km} 800 \text{ m} - 29 \text{ km} 950 \text{ m}$

$$\begin{aligned}&= 107 \times 1000 \text{ m} + 800 \text{ m} - (29000 \text{ m} + 950 \text{ m}) \\&= 107800 \text{ m} - 29950 \text{ m} = 77850 \text{ m} \\&= \underline{\underline{77 \text{ km} 850 \text{ m}}}\end{aligned}$$

Sidaas darteed, natijjada kala goyntu waa 77,850 m ama 77 km iyo 850. Sidaas darteed natijjada kala goyntu waxaa noqon 77 km iyo 850 m.

**t**  $2448 \text{ m} 85 \text{ sm} - 1400 \text{ m} 60 \text{ sm}$

$$\begin{aligned}&= 244,800 \text{ sm} + 85 \text{ sm} - (140000 \text{ sm} + 60 \text{ sm}) \\&= 244,885 \text{ sm} - 140,060 \text{ sm} \\&= 244,885 \text{ sm} - 140,060 \text{ sm} \\&= 104,825 \text{ sm} = \underline{\underline{1048.25 \text{ m}}}\end{aligned}$$


**j**  $2008 \text{ sm} 2 \text{ mm} - 972 \text{ sm} 8 \text{ mm}$

$$\begin{aligned}&= 20,080 \text{ mm} + 2 \text{ mm} - 9,720 \text{ mm} + 8 \text{ mm} \\&= 20,082 \text{ mm} - 9,728 \text{ mm} \\&= 20,082 \text{ mm} - 9,728 \text{ mm} = 10,354 \text{ mm} \\&= \underline{\underline{1035.4 \text{ sm}}}\end{aligned}$$

**Shaqo kooxeed**

Tiirkka laydh tiriiga oo uu dhererkiisu yahay 6m waxaa lagu qalimeeyay rangiyo 3 midab ah. Qayb 1 m iyo 80 sm ah waxaa lamariyay casaan. Qayb 2 m iyo 70 sm waxaa lamariyay cadaan. Qaybta kale ee hadhay waxaa lamariyay madow.

- b** Qaybta casaanka iyo cadaanka lamariyay dhererkeedu waa imisa?
- t** Qaybta ranjiga madowga lamariyay dhererkeedu waa imisa?

**Laylis 4.2**

**1** Isugeeya

**b**  $66 \text{ sm} + 2 \text{ mm} + 14 \text{ sm} \text{ iyo } 6 \text{ mm}$

**t**  $572 \text{ m} 72 \text{ sm} + 172 \text{ m} 88 \text{ sm}$

**j**  $1674 \text{ km} 400 \text{ m} + 476 \text{ km} 920 \text{ m}$

**2** Kalagooyo


**b**  $135 \text{ sm} 6 \text{ mm} - 81 \text{ sm} 2 \text{ mm}$

**t**  $72 \text{ m} 30 \text{ sm} - 27 \text{ m} 72 \text{ sm}$

**j**  $710 \text{ m} 62 \text{ sm} - 579 \text{ m} 49 \text{ sm}$

- 3** Daaqad dhar ah oo uu dhererkeedu yahay 20m waxaa laga gooyay oo la iibiyay dhar dhererkiisu yahay 2m iyo 35 sm. Imisa ayaa hadhay?
- 4** Tiirka layd tiriiga oo uu dhererkiisu yahay 12m ayaa markii la dhidbayay dhulka oo loogu aasay dherer 1m iyo 65 sm. Tiirka dhererkiisa dhulka ka sareeya waa imisa.
- 5** Dhool dhererkeedu waa 1 m iyo 58 sm. Hibo, dhool ayay in 60 sm ah kagaaban tahay. Hibo dhererkeedu waa imisa?

## 4.2 CABBIORAADDA CULAYSKA



Casharadiinii xisaabtaa ee fasalka 3<sup>aad</sup> sida culayska loo cabbiro waad ku soo barateen. Si ad u xasuusatiin bal indinka oo koox koox ah ka shaqeeya hawlgalkan hoose.

### Hawlgalka 4.5

- 1** Qalabyada loo adeegto cabbiraada culayska nocyahooda tafatira.
- 2** Halbeegyada cabbiraada culayska tafatira.
- 3**
  - b** Ardaykastaa culayskiisa ha sheego.
  - t** Hal ugaxda (ukunta) digaagada culayskeedu intee ayay noqon?
  - j** Hal kiintal oo galay ah culayskiisu waa imisa?
  - x** 10 kiintaal oo qamadin ah culayskoodu waa imisa kiiloogaraam?

Waxyaalaha fudud waxaa lagu cabbira giraam. Waxyhaalaha u culayskoodu dhax dhaxaadka yaha. waxaa lagu cabbira giraam waxyaalaha aad u culusna waxaa lagu cabbira giraam.

Halbeegyadan cabbiraada culayska si aan isugu bedbedali karno waxa loo baahan yahay in fiiro gaar ah loo yeesho sharraxaadan hoose.

$$1 \text{ kg} = 1000 \text{ g}$$

$$1 \text{ kiintaal} = 100 \text{ kg}$$

$$1 \text{ kiintaal} = 100 \times 1000 \text{ g} = 100,000 \text{ g}$$

Sidoo kale ufiirsada kuwan hoose

$$1 \text{ tan} = 10 \text{ kiintaal}$$

$$1 \text{ tan} = 10 \times 100 = 1000 \text{ kg}$$

Waxay na inoo cadaynaysaa in tanku uu sida giraamka iyo kiiloogiraamka u yahay halbeeg cabbiraada calayska loo isticmaalo.

## 4.2.1 Iskubedelidda halbeegyada culayska ee waa weyn oo loo bedalayo kuwa yar-yar

### Hawlgalka 6

Beer qodaal binka ka tacbada ayaa tacbaday 4.5 tan oo bun ah. Tacab soo saarkiisu.

- b** Waa imisa kiintaal? **t** Waa imisa kiilo giraam?

### Tusaale

Giraam ubeddala

- b** 5 kg **t** 8 kg iyo 250 g **j** 3 kiintaal **x**  $\frac{1}{2}$  ton

#### Jawaab

**b**  $1 \text{ kg} = 1000 \text{ g}$

$$5 \text{ kg} = 5 \times 1000 \text{ g} = 5000 \text{ g}$$

Sidaas darteed,  $5 \text{ kg} = 5000 \text{ g}$

**t**  $8 \text{ kg iyo } 250 \text{ g} = 8 \text{ kg} + 250 \text{ g}$

$$= 8 \times 1000 \text{ g} + 250 \text{ g} = 8000 \text{ g} + 250 \text{ g}$$

$$=\underline{\underline{8250 \text{ g}}}$$

**j**  $1 \text{ kiintaal} = 100 \text{ kg} = 100,000 \text{ g}$

$$3 \text{ kiintaal} = 3 \times 100 \text{ kg} = 300 \text{ kg} = 300 \times 1000 \text{ g}$$

$$=\underline{\underline{300,000}}$$

Sidaas darteed,  $3 \text{ kiintaal} = 300,000 \text{ g}$

**x**  $1 \text{ tan} = 10 \text{ kiintaal} = 1000 \text{ kg} = 100,000 \text{ g}$

$$\frac{1}{2} \text{ tan} = \frac{10}{2} \text{ kiintaal} = 5 \text{ kiintaal}$$

$$= 5 \times 100 \text{ kg} = 500 \text{ kg} = 500 \times 1000 \text{ g}$$

$$= 500,000$$

Sidaas darteed,  $\frac{1}{2} \text{ tan} = \underline{\underline{500,000}}$

## 4.2.2 Iskubedelidda halbeegyada culayska ee yar-yar oo loo bedalayo kuwa waa weyn

### Hawlgalka 7

Arday ayuu culays kiisu yahay 42,000 g. Ardaygan culayskiisu waa imisa kiilogiraam?

## Tusaale 10

- b** 7500 kg u beddala kiintaal      **t** 3000 kg u beddala tan  
**j** 85 kiintaal u beddala tan      **x** 500,000 giraam u beddala kintaal.

### Jawaab

**b**  $7500 \text{ kg} = 75 \times 100 \text{ kg} = 75 \times 1 \text{ kiintaal} = 75 \text{ kiintaal}$

**t**  $3000 \text{ kg} = 30 \times 1000 \text{ kg} = 30 \times 1 \text{ tan} = 30 \text{ tan}$   
Sidaas darteed 3000 kg = 30 tan

**j**  $85 \text{ kiintaal} = 80 \text{ kiintaal} + 5 \text{ kiintaal}$

$$= 8 \times 10 \text{ kiintaal} + \frac{10}{2} \text{ kiintaal} = 8 \times 1 \text{ tan} + \frac{1}{2} \text{ tan}$$

$$= 8.5 \text{ tan}$$

**x**  $500,000 \text{ g} = 5 \times 100,000 \text{ g} = 5 \times 1 \text{ kiintaal} = 5 \text{ kiintaal}$

## Laylis 4.3

**1** Giraam u beddala

- |                       |                         |                         |
|-----------------------|-------------------------|-------------------------|
| <b>b</b> 3 kg         | <b>t</b> 4 kg iyo 650 g | <b>j</b> 5 kg iyo 105 g |
| <b>x</b> 6 kg iyo 0 g | <b>kh</b> 1 kiintaal    | <b>d</b> 1 tan          |

**2** Kg u beddala

- |                      |                        |                  |
|----------------------|------------------------|------------------|
| <b>b</b> 2000 g      | <b>t</b> 2500 g        | <b>j</b> 3.5 tan |
| <b>x</b> 75 kiintaal | <b>kh</b> 8.5 kiintaal | <b>d</b> 100 tan |

**3** Cabbiradan soo socda kee baa noqon kara culayska hal ugaxda digaagada?

- |              |               |                |
|--------------|---------------|----------------|
| <b>b</b> 1 g | <b>t</b> 50 g | <b>j</b> 500 g |
|--------------|---------------|----------------|

**4** Cabbiradan hoose kee baa noqon kara nin weyn culayskiisa?

- |               |              |                |
|---------------|--------------|----------------|
| <b>b</b> 77 g | <b>t</b> 7 g | <b>j</b> 77 kg |
|---------------|--------------|----------------|

**5** Cabbiradan hoose keebaa noqon kara culayska ilmuuhu (cunugu) marka u dhasho.

- |              |               |                |
|--------------|---------------|----------------|
| <b>b</b> 3 g | <b>t</b> 15 g | <b>j</b> 200 g |
|--------------|---------------|----------------|

## 4.2.3 Isugeynta Halbeegyada culayska

### Hawgalka 8

Gadhiga xamuulka oo madhan culayskiisu waa 55,000 kg. Gaadhiga alaabta lagu raray haddii ay tahay 110 kiintaal, dhamaan culayska gaadhiga iyo alaabta lagu raray culayskoodu waa imisa? Marka lagu cabbiro



- |             |                   |              |
|-------------|-------------------|--------------|
| <b>b</b> kg | <b>t</b> kiintaal | <b>j</b> tan |
|-------------|-------------------|--------------|

## Tusaale 11

Cabdi wananka inta uu naaxiyo ayuu iibiyaa. Afar bilood horteed wan uu iibsaday culayskiisu wuxuu ahay 21 kg. Imika culayska wanka waxaa la arkay in uu ka batay 7 kg iyo 500 g intu marka hoore ahay. Culayska wanku imika waa imisa?

### Jawaab

Waxa la ogyahay: 4 bilood horteed culayska wanka = 21 kg

Wanku culayska ku biiray = 7 kg iyo 500 g

Waxaa la raadinaya: Culayska wanku imika inta u yahay = ?

Imika culayska wanku = culayskiisii hore + culayska ku biiray

$$\begin{aligned} &= 21 \text{ kg} + 7 \text{ kg iyo } 500 \text{ g} = 28 \text{ kg} + 500 \text{ kg} \\ &= 28 \text{ kg iyo } 500 \text{ g} \end{aligned}$$

## Tusaale 12

Isugeeya

<b>b</b>	275 g + 720 g	<b>t</b>	30,600 kg + 42,900 kg	<b>j</b>	72 kg iyo 850 g + 132 kg iyo 900 g
----------	------------------	----------	--------------------------	----------	---------------------------------------

### Jawaab

<b>b</b>	275 g + 720 g 995 g	<b>t</b>	30,600 kg + 42,900 kg 73,500 kg	<b>j</b>	72 kg 850 g + 132 kg 900 g 205 kg 750 g
----------	---------------------------	----------	---------------------------------------	----------	---

## Laylis 4.4

1 Isugeeya

<b>b</b>	780 ton + 539 ton	<b>t</b>	14,472 kg + 1,998 kg	<b>j</b>	123 kg 650 g + 1,478 kg 350 g
<b>x</b>	27,890 kg 500 g + 9,870 kg 500 g	<b>kh</b>	2,780 kg 650 g + 872 kg 815 g	<b>d</b>	320 kiintaal + 180 kiintaal

2 Culayska Faadumo wuxuu 5 kg ka badan yahay culayska walaasheed Waris. Waris culayskeedu haddii uu yahay 46 kg. Faadumo culayskeedu waa imisa?

3 Aamina gurigeeda waxa u yaalay oo ay haysatay 2 kg iyo 500 g oo sonkor ah. Suuqa waxay ka soo iibsatay sonkor dheeraad oo ah 4 kg iyo 500 g Aamina dhamaan inta sonkor ah ee ay haysataa waa imisa?

4 Boorsad alaabta lagu qaato culaskeedu waa 690 g. Alaabta boorsada ku jirta culayskeedu haddii uu yahay 5 kg iyo 700 g dhamaan culayska boorsadu iyo alaabta ku jirtaa waa imisa.

## 4.2.4 Kalagoynta Halbeegyada Culayska

### Hawlgalka 4.9

Hooyo ayaa iyada oo ilmaheeda xanbaarsan ismiisaantay, waxay na culayskoodu noqday 70 kg. Ilmaha kaligii miisaankiisu wuxuu noqday 4.5 kg. Culayska hoyada kaligeed waa imisa?



### Tusaale 13

Kalagooya

$$\begin{array}{r} \mathbf{b} \quad 600 \text{ g} \\ - 370 \text{ g} \\ \hline 230 \text{ g} \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \mathbf{t} \quad 6 \text{ kg } 400 \text{ g} \\ - 2 \text{ kg } 900 \text{ g} \\ \hline 3 \text{ kg } 500 \text{ g} \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \mathbf{j} \quad 224 \text{ kg } 150 \text{ g} \\ - 123 \text{ kg } 600 \text{ g} \\ \hline 100 \text{ kg } 550 \text{ g} \end{array}$$

### Jawaab

$$\begin{array}{r} \mathbf{b} \quad 600 \text{ g} \\ - 370 \text{ g} \\ \hline 230 \text{ g} \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \mathbf{t} \quad 6 \text{ kg } 400 \text{ g} \\ - 2 \text{ kg } 900 \text{ g} \\ \hline 3 \text{ kg } 500 \text{ g} \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \mathbf{j} \quad 224 \text{ kg } 150 \text{ g} \\ - 123 \text{ kg } 600 \text{ g} \\ \hline 100 \text{ kg } 550 \text{ g} \end{array}$$

### Laylis 4.5

Kalagooya

$$\begin{array}{r} \mathbf{1} \quad \mathbf{b} \quad 539 \text{ g} \\ - 378 \text{ g} \\ \hline \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \mathbf{t} \quad 472 \text{ kg} \\ - 378 \text{ kg} \\ \hline \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \mathbf{j} \quad 4 \text{ kg } 350 \text{ g} \\ - 2 \text{ kg } 650 \text{ g} \\ \hline \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \mathbf{x} \quad 4 \text{ kg } 350 \text{ g} \\ + 2 \text{ kg } 650 \text{ g} \\ \hline \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \mathbf{kh} \quad 32 \text{ kiintaal } 25 \text{ kg} \\ - 12 \text{ kiintaal } 30 \text{ kg} \\ \hline \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \mathbf{d} \quad 16 \text{ tan } 6 \text{ kiintaal} \\ - 6 \text{ tan } 7 \text{ kintaal} \\ \hline \end{array}$$

$$\begin{array}{r} \mathbf{r} \quad 24 \text{ tan } 4 \text{ kiintad} \\ - 9 \text{ tan } 9 \text{ kiintaal} \\ \hline \end{array}$$

**2** Daasad malab ku jiro ayaa culayskeedu yahay 1500 g. Culayska daasadu hadii uu 350 g noqdo culayska malabka oo kaligiis waa imisa?

**3** 60 kg oo sonkor ah haddii 10 kg iyo 250 g laga iibiyoo imisa sonkor ah ayaa soo hadhi?

**4** Gaadhiga xamuulka ayaa culayska gaadhiga iyo alaabta ku raran noqday 60 tan iyo 5 kiintaal. Alaabta lagu raray culayskeedu haddii ay tahay 105 kiintaal culayska gaadhigu imisa?

**b** Kg ayuu noqon?

**t** Tan ayuu noqon?

## 4.2.5 Isbarbardhigidda halbeegyada culayska

### Hawlgalka 4.10

Khadiija 25 kg Saynaba  $\frac{1}{2}$  kiintaal, Barni na 15,000g oo qamadin ah ayay suuqa u iib geeyeen

- b** tee baa qamadin badan iibisay?
- t** tee baa qamadin yar iibisay?
- j** baaxada culayska ka yar ilaa ka weyn horsanaan u dhiga.

### Tusaale 15

Idinka oo adeegsanaya  $>$ ,  $<$  ama = isbarbardhiga.

- b** 1700 g \_\_\_\_\_ 2 kg      **t** 2 tan \_\_\_\_\_ 19 kiintaal
- j** 1 tan 1 kiintaal \_\_\_\_\_ 1100 kg

#### Jawaab

- b**  $2 \text{ kg} = 2000 \text{ g}$   
 $1700 \text{ g} < 2000 \text{ g}$
- t**  $2 \text{ tan} = 20 \text{ kiintaal}$   
 $20 \text{ kiintaal } \boxed{>} 19 \text{ kiintaal}$
- j**  $1 \text{ tan} 1 \text{ kiintaal} = 11 \text{ kiintaal}$   
 $11 \text{ kiintaal} = 1100 \text{ kg}$   
 $1 \text{ tan} 1 \text{ kiintaal} = 1100 \text{ kg}$

Sidaas darteed  $1 \text{ tan} 1 \text{ kiintaal} = \boxed{=} 1100 \text{ kg}$

### Laylis 4.6

**1** Ka yar ilaa ka weyn horsanaan u qora.

- b** 27000 g, 26.5 kg, 25 kg iyo 990 g
- t** 300 kiintaal 50 kg, 29 kg 50 kg, 28500 g
- j** 30 tan iyo 7 kiintaal, 300 kiintaal, 29 ton 6 kiintaal

**2** Waxyaalaha culaysyadooda hoos lagu tilmaamay horsanaan ka weyn ilaa ka yar u qora.

- b** 5 kg cudbi , 4500 g niis , 5.5 kg bun
- t** 20 kiintaal, hadhudh, 3 tan qamadin, 2500 kg galay

**3** Idinka oo adeegsanaya  $>$ ,  $<$  ama = isbarbardhiga

- |                                  |  |
|----------------------------------|--|
| <b>b</b> 1 tan _____ 1000 kg     | <b>t</b> 200 kg _____ 2.5 kiintaal       |
| <b>j</b> 10000g _____ 1 kiintaal | <b>x</b> 20 tan 9 kintaal _____ 20899 kg |

## 4.3 CABBIORAADA MUGGA DAREERAHA



### Hawgalka 4.11

- 1 Idinka oo adeegsanaya faldhaanka (malqaacada) lagu cunteeyo biyo ku dhura koob. Imisa faldhaan (malqaacadood) oo biyo ah ayaa koobka buuxin.
- 2 Koob idinka oo adeegsanaya biyo ku dhura dhalo. Imisa koob oo biyo ah ayaa dhalada buuxin?
- 3 Dhalo idinka oo adeegsanaya biyo ku dhura baaldi. Imisa dhalo oo biyo ah ayaa baaldiga buuxin.

Hawlalka ad korka ka soo shaqayseeni waxay ahayd cabbirada qaadka ama mugga dareeraha. Heerka fasalkan afaraad halbeegyada cabbiraada qaadka ama mugga ee aad ku baranaysiin, waxa la yidhaahdaa Litir ( $\ell$ ) iyo mililitir (ml). Marka an cabbirayno, shay uu qaadkiisu (mugiisu) weyn yahay waxaan ku isticmaalay-naa litir. Sidoo kale marka an cabbirayno shay uu qaadkiisu yar yahay waxaan isticmaalaynaa mililitir.

#### UFIIRSAADA:

Si aad uga qiyaas qaadatiin oo isla markaana aad fikrad uga yeelatiin halbeegyada lagu cabbiro qaadka (mugga) waxaa hoosten lagu dhigay tirooyin u dhaweyn ah.

- 1 baaldi dhaxdhaxaad ah  $\approx 20$  litir
- 1 malqaacada cuntada  $\approx 10$  ml.
- 1 koob dhaxdhaxaad ah  $\approx 200$  ml
- 1 malqaacada shaaha  $\approx 5$  ml.
- 1 dhalada kookada  $\approx 330$  ml
- 1 barmiil  $\approx 200$  litir.

### Hawlalka 4.12

Halbeega ku haboon cabbirka mugga sheega (litir ama mili litir).

- |          |                      |          |                       |
|----------|----------------------|----------|-----------------------|
| <b>1</b> | hal koob oo caana ah | <b>2</b> | Hal dhalo cedar ah    |
| <b>3</b> | hal jalxada biyaha   | <b>4</b> | Barkada lagu dabaasho |
| <b>5</b> | hal hanta biyaha     |          |                       |

### 4.3.1 Isku bedalidda halbeegyada Qaadka (mugga)

#### Tusaale 1

Mili litir u bedala

**b**  $2 \ell$

**t**  $3 \ell 500 \text{ ml}$

**j**  $4.5 \ell$

#### Jawaab

**b**  $1 \ell = 1000 \text{ ml}$

$$2 \ell = 2 \times 1000 \text{ ml} = \underline{2000 \text{ ml}}$$

Sidaas darteed,  $2 \ell = 2000 \text{ ml}$

**t**  $3 \ell \text{ iyo } 500 \text{ ml} = 3 \times 1000 \text{ ml} + 500 \text{ ml}$   
 $= 3000 \text{ ml} + 500 \text{ ml} = \underline{3500 \text{ ml}}$

**j**  $4.5 \ell = 4 \text{ litir} + 0.5 \text{ litir}$   
 $= 4 \times 1000 \text{ ml} + \frac{1}{2} \text{ litir}$   
 $= 4000 \text{ ml} + 500 \text{ ml} = \underline{4500 \text{ ml}}$

Sidaas darteed,  $4.5 \ell = 4500 \text{ ml}$

#### Tusaale 18

Litir ubedala

**b**  $6000 \text{ ml}$

**t**  $265500 \text{ ml}$

**j**  $975000 \text{ ml}$

#### Jawaab

**b**  $1 \ell = 1000 \text{ ml}$

$$6000 \text{ ml} = 6 \times 1000 \text{ ml}$$

$$= 6 \times 1 \ell = \underline{6 \ell}$$

Sidaas darteed,  $6000 \text{ ml} = 6 \ell$

**t**  $265,500 \text{ ml} = 265,000 \text{ ml} + 500 \text{ ml}$   
 $= 265 \times 1000 \text{ ml} + \frac{1000}{2} \text{ ml}$   
 $= 265 \times 1 \ell + \frac{1}{2} \ell = 265 + \frac{1}{2} \ell = \underline{265.5 \ell}$

Sadaas darteed,  $265000 \text{ ml} = 265.5 \ell$

j  $975,000 \text{ ml} = 975 \times 1000 \text{ ml}$   
 $= 975 \times 1 \ell = \underline{975} \ell$

Sidaas darteed,  $975000 = 975 \ell$

Litir ka marka mili litir loo badalayo 1000 ayaa lagu dhuftaa.

### Laylis 4.7

1 Dhamaystira

b	$7 \ell = \underline{\hspace{2cm}} \text{ ml}$	t	$25000 \text{ ml} = \underline{\hspace{2cm}} \ell$	j	$10.5 \ell = \underline{\hspace{2cm}} \text{ ml}$
x	$978000 \text{ ml} = \underline{\hspace{2cm}} \ell$	kh	$250 \ell 750 \text{ ml} = \underline{\hspace{2cm}}$	d	$250250 \text{ ml} = \underline{\hspace{2cm}} \ell$

2 Imisa

b	nus litir ayaa 1 litir noqda.	t	rubuc litir ayaa 1 litir noqda.
j	hal tobanlay oo litir ayaa 1 litir noqda.	x	hal boqolay hal oo litir ayaa 1 litir noqda.

3 b hal rubuc litir imisa mili litir ayuu noqon?

t  $\frac{1}{10}$  litir imisa mili litir ayuu noqon?

j  $\frac{1}{100}$  litir imisa mili litir ayuu noqon?

4 Litiradan hoose imisa jeer oo min nus litir ah ayaa ku jirta?

b	$2 \ell$	t	$3 \ell$	j	$7 \ell$	x	$10 \ell$
---	----------	---	----------	---	----------	---	-----------

5 Litiradan hoose imise jeer oo min rubuc litir ah ayaa ku jirta?

b	$1 \ell$	t	$2.5 \ell$	j	$3.75 \ell$	x	$10 \ell$
---	----------	---	------------	---	-------------	---	-----------

Isugeynta iyo kalagoynta halbeegyada qaadka (mugga)

### Tusaale 19

Isugeeyya

b	$3870 \ell$	t	$3870 \ell 800 \text{ ml}$	j	$340.5 \ell$
	$+ 9824 \ell$		$+ 9824 \ell 500 \text{ ml}$		$+ 786.8 \ell$

Jawaab

b	$3870 \ell$	t	$3870 \ell 800 \text{ ml}$	j	$340.5 \ell$
	$+ 9824 \ell$		$+ 9824 \ell 500 \text{ ml}$		$+ 786.8 \ell$
	$\underline{13,694 \ell}$		$\underline{13,695 \ell 300 \text{ ml}}$		$\underline{827.3 \ell}$

## Tusaale 1

Kalagooya

**b** 6748 ℥      **t** 2732 ℥ 250 ml

$$\underline{-897 \text{ ℥}}$$

**t** 2732 ℥ 250 ml  
 $\underline{-974 \text{ ℥} 500 \text{ ml}}$

**j** 794.82 ℥  
 $\underline{-543.98 \text{ ℥}}$

Jawaab

**b** 6748 ℥  
 $\underline{-897 \text{ ℥}}$   
 $\underline{5851 \text{ ℥}}$

**t** 2732 ℥ 250 ml  
 $\underline{-974 \text{ ℥} 500 \text{ ml}}$   
 $\underline{1757 \text{ ℥} 750 \text{ ml}}$

**j** 794.82 ℥  
 $\underline{-543.98 \text{ ℥}}$   
 $\underline{250.84 \text{ ℥}}$

## Laylis 4.8

1 Isugeeya

**b** 7263 ℥  
 $\underline{+974 \text{ ℥}}$

**t** 2330 ℥ 150 ml  
 $\underline{+7942 \text{ ℥} 850 \text{ ml}}$

**j** 3740.27 ℥  
 $\underline{+1359.53 \text{ ℥}}$

2 Kalagooya

**b** 348,164 ℥  
 $\underline{-78,999 \text{ ℥}}$

**t** 169 ℥ 850 ml  
 $\underline{-94 \text{ ℥} 750 \text{ ml}}$

**j** 876.50 ℥  
 $\underline{-288.75 \text{ ℥}}$

- 3 Barmiil dhaxdiis waxaa ku jirta 105 ℥ oo saliid ah. Barmiilkan haddii lagu daro (shubo) 39 ℥ oo saliid ah barmiilkha dhamaan imisa litir oo saliid ah ayaa ku hadhay?
- 4 Barmsiil ay ku jирто 76 litir oo naafta ah haddii laga dhaamiyo 20.5 litir imisa litir oo naafta ah ayaa ku hadhi?

## Isbarbardhigidda Halbeegyada Culayska

## Hawlalka 4.4

- 1 Jaamac koob qaadkiisu yahay 200 militir ayuu caano ku cabay Canab na koob rubuc litir qaada ayay caano ku cabtay. Midkee ayaa caana badan cabay?
- 2 Rooda ayaa suuqa ka soo iibsatay 3.5 litir oo saliida cunada ah. Sahara na waxay soo iibsatay 3 litir iyo 400 ml oo saliida cunada ah. Tee baa saliideedu ay badan tahay?

## Tusaale

Idinka adeegsanaya ‘>’, ‘<’ ama ‘=’ isbarbardhigo.

**b** 10 ℥ \_\_\_\_\_ 15 ℥

**t** 10 ℥ \_\_\_\_\_ 1000 ml

**j** 2 ℥ 750 ml \_\_\_\_\_ 3 ℥

**x** 12.3 ℥ \_\_\_\_\_ 12.25 ℥

**Jawaab**

- b**  $10 \ell \square 15 \ell$  ➤ Halbeeg isku mid ah haddii ay leeyhiin, tirooyinka oo la isbarbar dhigo aaya ku filan.
- t**  $10 \ell \square 1000 \text{ ml}$  ➤ Waa in aan halbeegyadooda nooc isku mid ah u bedalnaa.  
 $10 \ell = 10 \times 1000 \text{ ml} = 10,000 \text{ ml}$   
 $10,000 \text{ ml} > 1000 \text{ ml}$
- j**  $2 \ell 750 \text{ ml} \square 3 \ell$  ➤ Waa inaan halbeegyada nooc isku mid ah u bedalnaa  
 $2,750 \text{ ml} < 3000 \text{ ml}$
- x**  $12.3 \ell \square 12.25 \ell$  ➤ Tirooyinka ayaan sida jajab-tobanleydu isku barbar dhigaynaa.

**Laylis 4.9**

1 Idinka oo adeegsanaya , ‘>’ , ‘<’ ama ‘=’ isharbardhiga.

- b**  $\frac{3}{2} \ell \square 500 \text{ ml}$
- j**  $5 \ell \square 600 \text{ ml}$
- kh**  $10 \ell \square 10000 \text{ ml}$

- t**  $\frac{1}{4} \ell \square 250 \text{ ml}$
- x**  $188.5 \ell \square 188000 \text{ ml}$
- d**  $950 \text{ ml} \square 1 \ell$

2 Cabdulaahi wuxuu waqtio kala duwan naadiga bisha cas ku deeqay dhiig ah laba nus oo litir. Yoonis isna sidoo kale ayuu waqtio kala duwan kudeeqay 3 rubuc litir.

- b** Labada kee baa dhiig badan ku deeqay?
- t** Inte in le'eg ayay ku kala duwan yihii?

3 Ka yar kaga bilaaba oo ilaa kaweyn horsanaan u qora.

- b**  $195 \ell, 190 \ell, 200,000 \text{ ml}$
- j**  $275 \ell, 900 \text{ ml}, 274 \ell, 275.8 \ell$

## Cutubka

# 5aad



## SHAXANNADA SALLAXA IYO KUWA ADKAHA AH

Casharadiinii xisaabta fasalka saddexaad waxaad ku soo barateen xariiqyada toosan iyo shaxanada sallaxa ee fudud. Cutubkan wixaad ku baranaysiin shaxanada sallaxa iyo shaxanada adkaha ah.



### 5.1 XAGAL QUMAN

#### 5.1.1 Soo Soocidda Xaglaha Quman

##### Hawgalka 5.1 b


Hawlgaladan hoose idinka oo laba laba (qindi) ah. Kawada xaajooda oo ka shaqeeya.

- 1 Labadiinuba sare isku taaga. Gacmihiina midkeed.  
Dhinac toos u fidiya: Gacantaad fidiseen iyo jidhkiinu xagasha ay samee yeen qaabkeeda cadeeyaa
- 2 Weydiinta korka gacantaad fidiseen xusulkiina oo qudhaata toos kur u taaga; Gacantiina xagasha ka samaysantay qaabkeeda cadeeyaa.
- 3 Sabuurada cidhifyadeedu meesha ay ku kulmaan.  
Xagasha ka abuurantay qaab keeda cadeeyaa
- 4 Ufiirsada xariiqaha toosan ee isgooyaasha ee hoos ku sawiran



Kuwa xagal quman sameeyay waa kuwee? Kuwa 'b' mise kuwa 't'?


Laba xariiqyo too san oo  
iskuqotoma xagasha ay  
sameeyaan waxa la  
yidhaahdaa xagal quman




### Shaqa Kooxeed 5.1

- 1** Kooxo ka kooban saddex saddex ama afar afar arday intaad isku kooxaysiin kadibna idinka oo adeegsanaya sanduuq ama kaartoon u eg sawirka dhinaca midigta ku xusan su'aalahan soo socda ka jawaaba.

- b** Kaartoonka ama sanduuqa dushiisa xariiqaha isgoysayaasha tilmaama
- t** Sawirku ama kaartoonku imisa xaglo quman ayuu leeyahay.  
Falanqeeya



- 2** Xariiqaha toosan ee laba labada ah ee hoos ku sawiran kuwa xaglo quman sameeyay waa kuwee.





- 3** Agagaarkiina waxyaalaha aad ku aragtiiin kuwa xaglo Quman leh tilmaama

### 5.1.2 Dhisidda (Sawirista) Xaglo quman

### Hawlalka 5.16

Qalin qori idinka oo isticmaalaya hawlalkan hoose ka shaqeeya oo soo bandhiga.

- b** Xariiq gudban sameeya
- t** Idinka oo isticmaalaya mastared, buugtina ama waraaq girgirkeeda xariiq gudban ee aad samayseen xariiq goynaya oo ku qotomsan sameeya
- j** Xariiqyadaad samayseen qaabyadan hoos ku sawiran midkood ayuu noqon karaa.




- x** Xariiq gudban iyo xariiq goynaya ee ku qotomsan xagasha ay sameeyaan maxa loo yaqaanaa?

## Laylis 5.1

1 Mastarad idinka oo istiimaalaya buugtiina dusheeda xariiq toosan oo gudban ku sawira

Xariiqaa gudban xariiq goynaya oo ku qotoma sameeya

- Imisa xaglo ayaa samaysmay?
- Xaglaha la sameeyay dhamantood in ay yihiin xaglo quman ku hubiya waraaq cidhifyadeedu meesha ay ku kulmaan idinka oo dul dhigaya oo cidhifyada ku beegaya xariiqaa gudban iyo ka qotomsan




2 Mastaradiina ama buugaagliiina cidhifyadooda idinka oo isticmaalaya xagal quman sameeya.

## 5.2 BARAHA; XARIIQAH TOOSAN IYO SALLAXYADA

Casharkii xisaabta ee fasalka saddexaad waxaad ku soo barateen sallax dhaxdiisa xariiqaha toosan, afar-dhinaclayaasha iyo goobooyinka laga helo. Fasalkan waxaad ku baranaysiin baraha, xariiqaha toosan iyo sallaxyadu waxay yihiin iyo xidhiidhkooda, gaarahaan xariiqdu meesha ay kaga dhacdo (taallo) sallaxa.

### Hawlgalka 5.2 b

Dhulka dushiisa, miiska dulkiisa saburada dulkeeda iyo ku la mid ah ufiirsada.



Qodobadan hoose idinka oo koox koox ah ka wada xaajooda.

- 1 Agagaarkiina waxyaalaha lagu arko kuwa qaab dulsiman leh tilmaama.
- 2 Agagaarkiina waxyaalaha an lahayn qaab dulsiman tilmaama.

Dhulka in jiha kasta loo fidin  
kari ka fikira. Dulalkasiman  
waa kuwa metila qaybaha  
sallaxyada



### Tusaale 1


Fasalka aad wax kubaratiin afartiisa gidaar waa qaybo ka tirsan sallaxyo

### Laylis 5.2.1

Walxaha hoos ku tilmaaman ku ah qaybo sallaxyo iyo kuwa aanan ahayn qaybo sallaxyo kala soo ca

- |    |                         |   |                  |   |                  |
|----|-------------------------|---|------------------|---|------------------|
| 1  | saqafka guriga          | 2 | Muraayad         | 3 | Wajiga albaabka  |
| 4  | Dalaayad lakala bixiyay | 5 | Garoonka kubada  | 6 | Faldhaan         |
| 7  | xeedho                  | 8 | Warqada qoraalka | 9 | Wajiyada sanduuq |
| 10 | galay la tuulay         |   |                  |   |                  |

### 1 Sharraxidda xidhiidhka (xidhiidh bareed/meeleed) ee ka dhexeeeya baraha xariiqaha toosan iyo sallaxyada




Sallaxa dushiisa xarfaha ku yaala saddex ka mid ah ama hal xaraf waa lagu magacaabi karaa.

Tusaalaahaan sallaxa dhinaca bidixda ku yaala waxaa lagu magacaabi karaa sallax ABC ama sallax F

### Tusaale 2

Qaybaha sallaxa u fiirsada. Weydiimaha ka jawaaba

- 1 Xariiqqa toosan AB ama  $\overleftrightarrow{AB}$  halkee ayuu ku yaalaa oo laga helaa
- 2 Baraha A, B, C, D iyo F meesha ay ku yaaliin tilmaama.




#### Jawaab

- 1  $\overleftrightarrow{AB}$  sallaxa Q ama sallaxa ABC ayuu dul dhacaa (yaalaa) oo laga helaa.
- 2 Baraha A, B, C, D iyo F sallaxa Q ayay ku dul dhacaan oo ay dul yaaliin.
- 3 Barta C xariiqqa toosan  $\overleftrightarrow{AB}$  meel ka saraysa barta D xariiqqa toosan  $\overleftrightarrow{AB}$  meel ka hoosaysa ayay ku yaaliin oo laga helaa. Baraha A, F iyo B xariiqqa toosan  $\overleftrightarrow{AB}$  ayay ku dul dhacaan oo ay dul yaaliin.

### Tusaale 3

Sawirka dhinaca midigta ku yaala u fiirsada. Kadibna su'aalaha ka jawaaba.

- 1 Baraha A, B iyo D meelaha ay yaaliin sharraxaad ka bixiya.
- 2 Xariiqqa too san AB iyo sallaxa R xidhiidh meeledka ka dhaxeeeyaa waa maxay?




**Jawaab**

- 1 Baraha A, B iyo D waxay dul dhacaan oo ay dulyaaliin xariiqa toosan  $\overrightarrow{AB}$  barta A meel sallaxa R ka sarraysa barta B na meel sallaxa R ka hoosaysa ayay ku yaaliin. Barta D waxay ku dul dhacdaa oo ay dul taalaa xariiqa  $\overrightarrow{AB}$  iyo sallaxa R.
- 2  $\overleftarrow{AB}$  iyo sallaxa R waxay leeyihiin bar ay wadaagaan. Barta D waa barta ay wadaagaan

**Tusaale 4**

Sawirka dhinaca midig ku yaala u fiirsada. Kadibna ka jawaaba su'aalaha la xidhiidha xidhiidh meeledka ka dhaxeeya, xariiqaha tooson baraha iyo sallaxa.

- 1 Sharraxaad ka bixiya xariiqaha toosan  $\overline{EF}$ ,  $\overline{GH}$  iyo sallax R xidhiidh meeledka ka dhaxeeya.
- 2 Sharraxa xidhiidh meeledka ka dhaxeeya baraha I, J, K xariiqaha toosan iyo sallaxa R.

**Jawaab**

- 1 Xariiqha toosan EF wuxuu ku yaalaa meel ka sarraysa sallaxa R. Xariiqha toosan GH wuxuu ku yaalaa meel ka hoosaysa sallaxa R.
- 2 Bart I waxay ku taalaa meel sallaxa R ka sarraysa oo isla markaana ka hoosaysa xariiqha toosan EF. Barta J waxay dul dhacdaa oo ay dultaala sallaxa. Bart K waxay ku taalaa meel sallaxa R ka isla markaana xariiqha toosan  $\overline{GH}$ .


### **5.3 WAREEGA IYO BEDKA LAYDIGA IYO LABAJIBBAARANAHA**

#### **1 Wareega laydiga iyo labajibbaaranaha**

#### **Hawlalka 5.3b**

Dhinaca midigta waxaa ku yaala shaxano sallaxeed oo kala duwan. Shaxanada markaad u fiirsatid dabadeed.

- 1 Ka sooca kuwa qaabka laydiga leh
- 2 ka Sooca kuwa qaabka laba jibbaaranaha leh
- 3 ka Sooca kuwa aanan ahayn laydi
- 4 ka Sooca kuwa aana ahayn labajibaarane
- 5 Laydiga iyo labajibbaaranuhu waxay ku kala duwan yihiin sheega?



## UFIIRSADA


### Laydi

- Waa afar dhinac
- Labada dhinac ee iskasoo horjeedaa waa barbaro
- Afartiisa xaglood waa xaglo quman



### Labajibbaarane

- Waa laydi
- Afartiisa dhinac way is le'eg yihiin



- 1 Laydi wadarta dhererada afartiisa dhinac waxaa la yidhaahdaa Wareega laydiga.
- 2 Labajibbaarane wadarta dhererada a fartiisa dhinac waxaa la yidhaahdaa wareega labajibbaaranaha

## Tusaale 1

Laydigan hoose wareegiisa raadsha

### Jawaab

Wareega Laydigu

$$\begin{aligned}
 &= 3 \text{ sm} + 6 \text{ sm} + 3 \text{ sm} + 6 \text{ sm} \\
 &= 3 \text{ sm} + 3 \text{ sm} + 6 \text{ sm} + 6 \text{ sm} = 2 \times 3 \text{ sm} + 2 \times 6 \text{ sm} \\
 &= 2 \times (3 \text{ sm} + 6 \text{ sm}) = 18 \text{ sm}
 \end{aligned}$$



Sidaas darteed, wareega laydigu waa 18sm


## Tusaale 2

Wareega labajibaarnahan hoose raadsha

### Jawaab

Labajibbaranahan wareegiisu

$$\begin{aligned}
 &= 3 \text{ sm} + 3 \text{ sm} + 3 \text{ sm} + 3 \text{ sm} \\
 &= 4 \times 3 \text{ sm} = 12 \text{ sm}
 \end{aligned}$$



- 1 Laydi u ballaciisu yahay b dhererkiiwsuna yahay dh wareegisu waa  $2(b + dh)$



- 2 Lahajibbaarane dhererrka dhiniciisu yahay a wareegiisu waa  $4a$



### Laylis 5.3b

- 1 Shaxanadan hoose wareegooda raadsha

**b**

10 sm

**t**

10 sm

**j**

20 m


14 m

8 m  
6 m

4 m

- 2 Garoon kubada lagu ciyaaro wuxuu leeyahay qaabka laydiga. Haddii u ballaciisu yahay 70 mitir dhererkiisuna yahay 110 mitir wareegiisu waa imisa?
- 3 Warshad ayaa dhulka ay ku fadhido leeyahay qaabka labajibaaranaha. Dhinaca dhulkan haddii uu dhererkiisu yahay 400 mitir wareegiisu waa imisa?

- 4 Jago qaabka laydiga leh dhererkeedu waa 80m ballaceedana waa 40m. Rukunka jagadan waxa laga gooyay laydi ballaciisu yahay 20m dhererkiisuna 10m. (eeg sawirka)



**b** Wareega laydiga intaaanan laga goynin horteed imisa ayuu ahaa?


**t** Jagada soo hadhay wareegeedu waa imisa?

## 2 Bedka Laydiga iyo Labajibb aaranaha

### Hawlgalka 5.3b

Hawlgaladan hoose buugtiina Kaga shaqeeya

- 1 Sawira laydi ay dhinacyadiisu yihiin 5 sm iyo 3sm
- 2 Ballaca xariiqiisa gudban iyo dhererka xariiqiisa qotoma idinka oo isticmaalaya shax ay xariiqyadeedu hal hal sm isujiraan sameeya.
- 3 Ballaca laydiga imisa meelood oo isleeg ayaa loo qay qabiyay
- 4 Dhererka laydiga imisa meelood oo isle'eg ayaa loo qay qabiyay
- 5 Dhinaca biddixda qaybta laydiga ee la madoobeeyay dhinacyadeedu waa imisa sm?
- 6 Laydiga imisa labajibbaranayaal yar yar ayaa loo qaybiyay?
- 7 Laydiga imisa labajibbaaranayaal yar yar ayaa lagu hagoogay?
- 8 Ballaca iyo dhererka laydiga iskudhufta imisa ayay noqon?




## UFIIRSADA

- Laydi Bedkiisa in la xisaabiyo waxaa la isku dhuftaa ballaciisa iyo dhererkiisa
- Halbeega bedku waa sm laba jibbaaran ama mitir laba jibbaaran

1 Laydi haddii u ballaciisu yahay b dhereriisuna dh bedka  $B = b \times dh$




2 Labajibaarane dhinaciisu haddii u yahay b bedku waa  $b \times b$  halbeeg laba jibaaran



## Laylis 5.3t

- 1 Shaxanadan hoose bedkooda raadsha




- 2 Jago leh qaabka laydiga dhererkeedu waa 20 mitir ballaceeduna waa 25 mitir. Raadsha bedkeeda.
- 3 Dhulbeereed qaabka labajibaaranaha leh dhererka dhiniciisu waa 100m. raadsha bedka dhulbeereedka
- 4 Kee baa balaadhan
  - b** Shaxan qaabka laydiga leh oo dhinacyadiisu yahay 5sm iyo 6sm mise shaxan qaabka laba jibaaranaha leh oo dhinaciisu yahay 8sm
  - t** Labajibaarane dhinaciisu yahay 6 mitir mise laydi dhinacyadiisu yihiin 7 mitir iyo 5 mitir

## 5.4 ADKEYAASHA FUDUD

### 5.4.1 Soocista qaababka adkeyaasha

#### Hawlgalka 5.4 b

- 1 Halkan hoose waxaa lagu siiyay sawiro adkeyaal qaabab kala duwan leh iyo magacyadooda.



- 2 Idinka oo koox koox ah waxyaalaha agagaarkiina laga heloo ee u eg kuwaas laba, laba tusaale siiya

#### Shaqa kooxeed 1

Walxahan hoose midkastaa adkaha uu udhigmo sheeg.

Saabuuntadharka

qolofta kibriidka

daasad

kubada koloysa

Caroog Gorof


#### Laylis 5.4b

Hoostan walxaha lagu qoray adkehee ayuu u eg yahay

1 Kubada gacanta \_\_\_\_\_

2 Qasabada biyaha \_\_\_\_\_

**Fuurriya shaxannadan hoos ku yaala** Isla markaana su'aalahaa 3 ilaa 7 meelaha bannaan ku buuxiya xarfaha ku haboon



- 3** Shaxanka \_\_\_\_\_ waa saddexjibbaarane
- 4** Shaxanada \_\_\_\_\_, \_\_\_\_\_ iyo \_\_\_\_\_ waa dhululubooyin
- 5** Shaxanada \_\_\_\_\_ iyo \_\_\_\_\_ waa biriisamyo.
- 6** Shaxanada \_\_\_\_\_ iyo \_\_\_\_\_ waa toobino.
- 7** Shaxanka \_\_\_\_\_ waa biraamid.
- 8** Shaxanka d waa \_\_\_\_\_
- 9** Shaxanadan hoose ee laba labada ah waxay ku kala duwan yihiin sharraxaad ka bixiya.  
**b** biriisam iyo saddex-jibbaarane    **t** biraamid iyo toobin  
**j** dhululubo iyo toobin                      **x** biriisam iyo biiraamid.
- 10** Shaxanadan laba labada ah astaamaha ay wadaagaan ee ay isaga eg yihiin sharraxa.  
**b** biriisam iyo saddax-jibbaarane    **t** biraamid iyo toobin  
**j** dhululubo iyo toobin                      **x** toobin iy isfeer

## Tusaale 1

Biriisamka iyo dhululubadu waxyaalaha ay kukala duwan yihiin sheega.

### Jawaab

Dhululubada korka iyo hoosta waxay ku leedahay laba sal oo goobooyin ah. Biriisamku se salkisu wuxuu noqon karaa saddax-dhinacle ama afar dhinacle iwm.

### 5.4.2 Samaynta Moodheelada Adkeyaasha Fudud

#### **b** Samaynta Moodheelada biriisim iyada oo la istic-maalayo kaartoon


## Hawlalka 1

Si aad u samaysiin saddax-jibbaarane dhererka dhinacyadiisu ay yihiin 4 sm hawlahan hoose siday ukala horeeyaan uga shaqeeya.

- 1** Diyaarsada kaartoon dhererkiisu 12 sm ballaciisuna 16 sm yahay.
- 2** Kaartoonka waxaad ka gooysiin 6 labajibbaarane oo ay dhererada dhinac yadoodu yihiin 4 sm.
- 3** Tirooyinka 1 ilaa 6 labajibbaaranada lagu dul qoray iyaga oo iswata jara oo ka saara.
- 4** Shaxan qaabkiisu yahay sida dhinaca midig ee bogga 108 ku sawiran in aad hesheen xaqijiya.
- 5** Meelaha xariijimaha gogo'an ay ku xariiqan yihiin ka laaba idinka oo xagal quman meesha laabka ka samaynaya.

4sm	4sm	4sm	
	6		4sm
	5		4sm
4	3	1	4sm
	2		4sm

- 6** Cidhifyada xamag isku qabadsiiya.
- 7** Adkaha u qaabkiisu yahay nooca shaxanka dhinaca midig ee ku yaaala bogga 108 in aad heesheen xaqijiya.
- 8** Shaxanka sooca oo magacaaba.  
Adkaha wejiyadiisa sidan ayaa loo arki karaa  
3-salka hoose  
6-Salka sare  
4-wejiga bidixda  
1-wejiga midigta  
5-wejiga danbe  
2-wejiga hore



### UFIIRSADA

- Dusha shaxanka la sameeyay ee cidhifyadiisu ay 4 sm yihiin waa saddax jibbaarane. Sido kale saddex jibbaaranayaal cidhifyadoodu kala duwan yahay waa la samayn karaa.


### Laylis 5.4 t

- 1** Kaartoon dhererkiiisu 9 sm ballaciisuna 12 sm ka sameeya saddax-jibbaarane cidhifyadiisu yihiin 3 sm.
- 2** Kaartoon dhererkiiisu 20 sm ballaciisuna na 15 sm ka sameeya saddex-jibbaarane cidhifyadiisu yihiin 5 sm.

### Hawlgalka 5.4 t

Biriisam dhererkiiisu 4 sm ballaciisu 6 sm joogiisuna 8 sm yahay si aad kaartoon uga samaysiin idinka oo koox koox ah waxqa badyadan soo socda siday u kala horeeyaan uga shaqeeya.

- 1** Kaartoon dhererkiiisu 16 sm ballaciisuna 20 sm yahay goo ya oo diyaar sada.
- 2** Kaar toonka qaabka laydiga ah sida shaxanka hoos ku tusan u qaybqaysha.
- 3** Laydiyada lagu dulqoray xarfaha A, B, C, D, E, F iyago isku yaala (iswata) jara oo saara.
- 4** Waxaad kaartoonka ee isku yaala meelaha xariijimaha gogo'an ay ku yaaliin ka laaba idinka si xagal quman u laabaya.
- 5** Marka aad laabteen cidhifyada kulmay xamag iskugu dhajiya.
- 6** Biriisamka ad samayseen in uu leeyahay qaabka hoos ku tusna xaqijira.
- 7** Shaxanka aad samayseen magacaaba.
- 8** Shaxanka aad samayseen dhererkiiisu, ballaciisu iyo joogiisu inta ay yihiin is warsada oo ka wada tashada.



### UFIIRSADA

- Shaxankan dhererkiisu waa 6 sm ballacisu waa 8 sm joogiisu na waa 4 sm. Sidoo kale biriisamyo kale oo leh dhererka ballaca iyo jooga la rabo waa la samayn karaa.

### Laylsi 5.4 J

- 1 Idinka oo isticmaalaya kaartoon dhererkiisu yahay 8 sm ballaciisuna 10 sm sameeya biriisam dhererkiisu 3 sm ballaciisuna 2 sm joogiisuna 4 sm.
- 2 Idinka oo isticmaalaya kaartoon dhererkiisu 32 sm ballaciisuna na 40 sm yahay sameeya biriisam dhererkiisu 12 sm ballaciisuna 8 sm joogiisuna na 15 sm.

### T Samaynta moodhelada biriisim iyada oo la isticmaal-ayo qoryo

### Shaga kooxeed 5.4 x

- 1 Alaabta loo baa han yahay samaynta biriisim salkisu yahay saddexagal.
  - b** Sagaal qoryo dhuudhuuban oo ay dhererkood isku mid yihiin
  - t** Musmaar, dun ama xig
- 2 Sida loo sameeyo
  - b** Saddex qoryo inta ad jiifisiin midkasta baarkiisa ka kale ee ku gudban inta ad isku xidhiin sameeya moodheel saddex-dhinacle ah.
  - t** Saddex qoryo kale indinka oo isticmaalaya sameeya moodheel saddex-dhinacle ah oo la mid ah tii hore.
  - j** Saddexda qori ee hadhay udub (dhidib) ahaan idinka oo u isticmaalaya, labadi moodheelo ee saddex dhinaclayaasha iyo udubada isku xidha si ay saddexdhinaclayaashu u noqdaan salka sare iyo salka hoose.
  - x** Hawlgalkan ah samaynta moodheelka imisa qori ayaad isticmaasheen.
  - kh** Moodheelka aad samayseen nooca qaabkiisu magaca xisaabahaan loo yaqaano waa maxay



### Laylis 5.4x

Idinka oo isticmaalaya alaaboo la mid ah kuwa dusha lagu soo sheegay sameeya

- b** Biriisim ay labadiisa sal yihiin afar dhinacleyaal.
- t** Biriisim ay labadiisa sal yihiin shan-dhinaclayaal.
- j** ‘b’ iyo ‘t’ biriisim yada aad samayseen imisa hal oo qori ayaad ku isticmaasheen?

### J Samaynta moodheelada Dhululubada

#### Shaqa kooxeed 5.4 kh

- |          |          |
|----------|----------|
| <b>b</b> | <b>t</b> |
| <b>x</b> | <b>j</b> |
- 
- 1 Alaabta loo haahaan yahay samaynta moodheelka dhululubada
  - 2 Sida loo sameeyo
- b** Waraaq jaafi ah sida jaldiga buugaagta oo qaabkiisu yahay laydi.
  - t** bilastar ama xamag
  - j** Iyada oo aan la isku jajabin labada cidhif ee waraaqda ha la isku soodhaweyyo iyada oo la isku keenayo ‘b’ iyo ‘t’ ‘j’ iyo ‘x’.
  - t** ‘b’ iyo ‘t’ sido kale ‘j’ iyo ‘x’ inta la isku keeno xamag ama bilaastar ha la isku dhajiyo.
  - j** Dhululubada la sameeyay ee korka iyo hoosta ka furan laba goobo inta loo cabbiro si farsama leh inta loo gooyo ha lagu dhajiyo.
  - x** Sharraaad ak bixiya qaabka moodheelka aad samayseen.

### Laylis 5.4 kh

Moodheelada dhululbada ee hoosta lagu tilmasmay ka sameeya kilaasar ama shay kale oo la mid ah oo dhererkiisu 10 sm ballacisu ma 20 sm yahay.

- b** Idinka oo dhinaca dhererkiisu 10 sm yahay goobada ka sameeya.
- t** Idinka dhinaca 20 sm ka samayna ya goobada
- j** ‘b’ iyo ‘t’ dhululubooyinka la sameeyay maxay ku kala duwan yihiin.

## Cutubka

# 6aad



## WAQTİGA (AMMINTA)

### 6.1 SAACAD, DAQIIQAD IYO ILBIRIQSI

Casharadiinii xisaabta ee fasalka saddexaad waxaad ku soo barateen halbeegyo kala duwan oo waqtiga lagu cabbiro si aad u xasuuusatiin bal idinka oo koox koox ah ka dooda oo ka jawaaba weydiimahan hoose.

#### Hawlgalka 6.1 b

- 1 Qora lix halbeeg oo lagu cabbiro waqtiga (amminta)
- 2 Halbeegyada waqtiga ee lamman ee soo socda midka weyn sheega.
  - bil ama sanad
  - Bil ama maalin
  - Maalin ama toddoobaad
  - Saacad ama daqiqad
- 3 Fiiriya Saacadda gacanta ama saacadda miiska ama saacadda giddaarka.



Inta u badan saacaddahan waxay leeyihiiin saddex gacmood ama kabaalo oo tilmaamayaal (tiriyeyaa) ah. Saddexda gacmood (kabaalo) dhererkoodu isma wada le'eka. Midi wuu gaaban yahay midka kale ka gaaban ayuu wax yar ka dheer yahay ka saddexaadi na waa mid dhuubar oo labada kale inta uu ka dheer yahay ayuu dhaq dhaqaaqiisu naka dagdagbadan yahay.

- Daqiqad tirisadu waa tee?
- Saacad tirisaduse?
- Ta dheer ee dhaqdhqaqaqeedu dagdago waa tee? Maxaad u malaynaysiin in ay tiriso?

*Waxa dhici karta in saacaddaha qaarkood iyaga oo aanan lahayn ilbiriqli tiriso ay lahaan karaan gacmo ama kabaalo daqiqada iyo saacadda oo qudhaata uun tiriya.*



## Hawlgalka 6.1 t

- 1 b** U fiirsada daqiiqad tirisadu meesha ay joogto gacanta dhaqdhaqaqeedu dagdaga (ilbiriqsi tiriso) tirada 12 inta ay ka bilawdo 5 wareeg inta ay wareeganayso suga. Waqtigaas daqiiqad tirisadu meesha ay ka kacday ilaa meesha ay gaadhay ama inta daqiiqadood ay socotay sheega.
- t** Ilbiriqsi tirisadu hal wareeg oo idil in ay wareegato imisa ilbiriqsi ayay ku qaadan?
- j** Ilbiriqsi tirisadu hal wareeg oo idil inay wareegato imisa daqiiqadood ayay ku qaadan?
- x** Daqiiqad tirisadu hal wareeg oo idil inay wareegato imisa saacadood ayay ku qaadan.
- kh** Hal saac waa imisa daqiiqadood?
- d** Saacad tirisadu hal wareeg oo idil inay wareegato imisa saacadood ayay ku qaadan?
- r** Saacad tirisadu hal wareeg oo idil inay wareegato imisa maalmood ayay ku qaadan?
- s** Cadceed soo baxa ilaa gabal dhaca waqtiga ku sugar iyo hal habeen oo idil guud ahaan waxaa loo yaqaanaa hal maalin. Sidaas darteed hal maalin waa imisa saacadood?
- sh** 1 daqiiqo = \_\_\_\_\_ ilbiriqsiyo      1 saac = \_\_\_\_\_ daqiiqadood

## UFIIRSADA

- ⇒ *Ilbiriqsi daqiiqad iyo saacad waa halbeegyo waqtiga lagu cabbiro*
- *1 daqiiqo = 60 ilbiriqsi*
  - *1 saac = 60 daqiiqo = 3600 ilbiriqsi*
  - *1 maalin = 24 saac = 1440 daqiiqadood.*
- ⇒ *Ilbiriqsi tirisadu hal wareeg oo idil inay wareegato waxay ku qaadataa 60 ilbiriqsi ama 1 daqiiqo. Sidaas darteed 5 wareeg oo idil inay wareegato waxay ka qaadan 5 daqiiqo ama 300 ilbiriqsi.*

## 6.2 XISAABINTA HALBEEGYADA WAQTIKA

### 6.2.1 Isku bedelidda Halbeegga waqtiga ee waa weyn oo loo bedalayo kuwa yar-yar

#### Tusaale 1

Qananiisa orod fogaantiisu yahay 5000- mitir waxay ka qaadataay 13 daqiiqadood oo qudhaata waqtiga ay ka qaadataay orodka ilbiriqsi marka lagu sheego (cadeeyo) waa imisa?

#### Jawaab

1 daqiiqo = 60 ilbiriqsi sidaas awgeed  
 $13 \text{ daqiiqo} = 13 \times 60 \text{ ilbiriqsi} = 780 \text{ ilbiriqsi}$



## Tusaale 2

Hayle gabre silaase orodka maraatonka oo uu orday wuxu ku dhameeyay 2 saac iyo 3 daqiiqo. Sidaas darteed na wuxuu hantiyay oo uu iskii u yeeshay darajada ugu saraysa ee aduunka ee orodka maraatoonka. Waqtiga uu orodka ku dhamaystiray marka daqiqado lagu sheego (codeeyo) waa imisa?

### Jawaab

$$\begin{aligned} 2 \text{ saacadood iyo } 3 \text{ daqiiqo} &= 2 \times 60 \text{ daqiiqo} + 3 \text{ daqiiqo} \\ &= 120 \text{ daqiiqo} + 3 \text{ daqiiqo} = 123 \text{ daqiiqo} \end{aligned}$$

Sidaas darteed hayle orodka wuxuu ku dhameeyay 123 daqiiqo



## Tusaale 3

Dhakhtarka kaara mardha maalintii wuxuu shaqeeyaa oo uu adeegsi caafimaad siiyaa mudo 24 saacadood ah. Hal sano ama 365 maalmood imisa saacadod ayuu shaqeeyaa oo uu adeegsi caafimaad siiyaa?

### Jawaab

$$\begin{aligned} 1 \text{ maalin} &= 24 \text{ saacadood} \\ 365 \text{ maalmood} &= 365 \times 24 \text{ saacadood} = 8760 \text{ saacadood} \text{ oo shaqo adeeg caafimaad ayuu bixiyaa.} \end{aligned}$$

- Daqiqad marka ilbirksi loo bedalayo tirada daqiqada la siiyay ayaa 60 lagu dhuftaa.
- Saacad marka daqiiqo loo bedalayo tirada saacada la siiyay ayaa 60 lagu dhuftaa.
- Maaliin marka saacad loo bedalayo tirada maalinta la siiyay ayaa 24 lagu dhuftaa.

## Shaqa kooxeed

- |          |                                     |          |                                  |
|----------|-------------------------------------|----------|----------------------------------|
| <b>b</b> | 2 maalmood waa imisa daqiqadood?    | <b>t</b> | 12 saacadood waa imisa ilbirksi? |
| <b>j</b> | maalin rubuceed waa imisa ilbirksi? |          |                                  |

## Laylis 6.2.b

- Ilbirksi u badala
 

<b>b</b>	7 daqiiqo	<b>t</b>	17 daqiiqo	<b>j</b>	70 daqiiqo
----------	-----------	----------	------------	----------	------------
- Daqiqo u badala
 

<b>b</b>	3 saac	<b>t</b>	5 saac iyo rubuc	<b>j</b>	12 saac iyo 5 daqiiqo
----------	--------	----------	------------------	----------	-----------------------
- Saacad u badala
 

<b>b</b>	10 maalmood	<b>t</b>	15 maalmood 6 saac	<b>j</b>	900 maalmood iyo 5 saac
----------	-------------	----------	--------------------	----------	-------------------------
- b** 24 saac = \_\_\_\_\_ ilbirksi      **t** 7 maalmood = \_\_\_\_\_ ilbirksi  
**j** 2 maalmood = \_\_\_\_\_ daqiiqo

## 6.2.2 Isku bedeliida Halbeega waqtiga ee ugu yar oo loo bedelayo ku weyn

### Hawlgalka 6.2.1

Idinka oo koox koox uga wada xaajoonaya ka jawaaba

- b** 180 ilbirqsi waa imisa daqiiqadood? **t** 180 daqiiqadood waa imisa saac.

### Tusaale 4

Daqiiqad u bedela

- b** 240 ilbiriqsi **t** 600 ilbiriqsi **j** 8400 ilbiriqsi

#### Jawaab

- b**  $60 \text{ ilbiriqsi} = 1 \text{ daqiiqo sidaas awgeed}$

$$\begin{aligned} 240 \text{ ilbiriqsi} &= (60 + 60 + 60 + 60) \text{ ilbiriqsi} = 4 \times 60 \text{ ilbiriqsi} \\ &= 4 \times 1 \text{ daqiiqo} = 4 \text{ daqiiqo} \end{aligned}$$

Sidaas darteed  $240 \text{ ilbiriqsi} = 4 \text{ daqiiqo}$

$$\mathbf{t} \quad 600 \text{ ilbiriqsi} \quad 10 \times 60 \text{ ilbiriqsi} = 10 \times 1 \text{ daqiiqo} = 10 \text{ daqiiqo}$$

$$\mathbf{j} \quad 8400 \text{ ilbiriqsi} = 80 \times 60 \text{ ilbiriqsi} = 80 \times 1 \text{ daqiiqo} = 80 \text{ daqiiqo}$$

### Tusaale 5

Saacad u bedela.

- b** 120 daqiiqo **t** 570 daqiiqo **j** 2700 daqiiqo

#### Jawaab

- b**  $60 \text{ daqiiqo} = 1 \text{ saac sidaas awgeed}$

$$120 \text{ daqiiqo} = 60 + 60 \text{ daqiiqo} = 2 \times 60 \text{ daqiiqo} = 2 \times 1 \text{ saac} = 2 \text{ saac}$$

$$\mathbf{t} \quad 570 \text{ daqiiqo} = (540 + 30) \text{ daqiiqo} = 540 \text{ daqiiqo} + 30 \text{ daqiiqo}$$

$$= 9 \times 60 \text{ daqiiqo} + 30 \text{ daqiiqo} = 9 \times 1 \text{ saac} + 30 \text{ daqiiqo}$$

$$= 9 \text{ saac iyo } 30 \text{ daqiiqo}$$

$$= 9:30 \text{ saac}$$

$$\mathbf{j} \quad 2700 \text{ daqiiqo} = 45 \times 60 \text{ daqiiqo} = 45 \times 1 \text{ saac} = 45 \text{ saac}$$

### Tusaale 6

Maalin u bedela

- b** 72 saac **t** 360 saac **j** 2412 saac

**Jawaab**

- b**  $24 \text{ saac} = 1 \text{ maalin sidaas awogeed}$   
 $72 \text{ saac} = (24 + 24 + 24) \text{ saac} = 3 \times 24 \text{ saac} = 3 \times 1 \text{ maalin} = 3 \text{ maalmood}$
- t**  $360 \text{ saac} = 15 \times 24 \text{ saac} = 15 \times 1 \text{ maalin} = 15 \text{ maalmood}$
- j**  $2412 \text{ saac} = (2400 + 12) \text{ saac} = 2400 \text{ saac} + 12 \text{ saac}$   
 $= 100 \times 24 \text{ saac} + 12 \text{ saac}$   
 $= 100 \times 1 \text{ maalin} + 12 \text{ saac}$   
 $= 100 \text{ maalmood} + \text{maalin badhkeed}$   
 $= 100 \text{ maalmood} \text{ iyo badh}$

**Shaqa kooxeed**

- |  |   |
|--|---|
| <b>b</b> $7200 \text{ daqiiqo} = \underline{\hspace{2cm}} \text{ maalmood}$      | <b>t</b> $7200 \text{ ilbiriqsi} = \underline{\hspace{2cm}} \text{ saac}$ |
| <b>j</b> $129,600 \text{ ilbiriqsi} = \underline{\hspace{2cm}} \text{ maalmood}$ |   |

**Laylis 6.2 t**

- |  |   |                                    |  |
|--|---|------------------------------------|--|
| <b>1</b> Daqiiqad u badala   |   |                                    |  |
| <b>b</b> $300 \text{ ilbiriqsi}$   | <b>t</b> $7200 \text{ ilbiriqsi}$   | <b>j</b> $66000 \text{ ilbiriqsi}$ |  |
| <b>2</b> Saacad u badala   |   |                                    |  |
| <b>b</b> $240 \text{ daqiiqo}$   | <b>t</b> $615 \text{ daqiiqo}$  | <b>j</b> $1260 \text{ daqiiqo}$    |  |
| <b>3</b> Meelaha bannaan buuxiya   |   |                                    |  |
| <b>b</b> $30 \text{ ilbiriqsi} = \underline{\hspace{2cm}} \text{ daqiiqo}$ | <b>t</b> $90 \text{ daqiiqo} = \underline{\hspace{2cm}}$                    |                                    |  |
| <b>j</b> $3000 \text{ daqiiqo} = \underline{\hspace{2cm}} \text{ saac}$    | <b>x</b> $4320 \text{ daqiiqo} = \underline{\hspace{2cm}} \text{ maalmood}$ |                                    |  |

**6.2.3 Isugeynta iyo kalagoynta Halbeegyada waqtiga****Isugeyn****Hawlgalka 6.2 J**

Ardayda fasalka<sup>4aad</sup> waxay ku jiraan imtaxaan lagu imtaxaanayo maadooyinka ingiriisiga iyo xisaabta. Imtaxaanka ingiriisiga waqtiga la siiyay waa 1 saac iyo 25 daqiiqo. Xisaabtana waqtiga la siiyay waa 90 daqiiqo.

- b** Labada imataxaan saacadaha la siiyay wadartoodu waa imisa?
- t** Waqt dheer imtaxaanka la siiyay waa kee? Waqt intee in le'eg ah ayuu dheeryahay?

## Tusaale 7

Fardawsa haddii ay 4:30 saac ee habeeninmo inta ay seexato ay muddo 8 saac hurudo saacadu markay imisa tahay ayay toosi?

### Jawaab

Waxay seexatay 4:30

Inta saac ay seexatay 8:00 (8 saac iyo eber daqiiqo)

Wadar 12:30

## Tusaale 8

Hal dugsi waxbarashada waxaa la bilaabaa aroortii saacadu marka ay tahay 2 da saac. Xiisad kasta wixa loo qoondeeyay 45 daqiiadood.

- b**    Xiisada u horaysa saacadu markay imisa tahay ayay dhamaataa?
- t**    Labada xiisadood ee u horeeya ee isku xigta waqtiga ay qaataan wadartoodu waa imisa?
- j**    Waqtiga nasashada (tanafaska) haddii u yahay 3 xiisadood dabadeed imisada saaca ayey biririfta (nasashada) u baxayaan?

### Jawaab

**b**    Waxabarashada waxaa labilaaba 2:00 (2 saac iyo eber daqiiqo) xisaada u horaysaa waxay qaadataa 0:45 (eber saac iyo 45 daqiiqo) wadar 2: 45

Sidaas darteed xiisada u horaysaa waxay dhamaataa 2:45 saac ama 3 saac oo rubuc dhi man

**t**    Xiisada u horaysaa waxay qaadataa 45 daqiiqo labada xiisadood ee u horeeyaa waxay qaadanayaan

$$= (45 + 45) \text{ daqiiqo} = 90 \text{ daqiiqo}$$

$$90 \text{ daqiiqo} = (60 + 30) \text{ daqiiqo} = 1 \text{ sac iyo } 30 \text{ daqiiqo} = 1: 30 \text{ saac}$$

**j**    Saadax xisadood oo isku xigta wadartoodu =  $(45 + 45 + 45) \text{ daqiiqo}$   
 $= 135 \text{ daqiiqo}$

$$135 \text{ daqiiqo} = (60 + 60 + 15) \text{ daqiiqo}$$

$$= 1 \text{ saac} + 1 \text{ saac} + 15 \text{ daqiiqo}$$

$$= 2 \text{ saac iyo } 15 \text{ daqiiqo} = 2: 15$$

Aroorti wax barashada waxaa la bilaabaa 2: 00 saac

Saddax xiisadood oo isku xigta waxay qaataan 2: 15

Wadar 4: 15

Sidaas darteed waqtiga nasashadu waxay ku beegantaa saacadu markay tahay 4: 15 ama 4 ta saac iyo rubuc.

## Tusaale 9

Isugeeya

**b** 5: 45 saac + 1: 15 saac

### Jawaab

$$\begin{array}{rcl}
 5 \text{ saac iyo } 45 \text{ daqiiqo} & & 5:45 \\
 + 1 \text{ saac iyo } 15 \text{ daqiiqo} & & + 1:15 \\
 \hline
 6 \text{ saac iyo } 60 \text{ daqiiqo} & & 6:60 = 7:0
 \end{array}$$

$$6 \text{ saac} + 1 \text{ saac} = 7 \text{ saac}$$

**t** 8:35 saac + 24:40 saac

$$\begin{array}{rcl}
 8 \text{ saac iyo } 35 \text{ daqiiqo} & & 8:35 \\
 + 2 \text{ saac iyo } 40 \text{ daqiiqo} & & + 2:40 \\
 \hline
 10 \text{ saac iyo } 75 \text{ daqiiqo} & & 10 : 75 = 11:15
 \end{array}$$

$$\begin{aligned}
 &= 10 \text{ saac} + 75 \text{ daqiiqo} \\
 &= 10 \text{ saac} + 60 \text{ daqiiqo} + 15 \text{ daqiiqo} \\
 &= 10 \text{ saac} + 1 \text{ saac} + 15 \text{ daqiiqo} = 11: 15 \text{ saac}
 \end{aligned}$$

### Laylis 6.2 J

**1** Isugeeya halbeegyada waqtiga

- b** 2 saac iyo 15 daqiiqo + 1 saac iyo 10 daqiiqo
- t** 3 saac iyo 40 daqiiqo + 5 saac iyo 25 daqiiqo
- j** 3 saac iyo 55 daqiiqo + 5 saac iyo rubuc

**2** Idaacad raadiyaha aha ah ayaa barnaamijyadeeda saddax af ku sii daysa. Idaacadu barnaamiy yadeeda ay si isugu taxan ayay sidan u siidaysaa.

Barnaamijyadeeda waxay si isku taxan ku si daysaa soomaaliga mudo 1:25 oromaha mudo 1:30 saac iyo tigre oo qaata mudo 1:15 saac. Idaacadu saddaxda af mudo imisa saacadood ah ayay barnaaj yadeeda ku siidayn.

**3** Nin beerqodal ah ayaa aroor 1:45 saac into kabiliaaby mudo 3:30 saacadood xidhiidh beerta marku qoday dabadeed ayuu dibidii inay daaqaan furay saacadu markay imisa ahayd ayuu dibida u harqood ka kafuray?

**4** Laba kooxood oo kubada cagta ciyaara ayaa ciyaar toodu bilaabay saacadu markay ahayod 8:30 maalin nimo. 90 daqiiqadood markay dhamaysteen waqtii caadiga makala badin. Sidaas darteed 5 daqiiqo markay nasteen dabadeed ayaa 30 daqiiqadood oo loogu daray markay ciyaareen dabadeed ayay ayaartii dhamaatay. Ciyaarto imisadil saacadood ayay dhamaatay?

## Kalagoyn

### Tusaale 10

Tartan orodka maraatoonka tartamayaashii ka qaybgalay kuwii ku guulaystay ee kaalinta 1<sup>aad</sup> ta 2<sup>aad</sup> iyo ta 3<sup>aad</sup> soo baxay waqtiyaday orodka ku dhameeyeen waa sidan soo socota kaalinta 1<sup>aad</sup> kabaxay wuxu orodka ku dhamaystiray 2 saacayo 4 daqiao iyo 26 ilbiliqisi ka 2<sup>aad</sup> wuxu ku dhameeyay 2 saac 6 daqiiqo iyo 10 il biriqsi ka 3<sup>aad</sup> wuxu ka dhameeyay 2 saac iyo 7 daqiiqo.

- b** Ka 2<sup>aad</sup> ka noqday ka 1<sup>aad</sup> ka noqday waqtii intee le'egayuu dib ugadhacey?
- t** Ka 3<sup>aad</sup> ka noqday ku 2<sup>aad</sup> ka noqdoy intee in le'eg ayudib uga dhacay?

#### Jawaab

Ka 2<sup>aad</sup> ka noqday waxay kaqaadatay 2 saac 6 daqiiqo iyo 40 ilbiriqa 2:06:40

Ka 1<sup>aad</sup> ka noqday waxay ka qaadatay 2 saac 4 daqiiqo iyo 26 ilbriqis 2:04:06

$$\begin{array}{r}
 \text{sidaas darteed} \quad 2:06:40 \\
 + 2:04:26 \\
 \hline
 0 \text{ saac } 2 \text{ daqiiqo iyo } 14 \text{ ilbirigsi ama } 0:02:14
 \end{array}$$

Sidaas darteed ka 2<sup>aad</sup> ka noqday ka 1<sup>aad</sup> ka noqday wuxu dib uga dhacay undo 2 daqiiqo iyo 14 ilbirigs.

$$\begin{array}{r}
 \text{t} \quad \text{Ka 3<sup>aad</sup> ka noqday waxay ka qaadtay 2 saac 7 doqiiq iyo 0 ilbirqis.} \\
 \qquad \qquad \qquad \underline{2:07:00} \\
 \text{Ka 2<sup>aad</sup> ka noqda 2 saac 6 daqiiqo iyo 10 albiriql.} \quad \underline{-2.06.10} \\
 \qquad \qquad \qquad 2.07.00 \\
 - \underline{2.06.10} \longrightarrow 2:06:60 \\
 \qquad \qquad \qquad \underline{2:06:10} \\
 \qquad \qquad \qquad 00:00:50
 \end{array}$$

Ka 2<sup>aad</sup> kanoqday ka 1<sup>aad</sup> ka noqday wuxu dib uga dhacay mudo 2 daqiiqo iyo 14 ilbriqis.

0 ilbriqsi 10 ilbirigsi la gama goyn karo. Sidaas darteed 7 daqiiqo 1 daqiiqo inta an ka amaan-hano oo an u badalno 60 ilbriqsi ayaan u geynay naa 0 ilbriqsi ( $0 + 60 = 60$ ) imika 60 ilbriqsi 10 ilbirigsi waan ka goyn karnaa waxaana soo hadhaq 50 ilbriqsi kadib daqiqadaha ayaan kala goynaynaa maadaama 07 daqiiqo laga amaaahday 1 daqiiqo wuxu u haday 06 daqiiq 0.

Sidaas darteed 06 daqiiqo – 06 daqqiyo = 00 daqiiqo kadibna saacadaha ayaan kaa goynaynaa 2 saac – 2 saac = 0 saac

Sidaas darteed ka 3<sup>aad</sup> ka noqday ka 2<sup>aad</sup> ka noqday 50 ilbirqsi ayuu dib uga dhacay.

**Laylis 6.2 x**

- 1** Waxabarashada 2:30 saac la bilaabay hadi ay dhamaato 6:30 saac imisa saac ayay wax barashadu qaadatay?
- 2** Idaacad ayaa barnaamij faafinteed bilawday saacadu markay ahayd 8:00 saac ee maalinimo barnaamijkeedu hadii u dhamaaday 5 saac ee habeenimo imisa saacadood ayay idaacadu hawada ku jirtay.
- 3** Ciyaaryaan ordaa ah ayaa orodka 10,00 miitr ku dhameeyay 27 daqiiqo iyo 32 ilbirqsi. Ciyaartaan qudhisa ayaa orodkan 10,000 mitir tartan u meelkale ka galay ku dhameeyay 26 daqiiqo iyo 42 ilbirqsi.
  - b** Orodagani xawligu kui ordhayay miyuu kordhiyay mise wuu naaquesay?
  - t** Labada orod u ka qaybgalay farqigoodu waa inte in le'eg?
- 4** Dahab waxay ku jirta oo ay qaadanaysaa imtaxaan maadad xisaabta waqtiga guud ee imta xaanka la siiyay waa 1:45 saac. Hasayeesha e dahab waxay imtaxaanka ku dhamaysay 80 daqiiqo waqtiga loo qoondeeyey intee in le'eg ayay ka hor dhamaysay?
- 5** Kalagooya
 

<b>b</b> 6 saac iyo 2 daqiiq – 4 saac	<b>t</b> 8 saac iyo 15 daqiiq – 7 saac iyo 30 daqiiqo
<b>j</b> 10:35 saac – 4:25 saac	<b>x</b> 3:30 saax – 2:40 saac
<b>kh</b> 5.25 saac – 4:30 saac	

**6.3 ISBARBAR DHIGIDDA HALBEEGYADA WAQTIGA**

Shaxdan hoose marka ad u fiirsatiin dabadeed suaalaha ka jawaaba.

Waqtiga imtaxaanku la siiyay	
imtixaanka xisaabta	1:45 saac
Intaxaamka Ingrisiga	100 daqiiqo

- b** labada imtaxaan ka waqtiga dheer la siiyay waa kee?
- t** waqtiga la siiyay ka yar kaga bilaaba oo horsanaan oo qora

**Tusaale 1**

Xasan iyo Maryan dugsigooda ilaa guryahooda ayay u soocdaan. Xasana wuxuu guriga gaadhay 10 saac oo rubuc dhiman. Maryan na waxay gurigeeda gaadhay 9:45 saac. Labada mid-koodee baa guriga u hor gaadhay?

**Jawaab**

Xasan wuxu gurigooda gaadhay 10 saac oo rubuc dhiman

$$= 10 \text{ saac} - 15 \text{ daqiiq} = 9:45$$

Sidoo kale Maryanna waxay gurigooda gaadhay 9:45 saac sidaas darteed lablooduba waqtii isku mid ah ayay guryahoodu gaadheen.

$$10 \text{ saac} \text{ oo rubuc dhiman} = 9:45 \text{ saac}$$

## Shaqo-kooxeed

Shaxdan hoose u fiirsada kadibna waydiimahan ka jawaaba.

<b>Maalin</b>	Waqtiga iyo muddada uu roobku da'ay
<b>Isniin</b>	Aroor 12:00 – aroor 1:15
<b>Talaata</b>	8:15 maalinnimo – 9:20 maalin nimo
<b>Arbaca</b>	1:30 fiidkii – 2:50 fiidkii

- b** Maalintee ayuu mudo dheer da'ay?
- t** Maalintees ayuu mudo gaaban da'ay?
- j** Roobku mudoooyinku da'ay mudada yar idinka oo ka bilaabaya horsanaan u qora.

## Laylis 6.3

- 1** Ardo, Safiya iyo Dayib ayaa loo dhiibay shaqo isku mid ah. Ardo shaqada waxay ku damaystirtay 2 saac iyo 5 daqiqo. Safiyana 128 daqiqo oo qudhaata Dayib na 125 daqiqo iyo 45 ilbiriqsii kooda hore u dhameeya abaal gud ayaa lasiin. Siddas darteed,
  - b** koodee baa abal gudka mudan in u qaato?
  - t** midka ay shaqadiisu dib udhacaday waa kee.
  - j** mudoooyinka ay shaqada ku dhameeyeen mudada yar kagabilaaba oo horsanaan u qora.
- 2** Shaxdan soo socota waxaa lagu sharraxay waqtiga iyo muddada ay Ismaaciil, Nuur iyo Sahra ay casharadooda ku xafidaan.

<b>Waqtiga iyo muddada xafidaada</b>	
Ismaaciil	Habeenkii 1:30 – 4:00
Nuur	Galabtii 11:00 – 1:00
Sahra	Subaxa daakiraada 10:00 – 1:00

- b** Saddexda kee baa mudo dheer xafida?
  - t** Saddexda kee baa mudo gaaban xafida?
  - j** Ardaydu mudoooyinka ay xafidaan mudada weyn kaga bilaaba oo ilaa mudada ugu yar horsanaan u qora.
- 3** Kee baa badan
    - b** 6000 ilbiriqsi ama 600 daqiqo? **t** 6000 ilbiriqsi ama 1 sac iyo 30 daqiqo?
    - j** 800 daqiqo ama 13 saac?
  - 4** Ka yar ilaa ka weyn horsanaan u qora
    - b** 90 daqiqo, 1 saac iyo 35 daqiqo; 5000 ilbiriqsi
    - t** 3200 ilbiriqsi, 60 daqiqo: 1 saac iyo 5 daqiqo
    - j** 420 daqiqo, 25200 ilbiriqsi, 7 saac

## Cutubka

# 7aad



## URURINTA IYO HABAYNTA XOGAHA

### 7.1 DHISIDDA GARAAF LAYDIYEEDKA

#### 7.1.1 Ururinta xogta

##### Hawlgal 7.1 b

Sawiradan hoos ku tusan eega oo fiiro gaar ah u yeesha



Sawirada noocyahooda iyo tiradooda inta ad tirisiin sida hoostan loogu cadeeyay idinka oo raacaya oo isla markaana isticmaalaya xariijimo iyo astiro shaxda buuxiya (mida koowaad tusaala ahaan waa la idin kashaqeyay).

- |                      |                           |
|----------------------|---------------------------|
| 1 Haday tahay /      | 6 Haday yihiiin ### ////  |
| 2 Haday yihiiin //   | 7 Haday yihiiin ### ////  |
| 3 Haday yihiiin ///  | 8 Haday yihiiin ### ////  |
| 4 Haday yihiiin //// | 9 Haday yihiiin ### ////  |
| 5 Haday yihiiin ###  | 10 Haday yihiiin ### //// |

Xogta la soo ururiyay oo sawiro lagu sharraxay	Tiradooda oo xariijimo lagu miijiyay	Tiradooda oo astiro lagu qoray
	###	5

## Hawlgal 7.1 t




Idinkoo egaya xolaha daaqaya shaxda hoos ku xusan buugina ku guuriya kadib buuxiya meelaha banaan

Xogta si aan u uruurino  
maxaa loo bahan yahay  
inaan samayno



Haa ! aad ayay u dhib yar tahay

- 1 Si daganaansho leh waa inaan u fir sano
  - noocyada iyo tirada sawirada
- 2 Wawa loo bahan yahay inaan samayno
  - Xasuus qor inaan haysano
  - Xogta aan ururinay anaga oo adeegsanayna shax waa in aan sharraxnaa



Tirada oo xariijiimo  
ku tusan

Tirada oo astiro lagu  
qoray


### Laylis 7.1.1

- 1 Fasalkiina ardayda aad wax ku wada baratiin da'dooda inta ad weydiisiin kuwa 10 jirka ah iyo kuwa da'doodu ay ka yar tahay 10 sano, sidoo kale kuwa ay da'doodu 10 sano ku weyn tahay inta ad diiwaanisiin shax ku muujiya.
- 2 Dugsigiina dhaxdiisa inta ad kormeertiin xog ku saabsan qololka dugsiga ka dhisan inta fasalo wax lagu barto ah iyo inta xafiisyo ah inta ad soo ururusiiin shax ku muujiya.
- 3 Idinka oo koox koox ah lacagta qadaadiicda ee shanta saanti ah 20 jeer inta ad kor u tuurtiin inta jeer ee ay u dhacday dhinaca wajigeeda u dadku ku sawiran yahay iyo inta jeer ee ay u dhacday wejigeeda u libaaxu ku sawiran yahay inta ad diwaangaliisiin shax ku muujiya kadibna shaxdiina kooxaha kale shaxdooda barbardhiga.
- 4 20 arday oo ka mid ah ardaya fasalkiina waydiiya nooco khudaarta ay jecel yihiin. Kadibna xogta aad ururiseen shax inta ad ku sharraxdiin koxdiina ardayda ka tirsan u cadeeya.

## 7.1.2 Dhisidda garaaf laydiyeedka fudud ee xogta la soo ururiyo

Haatan kahor Hawlgalka 7.1.B dhaxdeeda shaqadii aad ka soo shaqayseen ee ku saabsanayd xogta shimbiraha, bisadaha iyo diyaaradaha sidan soo socota ayaa shax iyo garaaf laydiyed loogu sharixi karaa.

Xogta la soo uruuriyay	Tirade oo lagu qoray xariijimo	Tirada oo astiro lagu qoray
	///	5
	///	8
	/// /	6



### Shaqa kooxeed

Su'aalahan soo socda inta aad ka wada tashatiin ka jawaaba idinka oo jawaabihiiна ku salaynaya garaaf ladiyeedka korka lagu muujiyyay.

- 1 Garaafka dhaxdiisa xariiqaa gudban hoostiisa magaacda lagu qoray maxay inoo tilmaamayaan?
- 2 Maxay inoo tilmaamayaan tirooyinka 0 ilaa 10 ay ku qoran xariiqaa jooga ah (xariiqaa qotomsan)?
- 3 Giraafka dhaxdiisa imisa laydiyo dhidban ayaa inoo muuqda? Laydi kasta dhererkiisu muxuu tilmaamayaa?
- 4 laydiga ugu dheer tirada lasiman waa imisa? muxuuse inoo til maamayaan
- 5 laydiga ugu yar tirada la barbar siman waa imisa? muxuuse tilmaamayaan?
- 6 xariiqaa dhidban tirada 5 ee ku qoran muxuu tilmaamayaa?
- 7 Dhererka laydiyadu miyay kala duwan yihiin? Waayo? Balacooduse?
- 8 Foogaanta u kala dhaxeeyaa laydiyada miyay kala duduwan yihiin?
- 9 xariiqaa dhidban tirooyinka lagu qoray 0 ilaa 10 foogaanta laba kasta u dhaxaysa miyay isle'egtahay?

## U FIIRSADA

- *Laydi walba waxa loo yaqana baar*
- *Garaafkiisana waa baar-garaaf (garaaf laydiyeed)*

### *Qalabka loo sawirana*

- *Xariiq jog ah iyo xariiq jiif ah oo midba ka kale qotome u yahay ayaa la sawiri.*
- *Xariiqa jog ah waxaa loo qaybin fogaano yar yar oo isle'eg*
- *Tirooyinka ku yaala xariiqa joga ah waxay tilmaamaan tirada shayga xogta ka tirsan*
- *Xariiqa jiifka ah noocyada xogta ayay tilmaamaysa*
- *Dhererka laydiga sawiraadiisa waxaa lagu saleeya tirada xogta*
- *Balaca laydiyadu way iswada le'eg yihiiin.*
- *Fogaanta u dhaxaysa laydiyada way isle'eg tahay.*


## Tusaale

20 arday oo laga warsaday madooyinka ay aadka u jecel yihiiin jawaabaha ay ka bixiyeen inta la uruuriyay oo la habeeyay ayaa shaxdan hoose lagu sharraaxay.


Nooca madada	Tirade oo xariijimo lagu qoray	Tirada oo astiro lagu qoray
Xisaab	/// //	7
Ingiriis	///	5
Af-somaali	//	6
Cilmiga deegaanka	///	4

Xogta shaxda sare lagu sharraaxay si aan ugu muujino garaaf-laydiyeed waxaan isticmaalaynaa talaabooyinkan soo socda ee hawlfulinta ah.

Talaabada 1<sup>aad</sup> samaynta (sawirida) xariiqa jog ah iyo xariiqa jiif ah oo isku qotoma.



Tlaabada 2<sup>aad</sup> Dhisidda (sawirida) garaaf laydiyeedka.



### Laylis 7.1.2

- 1** Shaxdan hoose waa shax lagu sharraay xog ku saabsan booqasho ay sameeyeen ardayda dugsiga sare ee shekh Cabdislaan ee sanadkii 2001 T.I.

Gobaha ay booqdeen	Tirade ardayda booqatay
Baarkiga awaash	80
Wabiga shabeele marku goday marayo	50
Gidaarka taariinkhiga ee magaalada Harar	70

Xogta ku saabsan booqashada ardayda ee shaxda lagu diwaan galiyey idinka oo ku salaynaya garaaf laydiyed ku muujiya.



- 2** Xog ku saabsan biladihi lagu helay tartanadii dhaxmarya jaamacadaha sanadkii 2001 T.I ayaa shaxdan hoose lagu muu jiyay.

Jaamacadaha	Tirade biladahaa ee la helay
Maqale	35
Adhama	25
bahardhaar	30


Xogta shaxda sare lagu muujiyay ee ku saabsan biladaha ay jaamacaduhu tartanka ku heeleen garaaf laydiyed ku muujiya.

Shaxdan soo socota waxaa lagu sharraay oo ay ka warbixinaysaa yuusuf, Aamina iyo cabdiraxmaan dibcaha natijjooyinka ay ka keeneen maadooyinka xisaabta iyo ingiriisiga.

Magaca ardayga	Dhibcaha xisaabta	Dhibcaha ingiriisiga
Yuusuf	65	76
Aamina	70	80
Cabdiraxmaan	80	90



Natijjooyinka ardayda inkasta oo la doorbido in maaddo walba kaligeed lagu muujiyo garaaf laydiyed hadana natijjooyinka labada maadooyin hal garaaf laydii waa lagu muujin karaa.



### Shaqo kooxeed

Suu aalahan soo socda ka jawaaba.

- 1 Garaafka kor ku xusan qaybta midabka cas lagu qalimeeya maxay tilmaamaysaa? Qaybta midabka buluuga lagu qalimeeyayse?
- 2 Garaafka korka sida aad ku aragtii wuxuu leeyahay laba laba laydiyo oo midi cas yahay midna cagaar yahay oo la isku dhaweyay. Hadaba isku dhaweyntu maxay tilmaamaysaa?

### Laylis 7.j.3

- 1 Xogtan hoos ee la idin siiyay hal garaaf laydiyed ku muujiya.

Xog ku saabsan iibka tigidhada lagu galoo kale duwan oo la booqdo.

Mee laha la booqdo	Qiimaha tigidhka oo Birr ah	
	Caruurta	Dadka waweyn
Goobta yaxaaska lagu dhaqo ee arba minjii	3	5
Baarkiga Awaash	5	7

- 2 Xogtan soo socota ee la idin siiyay hal garaaf-laydi ku muujiya.

Sanado kale duwan qiimaha khudaarta ee jiray kilo ahaan.


Nooca khudaarta	Qiimaha khudarta kilo ahaan	
	2000 t.i	2001 t.i
Liin macan	8 Birr	10 Birr
Muus	6 Birr	8 Birr
Canbe	9 Birr	11 Birr

## 7.2 **MACNAYNTA IYO SHARRAXIDDA XOGTA LAGU MUUJIYAY GARAAFLAYDIYEED**

### Hawlgalka B

Xaafad ka mid ah deegaankeena shimbiraha laga heelo noocya-hooda iyo tiradooda xog ku saabsan ayaa garaaf-laydiyedkan soo socda lagu muujiyay. Idinka oo garaaf-laydiyedkan u cus-kanaya su'aalahan soo socda ka jawaaba.


- 1 Imisa gugule ayaa jira?
- 2 Xafada imisa haad ayaa jira?
- 3 Gabi ahaan waa imisa tirada guud ee shinbiriyhu?
- 4 Nooca Shimbiraha ugu badan waa ku wee?
- 5 Shimbiraha nooca ugu tirada yari waa ku wee?
- 6 Faraqa u dheeexeyya shimbiraha tiradooda ugu weyn iyo kuwa ugu yar waa imisa ?



### Hawlgalka

Ardayda fasalka 4<sup>aad</sup> ee B barata ayaa la waydiiyay nooca sharaabka ee ay aad u jecel yihin. Kadibna jawaabaha ay bixi-yeen ayaa garaafil aydiyedkan hoose lagu muujiyay. Idinka oo ku salaynayaa garaaf-ladiyedka su'aalaha ka jawaaba

- 1 Imisa ardaya ayaa dooratay kookaha?
- 2 Imisa arday ayaa doortay mariindaha?
- 3 Imisa arday ayaa beesiga dooratay?
- 4 Garaafka dhaxdiisa tirada 25 maxay tilmaamayaasaa?
- 5 Sharaabka ay dooratay arday tiradoodu yar tahay waa nooce?
- 6 Dhammaan tirada ardayda ee fasalka arday walba waxaa u doortay nooc saddexda sharaab ka mid ah. Sidaas darteed tirada ardayda fasalka ka barataa waa imisa?



## 7.3 **CELCELISKA ILAA 4 TIRO**

### Tusaale

Shaxdan soo socota waxaa lagu muujiyay ardayda kala ah Xaliimo, Ugaaso iyo Cusmaan natii-jada ay ka keeneen maadadda xisaabta iyo maadadda ingriisiga. Ardayga natijjooyinkiisa laba-da maado celceliskoodu u ka sareeyo 75 waxaa la siin abaal marin. Sidaas darteed saddex arday midka abaal marinta hantiyi waa kee (tee)?

Magaca ardaya	Natiijada xisaabta	Natiijada inqriisiga
Xaliimo	50	81
Ugaaso	65	85
Cusmaan	70	90

### Jawaab

Habka loga shaqeeyo

- 1 Arday waliba natijadiisa labada maado ayaan isku geynaynaa.
- 2 Wadarta madooyinka waxaan u qaybinaynaa tirade noocayha maadooyinka (tusaalahan tiradu waa laba).
- 3 Natiijada (qaybta ) waxaa loo yaqaanaa celclis.

Anaga oo taasi raad raacayna

$$\text{Celceeliska xaliimo } \frac{55 + 81}{2} = 68$$

$$\text{Celceeliska ugaaso } \frac{65 + 85}{2} = 75$$

$$\text{Celceeliska cusmaan } \frac{70 + 90}{2} = 80$$

Si loo helo celceliska tirooyin kala duwan dhammaan tirooyinka inta la isugeeyo ayaa wadarta loo qabiyyaa tirooyinku inta (tirada) ay ka kooban yihiin.

$$\text{Celceelis } 5 \text{ iyo } 3 \text{ waa } \frac{5 + 3}{2} = 4$$

Sidaas darateed ardayga cusmaan madama u helay celceeliska ka sareeyo 75 wuxuu mutay-stay in uu abaal gud uu hello

### Shaqo koox ah

- 1 Ardayadda khardra 3 maadooyin natijjooyinka ay ka heshay waa 55, 65 iyo 75. Waa imisa celceeliska 3 maadooyin ee khadra?
- 2 Khadiija oo ardayad ah natijjooyink ay afar maadooyin ka keentay waa 45, 55, 65 iyo 75. Labada arday khadra iyo khadiija midkoodee baa celeliska natijjooyinkoodu u badan yahay?

### Laylis 7.3

- 1 Muna 3 maadooyin natijjooyin ay ka keentay waa 85, 90, 95. Waa imisa natiijada celceeliska muna?
- 2 Cige maalinwalba wuxuu sameeyaa tababar orod ah. Saddexdii maalmood ee la soo dhaafay maalinkasta tababarada uu sameeyay waxay dhanaa yeen 75 daqiiqo, 65 daqiiqo iyo 85 daqiiqo. Cige maalin kasta imisa daqiiqo oo celcelis ah ayuu tababarka sameeyay?
- 3 Diyaaradaha rakaabka ee Itoobiya ayaa maalinkasta dadka safarka ah u qaaday Adis Aababa ilaa Diridhaba. Xafiiska u qaybsan tigidh diyaaraduhu afar maalnood tirada rakaabka ee uu qaaday sidan hoose ayuu, diiwaan galiiyay: 450, 670, 780, 560 waa imisa maalinkasta ceceliska dadka safarka ah ee Diri dhaba taga?